# Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

# Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha ee 2018

Waxaa uu dhaqangalayaa laga bilaabo

31 Maarso 2018

**Xeer-nidaamiyaha #8: Xeer-nidaamiyaha Dejinta *Buugga Siyaasadaha iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dowladda***

M.A

## TUSAALAHA FOOMKA WAX-KA-BEDELKA

| Wax-ka-beddelka Foomka Codsiga Qorshaha Wax-soo-iibsiga * | | |
|---|---|---|
| **Sharaxaadda iyo Lr. Wax-soo-iibsiga** | **Codsiga Wax-ka-beddelka** | **Isbeddelka Guud ee La Qiyaasay (USD)** |
| *Lambarka aqoonsiga wax-soo-iibsiga (haddii loo baahan yahay) iyo sharaxaad* | *Sharaxaadda waxa la codsaday marka loo eego isbeddelka lagu sameynayo Qorshaha Wax-soo-iibsiga (oo ah, wax-soo-iibsiga dheeraadka ah, beddelka habka wax-soo-iibsiga, beddelka qaddarka miisaaniyadda, beddelka taariikhaha la qorsheeyay iwm.).* | *Qiimaha, oo USD ah, ee beddelka wax-soo-iibsiga ee la codsaday. Loo adeegsado in lagu go'aamiyo guud ahaan, saameynta uu ku yeelanayo kharashka la qiyaasay ee wax-ka-beddelka la codsaday* |
| **Cududaar/Sabab Wanaagsan** | | |
| *1) Cududaarka koowaad ee wax-ka-beddelidda Qorshaha Wax-soo-iibsiga* | | |
| | | |
| *2) Cududaarka labaad ee wax-ka-beddelidda Qorshaha Wax-soo-iibsiga (haddii la adeegsan karo)* | | |

*Foomkan waa in loo soo gudbiyo sida lifaaqa Qorshaha Wax-soo-iibsiga ee wax laga beddelay ahaan.

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE
HIRSHABELLE STATE OF SOMALIA

M.A

Xeer-nidaamiyaha #8: Xeer-nidaamiyaha Dejinta *Buugga Siyaasadaha iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dowladda*

Tusmo


1. AWOODDA IYO HADAFKA .......... 1

**1.1 Awoodaha** .......... 1

**1.2 Ujeeddada iyo Baaxadda** .......... Error! Bookmark not defined.

**1.3 Taariikhda Dhaqangalka** .......... 1

**1.4 Luuqadda Rasmiga ah iyo Adeegsiga Habboon ee Af Soomaaliga** .......... 1

2. GUDDIGA WAX-SOO-IIBSIGA, KORMEERKA IYO ILAALINTA DIIWAANADA .......... 2

**2.1 Guddiga Wax-soo-iibsiga** .......... 2

**2.2 Diiwaanada Wax-soo-iibsiga** .......... 2

3. QORSHEYNTA, HIRGELINTA IYO KA-WARBIXINTA WAX-SOO-IIBSIGA .......... 3

**3.1 Qorshaha Wax-soo-iibsiga** .......... 3

**3.2 Shuruudaha iyo Ansixinada Qorshaha Wax-soo-iibsiga** .......... 3

**3.3 Tusmada iyo Habka Abaabulka ee Qorshaha Wax-soo-iibsiga** .......... 3

**3.4 Wax-ka-beddelka Qorshaha Wax-soo-iibsiga** .......... 3

**3.5 Maamulka Guddiga Wax-soo-iibsiga waa in uu Shaaca-ka-qaado Wax-soo-iibsiga Aan Habboonayn** .......... 3

4. QABASHADA IYO MAAMULIDDA SOO-IIBSIGA ALAABADA, SHAQOOYINKA IYO ADEEGYADA AAN LA-TALINTA AHAYN .......... 4

**4.1 Hordhac** .......... 4

**4.2 Tixgelinta Guud** .......... 4

**4.3 Iska-horimaadka Danaha** .......... 6

**4.4 Xaq-u-yeelashada** .......... 5

**4.5 Maalgelinta Wadajireed ama La Wadaago** .......... 8

**4.6 Khayaanada iyo Musuqmaasuqa** .......... 6

**4.7 Falanqaynta Qiimaha Macquulka Ah** .......... 7

**4.8 Qandaraaska Lagu Tartamo** .......... 7

**4.9 Dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska** .......... 8

**4.10 Jaangooyooyinka iyo Tilmaamaha Gaarka ah ee Farsamo** .......... 10

**4.11 Qiimo-goynta** .......... 11




M.A

**5.17 Ilaalinta Sirta La Xiriirta** ........ 42
**5.18 Hababka Kale ee Xulashada** ........ 42
**5.19 Taxnaansho/sii-socosho** ........ 45
6. NOOCYADA QANDARAASKA IYO QODOBADA MUHIIMKA AH ........ 46
**6.1 Qandaraaska Qiimaha Go'an** ........ 46
**6.2 Qandaraas Waqti Ku Saleysan** ........ 46
**6.3 Qandaraaska Kharashka Dib-loo-bixin Karo** ........ 47
**6.4 Qandaraaska Boqolleyda ah** ........ 47
**6.5 Gaarsiinta Aan Xadka Go'an Lahayn iyo Qandaraaska Tirada Aan Xadka Go'an Lahayn** ... 47
**6.6 Shuruudaha iyo Qandaraasyada Heshiiska Iibka ee Aan Xaddinayn Leh** ........ 47
7. QANDARAAS- HOOSAAD KU BIXIN ........ 47
8. HABRAACYADA XAQIIJINTA XAQ-U-YEELASHADA ........ 48
**8.1 Hordhac** ........ 48
**8.2 Liiska Sharikadaha uu Ka-mamnuucay/Ka-reebay Bankiga Adduunka** ........ 30
Lifaaqa 1aad. Shuruudaha Ansixinta ........ 31
Lifaaqa 2aad. ........ 32
Tusaalaha Heshiiska Ilaalinta Sirta ee Guddiga Qiimaynta Farsamo ........ 32
Lifaaqa 3aad. Tusaalaha Foomka Wax-ka-beddelista iyo Qorshaha Wax-soo-iibsiga ........ 33
Lifaaqa 4aad. Habraac ku saabsan Qorista iyo Dib-u-eegista Shuruudaha Tixraaca ........ 58
Ujeeddada iyo Shaqada Shuruudaha Tixraaca ........ 58
Lifaaqa 5a. Tusaalaha Ogeysiiska Wax-soo-iibsiga Guud ........ 62
Lifaaqa 5b. Tusaalaha Ogeysiiska Wax-soo-iibsiga gaarka ah ........ 40
Lifaaqa 6aad. Habraac ku saabsan Falanqaynta Qiimaha Macquulka ah ........ 42
Lifaaqa 7aad. Tusaalaha Habdhaqanka Caalamiga ah ee Tusmaynta Faylka Qandaraaska ee Ugu Wanaagsan ........ 44
Lifaaqa 8aad. Guddiyada Qiimaynta Farsamo iyo Dib-u-eegista Tartanka Qandaraaska ........ 75



M.A

## Ereyo la soo gaabshay

| | |
|---|---|
| **BEP** | Bid Evaluation Panel/ Guddiga Qiimaynta Tartanka Qandaraaska |
| **BDS** | Bid Data Sheets/Xaanshiyada Xogta ee Tartanka Qandaraaska |
| **FBS** | Fixed Budget Selection/Xulashada Miisaaniyad Go'an |
| **GCC** | General Conditions of Contract/Shuruudaha Guud ee Qandaraaska |
| **GPN** | General Procurement Notice/Ogeysiiska Guud ee Wax-soo-iibsiga |
| **IDIQ** | Indefinite Delivery and Indefinite Quantity / Gaarsiinta/Geynta Aan Xadka Lahayn iyo Tirada Aan Xadka Lahayn |
| **IFB** | Invitation for Bids/ Casumaadda Tartan Qandaraas |
| **[FMS]** | Federal Member State/ Dowlad-goboleedka |
| **ISO** | International Standards Organization/ Hay'adda Caalamiga ah ee Jaangooyooyinka |
| **ITC** | Instructions to Consultants/ Amarro ku socda La-taliyeyaasha |
| **LCS** | Least Cost Selection/Xulashada Kharashka Ugu Yar |
| **LOI** | Letter of Invitation/ Waraaq Casumaad |
| **PPM** | Procurement Procedures Manual/ Buugga Habraacyada Wax-soo-iibsiga |
| **QBS** | Quality Based Selection/Xulashada Ku Saleysan Tayada |
| **QCBS** | Quality and Cost Based Selection/Xulashada Ku Saleysan Kharashka iyo Tayada |
| **REOI** | Request for Expression of Interest/Codsiga Qoraal Tilmaamaya Danayn |
| **RFP** | Request for Proposal/Cosiga Soo-jeedinta |
| **SBD** | Standard Bidding Documents/Dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska ee Caadiga ah |
| **SCC** | Special Conditions of Contract/ Shuruudaha Gaarka ah ee Qandaraaska |
| **SPN** | Specific Procurement Notice/Ogeysiiska Wax-soo-iibsiga ee Cayiman |
| **SSS** | Single Source Selection/Xulashada Halka Meel |
| **TEP** | Technical Evaluation Panel/Guddiga Qiimaynta Farsamo |
| **TOR** | Terms of Reference/Shuruudaha Tixraaca |



M.A

## 1. AWOODDA IYO HADAFKA

### 1.1 Awoodaha

1.1.1 Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaaqaadayo Qaybta 6aad, Faqradda 3aad, Qaybta 7aad iyo Qaybta 30aad, Faqradaha 5aad iyo 6aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2018. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha waxaana sida ay dhigeyso Qaybta 7aad uu marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka.

### 1.2 Ujeeddada iyo Baaxadda

1.2.1 Mabaadii'da, sharciyada, iyo habraacyada lagu dhigay Xeer-nidaamiyahan Siyaasadda iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga ee Dowladda waxaa uu u qaabeysan yahay Buug ahaan ("Buugga Habraacyada Wax-soo-iibsiga" ama "PPM") waa in uu maamulo dhaqanka iyo maamulka soo-iibsiga alaabada, shaqooyinka, La-taliyeyaasha iyo adeegyada aan La-talinta ahayn ee Dowlad-goboleedka ee loo baahan yahay in la helo si loo fuliyo shuruudaha miisaaniyadda ama mashaariicda horumarineed ee ay bixisay iyo/ama ay maalgelisay Dowlad-goboleedka ama lagu maalgeliyo maaliyadaha ay bixiyaan Deeq-bixiyeyaal kasta ee caalami ah, ee laga baraandego iyada oo loo marayo Xisaabta Midaysan ee Khasnadda Dowlad-goboleedka haddii Deeq-bixiyeyaasha la sheegay ay si gaar ah u oggolaadaan adeegsiga habraacyo wax-soo-iibsi kale mooyaane.[1]

### 1.3 Taariikhda Dhaqangalka

1.3.1 - Waa in uu dhaqangalo isla taariikhda la ansixiyo.

### 1.4 Luuqadda Rasmiga ah iyo Adeegsiga Habboon ee Af Soomaaliga

1.4.1 Luuqadda Ingiriiska waa luuqadda hawlgalka rasmiga ah ee dokumeentiyada, diiwaanada iyo warbixinada wax-soo-iibsiga ee Dowlad-goboleedka; iyada oo turjumaadda Af-Soomaaliga ah loo arko mid la aqbali karo.

---

[1] *[FMS] PPM waxaa uu ku saleysan yahay "Guidelines: Procurement Under IBRD Loans and IDA Credits May 2004, lagu noqday Oktobar 2006" iyo Guidelines: Selection and Employment of Consultants ee Amaahdayaasha World Bank Borrowers, May 2004, lagu noqday Oktobar 2006". © 2004 ee International Bank for Reconstruction and Development The World Bank. Xuquuqdu Way Dhawrsan tahay. Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo http://www.worldbank.org*



M.A

1.4.2 Si loo ogolaado tartan cadaalad ah oo furan iyo ka mid noqoshada kayaanada iyo shaqsiyaadka degaanka, dhammaan xayaysiinada qandaraasyada iyo ogeysiisyada bixinta qandaraasyada waa in lagu soo dhejiyo luuqadaha Af-Ingiriis iyo Af-Soomaali.

1.4.3 Dhammaan qandaraasyada, dokumeentiyada dalabka, dokumeentiyada ka jawaabaya dalabyadaas (oo uu ka mid yahay tartanada qandaraaska) iyo qandaraasyada laf ahaantooda waa in lagu diyaariyo Af-Ingiriis, Luuqadda Ingiriiska waa in ay maamusho xiriirada qandaraaska la xiriira ee u dhaxeeya Dowlad-goboleedka iyo Sharikadaha wax iibiya, qandaraaslaha ama La-Taliyaha. Iyada oo ay xor u tahay Dowlad-goboleedka, dokumeentiyada dalabka waxaa sidoo kale laga yaabaa in lagu diyaariyo Af-Soomaali, haddiiba dokumeentiyada lagu diyaarinayo laba luuqadood, nuqulka Ingiriiska ayaa haga. Hase-yeeshee, qandaraaslayaasha iyo sharikadaha wax iibiya waa in aan loo oggolaan ama looga baahan in ay saxiixaan qandaraasyada oo laba luuqadood ku qoran.

## 2. GUDDIGA WAX-SOO-IIBSIGA, KORMEERKA IYO ILAALINTA DIIWAANADA

### 2.1 Guddiga Wax-soo-iibsiga

2.1.1 Guddi Wax-soo-iibsi ayaa waxaa laga aasaasaya Dowlad-goboleedka gudaheeda waxaa uu noqon karaa dib-u-eegaha hannaanada ee lagu qeexay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga. Guddiga Wax-soo-iibsiga waa in uu dib-u-eegaa habraacyada wax-soo-iibsiga Dowlad-goboleedka, dokumeentiyada, qiimaynta tartanka qandaraaska, talooyinka qandaraas bixinta, iyo qandaraasyada si loo hubiyo in hannaanka wax-soo-iibsiga loo fuliyo si waafaqsan habraacyada lagu heshiiyay.

### 2.2 Diiwaanada Wax-soo-iibsiga

2.2.1 Dowlad-goboleedka waa in ay lahaataa diiwaanno wax-soo-iibsi isku mid ah oo dhammaystiran iyada oo la eegayo hannaan jaango'an oo ay ansixisay Dowlad-goboleedka. Diiwaanada wax-soo-iibsiga waxaa Dowlad-goboleedka ay hayn doontaa ugu yaraan toddobo (7) sano. Iyada oo qayb ka ah diiwaanada wax-soo-iibsiga, Dowlad-goboleedka waxaa ay hayn doontaa dhammaan dokumeentiyada marka la eego qandaraas kasta oo ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn, dokumeentiga asalka ah ee qandaraaska oo saxiixan, falanqaynta soo-jeedimada kala duwan, talooyinka loogu talogalay qandaraas bixinta, diiwaanka ansixinta Dowlad-goboleedka, iyo diiwaanka cabashada ama muran kasta ee ka yimaada tartamaha qandaraaska. Diiwaanada wax-soo-iibsiga waxaa ku waajiba baaritaanka Hantidhawrayaal gudaha iyo dibadda



M.A

ah.

# 3. QORSHEYNTA, HIRGELINTA IYO KA-WARBIXINTA WAX-SOO-IIBSIGA

## 3.1 Qorshaha Wax-soo-iibsiga

3.1.1 Dowlad-goboleedka waa in ay diyaariso qorshayaal wax-soo-iibsi mudadiiba mar ah oo loogu talogalay helidda alaabo, shaqooyin, la-taliye, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn, (*"Qorshe Wax-soo-iibsi"*). Qorshaha Wax-soo-iibsiga waa dokumeentiga qorsheynta iyo hirgelinta barnaamijka muhiimka ah oo ay diyaarisay Dowlad-goboleedka. Shaqada aasaasiga ah ee uu qabto Qorshaha Wax-soo-iibsiga waa in uu u adeego sida qalab maareyn oo ay Dowlad-goboleedka ku kormeerayso hawlaha wax-soo-iibsiga.

## 3.2 Shuruudaha iyo Ansixinada Qorshaha Wax-soo-iibsiga

3.2.1 Dowlad-goboleedka waa in ay hubisaa in dhammaan alaabada, shaqooyinka, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn in la soo iibiyo iyada oo la adeegsanayo habka wax-soo-iibsiga ee lagu ansixiyay Qorshaha Wax-soo-iibsiga. Dowlad-goboleedka waa in ay si mudadiiba mar ah u diyaariso Qorshe Wax-soo-iibsi loogu talogalay dhammaan helidda alaabo, shaqooyin, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn ee ka badan laba kun iyo shan boqol oo Doolarka Mareykanka ah (US $2,500) ee loogu baahan yahay hirgelinta mashaariicda loo baahan yahay. U-hoggaansamidda iy ku qanacsanaanta Guddiga Wax-soo-iibsiga waa in ay noqoto shuruud hore oo ku xiran bixinta ama lacag-bixinada. Qorshe Wax-soo-iibsi kasta waa in loo gudbiyo Guddiga Wax-soo-iibsiga si uu u ansixiyo. Qorshe Wax-soo-iibsi kasta waxaa uu ku saabsanaan doonaa mudda yar oo waqti cayiman ah, oo noqon doonta ugu yaraan muddo (6) bilood ah (muddooyin dhaadheer ayaa si xoog leh loogu dhiirrigelinayaa halka ay ku habboon yihiin), waana in la cusboonaysiiyo, ugu yaraan lix (6) bilood kasta.

## 3.3 Tusmada iyo Habka Abaabulka ee Qorshaha Wax-soo-iibsiga

3.3.1 Qorshaha Wax-soo-iibsiga waa in uu (a) taxo liiska qandaraasyada gaarka ah ee Alaabada, Shaqooyinka, Adeegyada La-talinta iyo kuwa Aan La-Talinta Ahayn ee loo baahan yahay si loo hirgeliyo Qorshaha Maalgelinta muddada looga hadlay Qorshahaas Wax-soo-iibsiga; (b) tilmaamo habka wax-soo-iibsiga la soo-jeediyay ee qandaraasyadaas ee ah sida la go'aamiyay iyada oo la eegayo sharciyada lagu dhigay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga; iyo (c) in uu sheego qiimaha la qiyaasay ee qandaraas kasta. Qorshaha Wax-soo-iibsiga waa in loo habeeyo sida soo socota: tallaabo wax-soo-iibsi kasta waa in loo qaybiyo alaabo, shaqooyin, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn. Tallaabo wax-soo-iibsi kasta waa in ka dib lagu xiriiriyo



M.A

Mashruuca loo soo iibiyay iyada oo la adeegsanayo nidaam lambarayn ama nidaam kale ee aqoonsi.

**3.4 Wax-ka-beddelka Qorshaha Wax-soo-iibsiga**

3.4.1 Haddii Dowlad-goboleedka ay go'aamiso in Qorshaha Wax-soo-iibsiga la ansixiyay loo baahan yahay ama ay habboon tahay in wax isbeddel ah lagu sameeyo, Dowlad-goboleedka waa in ay soo-jeediso wax-ka-beddelid oo ayna ka hesho ansixin Guddiga Wax-soo-iibsiga *ka hor* inta aan la bilaabin tallaabada wax-soo-iibsiga wax laga beddelay ama cusub. Dowlad-goboleedka waa in ay u soo gudbiso Qorshe Wax-soo-iibsi wax laga beddelay si loo ansixiyo mar kasta oo wax-soo-iibsiyo cusub la qorsheynayo.

**3.5 Maamulka Guddiga Wax-soo-iibsiga waa in uu Shaaca-ka-qaado Wax-soo-iibsiga Aan Habboonayn**

**3.5.1 Waa in aysan wax-soo-iibsi bilaaban haddii loo soo-iibiyay si waafaqsan qodobada lagu heshiiyay mooyaane ee ah sida lagu faahfaahiyay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga, iyo halka lagu dabaqi karo, Qorshayaasha Wax-soo-iibsiga ee la ansixiyay.** Xaaladahaas, Guddiga Wax-soo-iibsiga ayaa shaaca-ka-qaadaya wax-soo-iibsiga aan habboonayn waxaa uu ku adkaysanayaa in la qaado tallaabooyin sixitaan oo lagu qanci karo. Guddiga Wax-soo-iibsiga waxaa laga yaabaa, oo intaas siidheer, in uu adeegsado xalal kale. Xitaa marka qandaraaska la bixiyo Guddiga Wax-soo-iibsiga wuxuu weli shaaca-ka-qaadi karaa in uu yahay Wax-soo-iibsi aan habboonayn haddii uu ku soo gebogebeeyo in ansixinta la sameeyay iyada oo lagu saleynayo macluumaad aan dhammeystirnayn, sax ahayn, ama loogu talo galay marin-habbaabin oo la bixiyay, ama shuruudaha qandaraaska oo si xoogan isbeddel loogu sameeyay iyada oo aan la ansixin.

## 4. QABASHADA IYO MAAMULIDDA SOO-IIBSIGA ALAABADA, SHAQOOYINKA IYO ADEEGYADA AAN LA-TALINTA AHAYN

**4.1 Hordhac**

4.1.1 Qaybta 4aad ee Buuggan Siyaasadda Wax-soo-iibsiga waxaa uu dhigayaa mabaadii'da, sharciyada, iyo habraacyada guud ahaan lagu dabaqi karo soo-iibsiga alaabo, shaqooyin, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn ee la bixiyay iyo/ama ay maalgeliso Dowlad-goboleedkaoo ay ka mid yihiin maaliyadaha ay bixiyaan deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah ee laga baraandego iyada oo loo marayo Xisaabta Midaysan ee Khasnadda Dowlad-goboleedka.

**4.2 Tixgelinta Guud**



M.A

**4.2.1** Dowlad-goboleedka waxay mas'uul ka tahay hirgelinta Mashaariicda sidaa darteedna waxay mas'uul ka tahay xulashada qandaraaslayaasha iyo sharikadaha iibiya alaabta iyo qandaraas bixinta marka damebana maamulidda qandaraasyada. Iyada oo lagu dhaqmayo sharciyada iyo habraacyada gaarka ah ee wax-soo-iibsiga ay tahay in la raaco marka la hirgelinayo Mashruuca waxay ku xiran yihiin xaaladaha kiis gaar ah, shantan tixgelin ee soo socda ayaa guud ahaan hagaya adeegsiga Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga – **kuwan waxaa hoggaamiya qodobka (a) ee hoos ku xusan - "mabda'a hagaya" ee loogu talogalay Dowlad-goboleedka**:

(a) **Waa in la qabto dhammaan hawlaha iyada oo la adeegsanayo heerarka ugu sarreeya ee daacadnimo, hab hufnaan iyo cadaalad ku dheehan oo aan lahayn wax habdhaqano musuqmaasuq ah oo muuqda. Kani waa in uu noqdaa mabda'a hagaya dhammaan hawlaha wax-soo-iibsiga ee Dowlad-goboleedka.**

(b) Waa in habraacyo cadaalad ah, lagu tartami karo, oo furan lagu adeegsado hab daahfuran si loo soo dalbado, loo bixiyo, oo loo maamulo qandaraasyada lagu soo iibinayo alaabo, shaqooyin, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn;

(c) Soo-iibsiga alaabada, shaqooyinka, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn waa in lagu saleeyo sharaxaadda saxa ah ee alaabada, shaqooyinka, ama adeegyada aan la-talinta ahayn ee la helayo;

(d) Qandaraasyada waa in lagu abaalmariyo ama la siiyo keliya qandaraaslayaasha iyo shirkadaha kartida iyo aqoonta u leh kuwaas oo leh awood iyo rabitaan ay ugu qabanayaan qandaraasyada si waafaqsan shuruudaha qandaraasyada lagu dabaqi karo iyo/ama Dalabka Iibsiga Degaanka (*Local Purchase Order)* iyo si ku saleysan kharash wax-ku-ool ah iyo waqti ku habboon; iyo

(e) Waa in aan in ka badan qiimo ganacsi ahaan macquul ah (sida la go'aamiyo, Tusaale ahaan, iyada oo la isbarbardhigayo qiime sheegidda iyo qiimaha suuqa) la bixin si loo soo iibiyo alaabo, shaqooyin, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn.

4.2.2 Dowlad-goboleedka waa in ay hubiso in dhammaan soo-iibsiga alaabada, shaqooyinka, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn ee la sameeyay si loo horumariyo ujeeddooyinka Dowlad-goboleedka gebi ahaan ama qayb ahaan, si toos ah ama si dadbanba, loogu maalgeliyay maaliyado laga helay deeq-bixiyayaasha in loogu hoggaansamay Mabaadii'dan Wax-soo-iibsiga ee Dowlad-goboleedka.

4.2.3 Tartanka furan waa aasaaska wax-soo-iibsiga dowladda ee hufan. Xaaladaha badankooda



M.A

sidaas darteed, Dowlad-goboleedka waxay u baahan tahay halka ay suurtagal tahay alaabada, shaqooyinka iyo adeegyada aan la-talinta ahayn in la helo iyada oo loo marayo hannaan qiime sheegid lagu tartamo ("***Qiime Sheegid Lagu Tartamo***") oo u furan qandaraaslayaasha iyo sharikadaha xaqa u leh.

4.2.4 Halka Tartan Qandaraas uusan ahayn habka ugu habboon ee wax-soo-iibsiga, habab kale ee wax-soo-iibsi ayaa la adeegsan karaa. Qayb-Hoosaadyada 4.25 iyo 5.18 ayaa sharxaya hababkan kale ee wax-soo-iibsiga iyo xaaladaha adeegsigooda uu noqonayo mid aad u habboon. Hababka gaarka ah ee loo raacayo wax-soo-iibsiga waa in lagu Qoro Qorshayaasha Wax-soo-iibsiga sida ay ansixiyeen Dowlad-goboleedka iyo Guddiga Wax-soo-iibsiga.

**4.3 Iska-horimaadka Danaha**

4.3.1 Tartamayaasha, sharikadaha wax-iibiya, qandaraaslayaasha, iyo qandaraaslayaasha labaad/hoosaadka ah waa in bixiyaan talo xirfadeed, ujeeddo leh, oo dhexdhexaad ah waana in waqti kasta ay ilaaliyaan danaha Dowlad-goboleedka ee ka muhiimsan wax kasta oo kale, iyaga oo aan wax tixgelin ah u muujin shaqo mustaqbalka ah. Sharikadaha iyo shaqsiyaadka waa in ay ka fogaadaan ka horimaanshaha shaqooyinka kale iyo danaha gaarka ah ee sharikadooda. Sharikadaha iyo shaqsiyaadka waa in aan loo kiraysan hawl kasta ee ka horimaanaysa waajibaadyadooda hadda ama hore ee macaamiishooda kale, ama dhigi kara maqaam aysan ku awoodin in ay u qabtaan hawsha si ku jirta danaha ugu fiican ee Dowlad-goboleedka. Iyada oo aan la xaddidayn inta badan ee wax hore loo xusay, sharikadaha iyo shaqsiyaadka waa in aan la kiraysan iyada oo la hoostagayo xaaladaha hoos lagu dhigay:

4.3.2 **Iska-horimaadka u dhaxeeya hawlaha la-talinta iyo soo-iibsiga alaabada, shaqooyinka, ama adeegyada aan la-talinta ahayn:** Sharikadda, iyo sharikadaha kale ee xiriirka sokeeye la leh, ama shaqsiga ay shaqaalaysiiyeen Dowlad-goboleedka ama deeqbixiyeyaasha ama kuwa kale si ay u bixiyaan alaabada, shaqooyinka, ama adeegyada aan la-talinta ahayn ee loogu talogalay wax-soo-iibsiga waa in laga reebo in ay bixiyaan adeegyada la-talinta ee la xiriira alaabadaas, shaqooyinkaas, ama adeegyada aan la-talinta ahayn. Waxaa taa ka duwan, sharikadda, iyo sharikadaha kale ee xiriirka sokeeye la leh, ama shaqsiga loo soo kiraystay in ay bixiyaan adeegyo la-talin ee loogu talogalay diyaarinta ama hirgelinta hawl wax-soo-iibsi gaar ah ama Mashruuc waa in laga reebo marka dambe in ay bixiyaan alaabo, shaqooyin, ama adeegyada aan la-talinta ahayn ee ka dhalanaya ama si toos ah ula xiriira adeegyada la-talinta ee sharikadda ama shaqsiga ee loogu talogalay diyaarintaas ama



M.A

hirgelintaas.

4.3.3 **Xiriirada ay la leeyahiin Wasiirada Dowlad-goboleedka ama Shaqaalaha Rayidka ah**: Sharikadda ama shaqsiga ay u shaqaalaysiisay Dowlad-goboleedka in ay bixiyaan alaabo, shaqooyin, ama adeegyo (oo ay ka mid yihiin hawlwadeennada, qandaraaslayaasha labaad/hoosaad iyo sharikadaha xiriirka sokeeye la leh) ee midkood ah laf-ahaantooda ama la leh xiriir ganacsi ama qoys (i) Wasiirada Dowlad-goboleedka ama Shaqaalaha Rayidka ah, (ii) Shaqaalaha hirgelinta Mashruuca ama Wax-soo-iibsiga, ee si toos ah ama si dadban ugu lug leh qayb kasta ee ah: (A) diyaarinta dokumeentiyada tartanka qandaraaska ee la xiriira wax-soo-iibsiga, oo uu ka mid yahay qandaraaska, (B) hannaanka xulashada ee loogu talogalay wax-soo-iibsigaas, ama (C) kormeerka qandaraas kasta ee lagu bixiyay wax-soo-iibsiga, waxaa laga yaabaa in aan la siin qandaraaska, haddii iska-horimaadka ka imaanaya xiriirkaan loo xaliyey hab ay aqbali karto Dowlad-goboleedka mooyaane bilow ilaa dhammaadka hannaanka diyaarinta dokumeentiyada la xiriira wax-soo-iibsiga, hannaanka xulashada iyo bixinta iyo fulinta qandaraaska.

**4.4 Xaq-u-yeelashada**

4.4.1 Si loo kobciyo tartanka, Dowlad-goboleedka waxay u ogoshahay sharikadaha iyo shaqsiyaadka in ay bixiyaan alaabo, shaqooyin iyo adeegyada aan la-talinta ahayn marka laga reebo sharikadaha iyo shaqsiyaadka ka socda dal kasta ee ku khabsan xayiraadaha iyo/ama cunaqabataynta hadda ee Bankiga Caalamiga ah ee Dib-u-dhiska iyo Hormarka ('Bankiga Adduunka') (*International Bank for Reconstruction and Development ('World Bank")).* Shuruudo kasta ee ka qaybgalka ku xiran waa in lagu xaddido kuwa lagama maarmaanka ah si loo hubiyo awoodda sharikadda ay u leedahay fulinta qandaraaska su'aasha ku jira. Xaqiijinta xaq-u-yeelashada waa in la sameeyo, habraacyada loogu talogalay xaqiijintan waxay ku qoran yihiin gudaha Qaybta 8aad ee Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga.

4.4.2 Dowlad-goboleedka waa in aysan ugu diidin shuruudaha hore ama dambe sharikad sababo aan la xiriirin awoodeeda iyo khayraadka ay ugu qabanayso qandaraaska si guul leh; ama waa in aysan ku reebin tartame kasta sababahaas. Sidaa darteed, Dowlad-goboleedka waa in ay sameyso wixii loo baahan yahay oo dhan ee ku saabsan shuruudaha sharci, farsamo, iyo kuwa maaliyadeed ee tartamayaasha si loo xaqiijiyo awoodahooda la xiriira qandaraaska gaarka ah.

4.4.3 Waxyaabaha ka-reeban waxa la sheegay:

(a) Sharikadaha laga leeyahay dal ama alaabaha lagu soo sameeyo dal ayaa laga saari karaa



M.A

haddii, (i) arrin sharci ama xeer rasmi ah awgeed, Bankiga Adduunka uu u mamnuuco in xiriiro ganacsi lala sameeyo dalkaas, haddii Dowlad-goboleedka ay ku qanacdo in ka-saaridaas aysan baajinayn in uu dhaco tartan wax-ku-ool ah oo loo galo gaarsiinta/geynta alaabada, shaqooyinka ama adeegyada aan la-talinta ahayn ee loo baahan yahay, ama (ii) sida fal loogu hoggaansamayo go'aanka uu qaatay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee waafaqsan Cutubta VII ee Axdiga Qaramada Midoobay, dalka Dowlad-goboleedka waxaa uu mamnuucayaa soo dhoofsashada alaabo ka timid, ama lacag-bixinada loo dirayo, dal gaar ah, shaqsi, ama

(b) Sharikad, iyo sharikado kasta oo xiriir sokeeye la leh, ee loo shaqaaleysiiyay in ay bixiso adeegyada la-talinta ee loogu talogalay diyaarinta ama hirgelinta wax-soo-iibsi ama Mashruuc waa in laga joojiyo in waqti ka dib ay bixiyaan alaabada, shaqooyinka, ama adeegyada aan la-talinta ahayn ee ka dhasha ama si toos ah ula xiriira adeegyada la-talinta sharikada ee loogu talogalay diyaarintaas ama hirgelintaas.

(c) Ganacsiyada ay dowladdu leedahay, ayaa ka qaybgali kara oo keliya haddii ay muujin karaan xaqiiqda ah in (i) ay sharci ahaan iyo maaliyad ahaan ay madax-bannaan yihiin, (ii) ay u hawlgalaan si waafaqsan sharciga ganacsiga.

(d) Sharikada shaaca laga qaaday in aysan xaq u lahayn iyada oo la raacayo qaybaha khuseeya ee Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga waa in aysan xaq u yeelan in qandaraas lagu abaalmariyo ama la siiyo. Tani waxay sidoo kale ka saaraysaa xaq-u-yeelashada wax-soo-iibsi kasta ee ka yimaado dal ama sharikad laga soo habeeyay ama xarunteeda ganacsi ee ugu weyn ay ku leedahay ama qayb weyn oo hawlgaladeeda ah ay ku yaallaan dal lagu saaran xayiraadda ama cunaqabataynta Bankiga Adduunka.

**4.5 Maalgelinta Wadajireed ama La Wadaago**

4.5.1 Sharikad kasta waxay si madax-bannaan ama si maalgelin wadajireed ah ula geli kartaa tartanka qandaraaska (haddiiba dhammaan sharikadaha ka qaybgalaya maalgelinta wadajireed ay si wadajir ah oo sharci ahaan ah ay u qaadayaan mas'uuliyadda) sharikado maxali ah iyo/ama sharikado shisheeye.

**4.6 Khayaanada iyo Musuqmaasuqa**

4.6.1 Dhammaan ka-faa'iidaystayaasha, oo ay ka mid yihiin Dowlad-goboleedka iyo tartamayaal kasta, sharikadaha wax-iibiya, qandaraaslayaasha, iyo qandaraaslayaasha labaad waa in ay ilaaliyaan heerarka ugu sarreeya ee anshaxa inta lagu guda jiro wax-soo-iibsiga iyo fulinta qandaraasyadaas. Ujeeddooyinka qoddobadan awgood, ereyada hoos ku xusan waxaa loo qeexay



M.A

sidaan soo socota:

(a) "habdhaqan adeegsi handadaad iyo xoog" waxaa loola jeedaa wax u dhimidda ama waxyeellaynta ama ku gooddinta in wax loo dhimayo ama waxyeello loogu geysanayo, si toos ah ama si dadban, shaqsiyaad ama hantidooda, si loo duwo ka-qaybgalkooda hannaanka wax-soo-iibsiga, ama loo saameeyo fulinta qandaraaska;

(b) "habdhaqan heshiis sir ah" waxaa loola jeedaa shirqool iyo/ama qorshe dhexmara laba (2) dhinac ama dhinacyo badan, iyada oo ay ogsoon tahay ama aysan ogsoonayn Dowlad-goboleedka, oo loogu talogalay in la sameeyo heerar qiimayaal macmal ah, aan lagu tartami karin ama haddii kale ka qaadaya Dowlad-goboleedka faa'iidooyinka tartan furan ee xorta ah;

(c) "habdhaqan musuqmaasuq" waxaa loola jeedaa u soo bandhigidda, siinta, qaadashada, ama dalabashada, si toos ah ama si dadbanba, ee wax kasta oo qiimo leh si loo duwo tallaabooyinka saraakiisha dowladda ee qaabka/hannaanka xulashada ama fulinta qandaraaska, ama sameynta lacag-bixin kasta ee la siinayo dhinac saddexaad kasta, oo la xiriirta ama lagu horumarinayo qandaraaska, ee xadgudubka ku ah xeerarka;

(d) "habdhaqan khiyaano" waxaa loola jeedaa fal ama ka-tagid kasta, oo ay ka mid tahay matalaad been ah kasta, si loo duwo (ama la isugu dayo in la duwo) qaabka/hannaanka xulashada ama fulinta qandaraaska, si looga helo dheefo maaliyadeed ama dheefo kale, ama si looga fogaado (ama iskudayga looga fogaanayo) waajibaad;

(e) "habdhaqan keena xannibaad" waxaa loola jeedaa baabi'inta, beeninta, beddelida ama qarinta shay caddeyn u ah baaritaanka ama u sheegidda bayaan been ah baarayaasha si loo xannibo baaritaan lagu sameynayo eedaymo habdhaqan handadaad iyo xoog, heshiis sir ah, musuqmaasuq, khiyaano, ama habdhaqan la mamnuucay; iyo habjabaadda, dhibaataynta, ama cabsi-gelinta dhinac kasta si looga hortago in la shaaciyo ogaanshaha arrimo ku habboon baaritaanka ama in la dabagalo baaritaanka, iyo falalka loogu gol leeyahay in lagu xannibo adeegsiga xuquuqda hantidhawrka iyo kormeerka iyo baaritaanka Deeq-bixiyaha, iyo;

(f) "habdhaqan la mamnuucay" waxaa loola jeedaa tallaabo kasta ee ku xadgudubta: (a) Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga, sharci Soomali kasta ama (c) siyaasad kasta ee deeq-bixiyaha caalamiga ah iyada oo la tixgelinayo u hoggaansamidda La-dagaallanka Musuqmaasuqa, La-dagaallanka Lacag Dhaqidda iyo Sharciyada Maaliyad-siinta Argagaxisada iyo Xayiraadaha Kale.

4.6.2 Dowlad-goboleedka iyo/ama Guddiga Wax-soo-iibsiga waxay diidi doonaan tartan



M.A

qandaraas haddii ay go'aamiyaan in tartamaha lagu taliyay qandaraaska in la siiyo uu, si toos ah ama isaga oo adeegsanaya wakiil, uu ka qayb qaatay habdhaqan handadaad ama xoog, heshiis sir ah, musuqmaasuq, khiyaano, mid keena xannibaad, ama mid la mamnuucay isaga oo u tartamaya qandaraaska su'aasha ku jira.

4.6.3 Dowlad-goboleedka iyo/ama Guddiga Wax-soo-iibsiga waxay xaq-u-leeyihiin in ay cunaqabateeyaan tartame, sharikad wax-iibisa, qandaraasle, ama qandaraasle labaad, oo ay ku jirto in shaaca laga qaado dhinacaas in uusan xaq-u-lahayn, midkood si aan cayinayn ama muddo waqti oo la sheegay, in la siiyo qandaraas haddii waqti kasta Dowlad-goboleedka iyo/ama Guddiga Wax-soo-iibsiga ay go'aamiyaan in tartamaha, sharikad, qandaraasle, ama qandaraasle labaad, si toos ah ama isaga oo adeegsanaya wakiil, uu ka qayb qaatay habdhaqan handadaad ama xoog ah, heshiis sir ah, musuqmaasuq, khiyaano, mid keena xannibaad, ama mid la mamnuucay isaga oo u tartamaya, ama fulinaya, qandaraaskaas.

4.6.4 Dowlad-goboleedka waxay xaq u leedahay in ay u baahato qodob in lagu daro dokumeentiyada dalabka iyo qandaraasyada ay maalgeliso Dowlad-goboleedka ee uga baahan tartamaha, sharikada wax-iibisa, qandaraaslaha, qandaraaslaha labaad in uu u ogolaado Dowlad-goboleedka ama qof kasta oo ay u magacaawday Dowlad-goboleedka, in uu kormeero xisaabaadkooda, diiwaanadooda iyo dokumeentiyada kale ee la xiriira soo-gudbinta tartanka qandaraas ama dhinaca fulinta mashruuca ee Qandaraaska Dowlad-goboleedka.

4.6.5 Dowlad-goboleedka ayaa ku soo bandhigi karta Dokumeentiyadeeda Tartanka Qandaraaska ee Caadiga ah ballanqaadka rasmiga ah ee tartamaha si uu u dhawro (u tartamidda iyo fulinta qandaraaska) sharciyada dowlad-goboleedka iyo kuwa dalka ee ka dhanka ah khiyaanada iyo musuqmaasuqa (oo uu ka mid yahay laaluushka), oo dheeraad ku ah haysashada Buuggan Habraacyada.

**4.7 Falanqaynta Qiimaha Macquulka Ah**

4.7.1 Mid ka mid ah Mabaadii'da Wax-soo-iibsiga Dowlad-goboleedka "waa in aan in ka badan qiimo ganacsi ahaan macquul ah (sida la go'aamiyay, tusaale ahaan, iyada oo la isbarbardhigayo qiimo sheegidda iyo qiimaha suuqa) la bixin si loogu soo iibiyo alaabo, shaqooyin, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn." Si ay u hubiso in loo hoggaamsamo mabda'dan, Dowlad-goboleedka waa in ay si habeysan u soo ururisaa macluumaadka tartanka qandaraaska iyo qiimaha ee dhammaan wax-soo-iibsiga iyo in ay u isticmaasho kuwan sida qayb ka mid ah hannaanka qabashada falanqaynta qiimaha macquulka ah ee qiimayaasha lagu bixiyo hannaanka



M.A

wax-soo-iibsiga, ee loogu talogalay wax-soo-iibsiga lagu tartamo iyo kuwa halka meel laga helo, ee alaabada, shaqooyinka, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn si waafaqsan Lifaaqa 6aad, Habraaca ku saabsan Falanqaynta Qiimaha Macquulka ah.

**4.8 Qandaraaska Lagu Tartamo**

4.8.1 Ujeeddada Qandaraaska Lagu Tartamo, sida lagu tilmaamay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga, waa in la siiyo dhammaan tartamayaasha la filayo ee xaqa u leh wargelin ku filan waqti ku habboon shuruudaha Dowlad-goboleedka iyo fursad loo siman yahay tartanka qandaraaska alaabta, shaqooyinka, iyo adeegyada aan la talinta ahayn ee loo baahan yahay.

4.8.2 Ballaarnaanta iyo baaxadda qandaraasyada gaarka ah waxay ku xirnaan doonaan qiyaasta, dabiiciga, iyo meesha wax-soo-iibsiga ama Mashruuca laga fulinayo. Mashaariicda u baahan alaabo iyo shaqooyin kala duwan, qandaraasyo kala gaar ah ayaa guud ahaan loo bixiyaa geynta iyo rakibaadda alaabada kala duwan iyo shaqooyinka. Doorashada qandaraaska waxay ku xirnaan doontaa hufnaanta soo-iibsiga, dhimista kharashka guud, kharashka abaabulka, fududaynta maamulka qandaraaska iyo dhibaatada kormeerka, tixgelinta suuqa, iyo helitaanka maalgelin.

4.8.3 Mashruuca u baahan agabka alaabo ama shaqooyinka isku mid ah balse kala gaar ah, tartan qandaraas ayaa waxaa loogu yeeri doonaa si waafaqsan ikhtiyaaro qandaraas kale duwan ee soo jiidanaya danaynta sharikadaha yaryar iyo kuwo waaweyn oo loo ogolaan karo, iyaga oo eegaya ikhtiyaarkooda, in ay u tartamaan qandaraaska waxyaabo gaar ah ama koox waxyaabo isku mid ah. Dhammaan tartanada qandaraaska iyo isku-jira tartanada qandaraaska waa in la helo waqti kama dambeys isku mid ah waana in loo furo oo loo qiimeeyo si isku mar ah si loo go'aamiyo tartanka qandaraaska ama isku-jirka tartanada qandaraaska ee u soo bandhigaya kharashka la qiimeeyay ee ugu hoseeya Dowlad-goboleedka.

4.8.4 Xaaladda qandaraasyada qalabka diyaarsan ama qandaraasyada tas-hiilaadka waaweyn ee qaybaha kala duwan ka kooban ama shaqooyinka dabciga gaarka ah leh, ama tiknoolajiyadda isgaarsiinta iyo macluumaadka ee qaybaha kala duwan ka kooban, waxaa laga yaabaa in aan loo baahnayn ama aan waaqici ahayn in waqti hore la diyaariyo farsamada khaaska ah oo dhammeystiran. Xaaladda noocaas ah, habraac tartan qandaraas laba marxaladood ah ayaa la adeegsan karaa, oo marka hore soojeedimo farsamo qiimo la'aan ah oo ku saleysan aasaaska naqshad aragti maskaxeed ama tilmaamaha gaarka ah ee waxqabad ayaa la casuumayaa, oo ku xiran sifayn iyo isku-hagaajin ganacsi iyo sidoo kale farsamo, oo ku xigaya dokumeentiyo tartan



M.A

qandaraas oo wax laga beddelay iyo in marxaladda labaad la soo-gudbiyo soojeedimo farsamo oo kama dambeys ah iyo tartan qandaraas qiimo la socda.

4.8.5 **Ogeysiin iyo Xayaysiin:** Ogeysiinta waqtiyeysan ee fursadaha wax-soo-iibsiga waa wax lagama maarmaan u ah qandaraaska lagu tartamo. Si ku saleysan ugu yaraan sannadkii laba jeer, Dowlad-goboleedka waa in ay ku baahiso ama ku xayaysiiso Ogeysiiska Wax-soo-iibsiga Guud (GPN), wax-soo-iibsiga loo qorsheeyay muddada soo socota sida lagu tilmaamay Qorshaha Wax-soo-iibsiga la ansixiyay oo ay ansixiyeen Guddiga Wax-soo-iibsiga. GPN waa in loo xayaysiiyo hab lagu siinayo ogeysiiska wax-soo-iibsiga la qorsheeyay ee macquulka ah sharikadaha wax-iibiya iyo qandaraaslayaasha suurtagalka ah. Marka tartan qandaraas kasta loo diyaariyo in la soosaaro waa in si la mid ah loo xayaysiiyo sida Ogeysiis Wax-soo-iibsi Khaas ah (SPN).

4.8.6 **Shuruudaha Hore ee laga rabo Qandaraaslayaasha/Tartamayaasha:** Shuruudaha hore waxaa loo sameyn/abaabuli karaa shaqooyinka waaweyn ama kuwa qaybaha badan ka kooban, ama xaalado kasta oo kale ee kharashka badan ee ku baxa diyaarinta tartanka qandaraas faahfaahsan laga yaabo in ay baajiyan tartanka, sida qalabka loo qaabeeya qaab dalab, warshadaha, adeegyada takhasuska ah, tiknoolajiyada iyo macluumaadka qaybaha kala duwan leh. Baaxadda qandaraaska iyo bayaan waadax ah oo ku qoran shuruudaha loo baahan yahay waa in loo diro kuwa ka soo jawaabay casumaadda si ay uga soo baxaan shuruudaha hore ee tartanka qandaraaska. Dowlad-goboleedka waa in ay ku wargeliso dhammaan codsadayaasha natiijooyinka shuruudaha hore, dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in ay helaan tartamayaasha la filayo ee xaqa u leh. Shuruudaha hore ee loogu talogalay kooxo qandaraasyo ah ee la bixinayo muddo waqti ah, xadidaadda tirada ama qiimaha guud ee qandaraasyada la siinayo hal tartame/qandaraasle kasta ayaa la sameyn karaa iyada oo lagu saleynayo khayraadka tartamaha/qandaraaslaha. Liiska sharikadaha ka soo baxay shuruudaha hore ee xaaladahaas waa in dib-u eegis lagu sameeyo sanad kasta oo loo cusboonaysiiyo sida loo baahdo. Xaqiijinta macluumaadka lagu bixiyay waraaqaha loo soo-gudbiyay shuruudaha hore waa in mar kale la xaqiijiyo ka hor inta aan qandaraaska la bixin, waxaana qandaraas bixinta loo diidi karaa tartame/qandaraasle kasta go'aan laga gaaray in uusan lahayn awoodda/kartida ama khayraadka sida guusha leh loogu sameynayo qandaraaska.

**4.9 Dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska**



M.A

4.9.1 Dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in ay bixiyaan dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ee loogu talogalay tartamaha/qandaraaslaha la filayo si uu u diyaariyo qiima sheegda alaabada, shaqooyinka ama adeegyada aan la-talinta ahayn ee la bixin doono. Iyada oo faahfaahinta iyo adkaanta dokumeentiyadaan laga yaabo in ay ku kala duwan yihiin inta uu le'eg yahay iyo dabciga xirmada tartanka qandaraaska iyo qandaraaska la soo-jeediyey, waxaa guud ahaan ka mid ah: casumaadda tartanada qandaraaska; tilmaamaha loogu talogalay tartamayaasha/qandaraaslayaasha iyo xaashida xogta tartanka qandaraaska: qiimeynta iyo aasaaska aqoonta, foomamka tartanka qandaraaska; qaabka qandaraaska, oo ay ka mid yihin shuruudaha guud iyo kuwa gaarka ah; qeexitaannada iyo sawirada; xogta farsamo ee khuseysa (oo ay ka mid yihiin dabeecadda joolaajiyada iyo deegaanka); liiska alaabada ama waraaqda qaansheegadka; waqtiga geynta ama jadwalka dhammeynta iyo lifaaqyada loo baahan yahay, sida qaababka damaannadaha kala duwan. Aasaaska qiimaynta tartanka qandaraaska iyo xulashada tartatanka qandaraaska ugu hooseeya ee la qiimeeyay waa in si cad loogu muujiyo amarrada iyo/ama tilmaamaha gaarka ah ee la siiyo tartamayaasha/qandaraaslayaasha. Haddii ujuuro lagu soo dalaco dokumeentiyada tartanka qandaraaska, waa in ay noqotaa mid macquul ah oo keliya noqonaysa kharashka ku baxa daabacaadooda iyo gaarsiinta tartamayaasha la filayo, waa in aysan noqon lacag aad u badan oo niyad-jabinaysa tartamayaasha xaqa u leh. Dowlad-goboleedka waxay adeegsan kartaa sistem/nidaam elektaroonig ah si ay ugu qaybiso dokumeentiyada tartanka qandaraaska, haddii Dowlad-goboleedka ay ku qanacdo ku filnaanta sistemkaas/nidaamkaas. Haddii dokumeentiyada tartanka qandaraaska loo qaybiyo si elektaroonig ah, sistemka elektarooniga ah waa in uu noqdaa mid ammaan ah si looga fogaado in wax laga beddelo dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in sidoo kale uusan xaddidayn in tartamayaasha ay gaaraan dokumeentiyada tartanka qandaraaska. Habraaca ku saabsan qaybaha muhiimka ah ee dokumeentiyada tartanka qandaraaska waxaa lagu bixiyay farqadahaan soo socda.

4.9.2 Dowlad-goboleedka waa in ay isticmaasho Dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska ee Caadiga ah (*Standard Bidding Documents (SBD)*) ee ku habboon. SBD-yada waxaa laga yaabaa in wax laga beddelo si ay uga hadlaan xaaladaha gaarka ah ee Mashruuca, oo ku xiran ansixinta Guddiga Wax-soo-iibsiga marka beddelka uu yahay shay. Ilaa iyo inta suurtagalka ah, isbeddeladaas waa in lagu soo bandhigo Xaashiyada Xogta Tartanka Qandaraska (BDS). Lifaaq ku lifaaqan Tartanta Qandaraaska ama iyada oo loo marayo Shuruudaha Gaarka ah ee



M.A

Qandaraaska (SCC) oo ma aha in lagu soo bandhigo isbeddelada Shuruudaha Guud ee Qandaraaska (GCC).

4.9.3 **Ansaxnimada Tartanka Qandaraaska:** Tartamayaasha/qandaraaslayaasha waa in laga doonayo in ay soo gudbiyaan tartanka qandaraaska ee ansaxa ah muddada lagu cayimay dokumeentiyada tartanka qandaraaska ee la doonayo in ay ku filnaadaan si Dowlad-goboleedka ay u awooddo in ay dhammeystirto isbarbardhiga iyo qiimaynta tartanada qandaraaska, oo ay dib ula eegto talo-bixinta qandaraas-bixinta Guddiga Wax-soo-iibsiga (haddii loo baahdo), iyo in ay hesho dhammaan ansixinada loo baahan yahay si qandaraaska loo bixiyo muddada ansaxnimada gudaheeda. Haddii hannaankan aan la dhammeystirin dhammaadka muddada ansaxnimada qandaraaska, Dowlad-goboleedka waxay ka codsan kartaa Tartamayaasha in ay sii kordhiyaan ansaxnimada qiima sheegooda.

4.9.4 **Damaannada Tartanka Qandaraaska**: Dowlad-goboleedka waxay ikhtiyaar u leedahay in ay u baahato damaannada tartanka qandaraaska. Hase-yeeshee, damaannadaha tartanka qanadaraaska waxaa sida caadiga ah keliya loo isticmaalaa qandaraasyada shaqooyinka qiimaha sare. Marka la isticmaalo, damaannada tartanka qandaraaska waa in ay noqotaa qaddarka iyo qaabka lagu cayimay dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in ay sii ahaataa mid ansax ah muddo ku filan oo ka baxsan muddada ansaxnimada tartanada qandaraaska, si loo siiyo waqti macquul ah oo Dowlad-goboleedka ay tallaabo ku qaadayso haddii damaannada ay tahay in la tixgeliyo. Qaabka damaannada tartanka qandaraaska waa in uu noqdaa mid waafaqsan SBD waana in uu soosaaro banki la xurmeeyo/magac fiican leh ama hay'ad maaliyadeed oo uu xushay tartamaha/qandaraaslaha. Haddii hay'adda bixinaysa damaannada ay ku taallo meel ka baxsan Soomaaliya, waa in ay ku leedahay hay'ad maaliyadeed oo waafaqsan Soomaaliya. Marka laga reebo shuruudaha qaar oo ay tahay in si cad loogu sheego dokumeentiyada tartanka qandaraaska (tusaale, halka tartamaha uu ka noqdo tartankiisa qandaraaska inta lagu guda jiro muddada ansaxnimada tartanka qandaraaska, halka tartamaha uusan aqbalin sixitaanada qaar in lagu sameeyo qiimo sheegga tartanka qandaraaska, ama halka uu sida kale tartamaha guulaysta uu ku guuldaraysto in uu saxiixo qandaraaska ama in uu ku bixiyo damaannada waxqabadka waqtiga la cayimay gudahiisa) damaannadaha tartanka qandaraaska waa in loo siidaayo intaba tartamayaasha aan guulaysan iyo tartamaha guulaysta, marka qandaraaska lala saxiixdo tartamaha guulaystay.



M.A

4.9.5 **Qeexnaanta Dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska**: Dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in lagu isticmaalo ereyo gaar ah oo ogolaanaya dhiirrigelinta tartan caalami ah waana in ay si cad oo qeexan u dhigaan shaqada la qaban doono, goobta shaqada laga qabanayo, alaabta/badeecada ay tahay in la geeyo, meesha la gaynayo ama rakibaadda, jadwalka gaynta ama dhammeystiridda, shuruudaha waxqabadka ugu yar, iyo shuruudaha dayactirka iyo damaannada loo baahan yahay, iyo sidoo kale shuruudo kasta oo la xiriira. Waxaa intaa dheer, dokumeentiyada tartanka qandaraaska, halka ku habboon, waa in ay qeexaan tijaabooyinka, jaangooyooyinka, iyo hababka la adeegsan doono si loo xukmiyo waafaqsanaanta qalabka la geeyay, ama shaqooyinka la qabtay tilmaamaha gaarka ah. Sawirada waa in ay la mid noqdaan qoraalka tilmaamaha gaarka ah. Dhammaan dokumeentiyada noqon doona dokumeentiyada qandaraaska waa in loo qoro liiskooda sida ay u kala horreeyaan, kuwan goor dambe waxay noqon doonaan qandaraaska tartamaha guulaysta.

4.9.6 Dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in ay sheegaan arrimo kasta, oo dheeraad ku ah qiimaha, ee la tixgelin doono marka la qiimeynayo tartanada qandaraaska, iyo sida arrimahaas loo qiyaasayo ama haddii kale loo qiimeynayo. Haddii soo-jeedimada tartanka qandaraaska ay ku saleysan yihiin naqshado kale, alaabo, jadwalada dhammeynta, iwm. ayaa la ogol yahay, shuruudaha aqbalaadooda iyo habka qiimeyntooda waa in loo sheego si cad.

4.9.7 Dhammaan tartamayaasha la filayo waa in la siiyo macluumaad isku mid ah, waana in loo ballanqaado fursado loo siman yahay si ay u helaan macluumaad dheeraad ah oo ku saleysan waqti loo baahan yahay. Dowlad-goboleedka waa in ay suurtageliso gaaritaanka macquulka ah ee goobaha Mashruuca ee loogu talogalay booqashooyinka tartamayaasha la filayo. Shaqooyinka ama qandaraasyada alaabta qaybo kala duwan leh la gaynayo, gaar ahaan kuwa u baahan dib-u-qurxinta qalabka ama shaqooyinka jira, shir tartan qandaraas hore ah ayaa la qabanqaabin karaa halka tartamayaasha la filayo ay la kulmi karaan wakiillada Dowlad-goboleedka si loo raadiyo sharaxaad (qoraal ah). Qoraalada laga diyaariyo shirka waa in la siiyo dhammaan tartamayaasha la filayo iyaga oo uu la socda nuqul ku jira diiwaanka wax-soo-iibsiga. Macluumaad, sharaxaad, sixitaanka khaladaadka, ama lifaaq kasta ee dheeraadka ku ah dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in loo diro qaate/hele kasta dokumeentiyada tartanka qandaraaska ee asalka ah waqti ku filan ka hor waqtiga kama dambayska ee helitaanka tartanka qandaraaska si tartamayaasha ay u awoodaan in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon. Haddii isbeddeladaas ama lifaaq ay ugu baahan yihiin waqti dheeraad ah tartamayaasha, waqtiga kama dambayska ee soo-



M.A

gudbinta waraaqaha tartanka qandaraaska ayaa la kordhin karaa iyada oo la soosaarayo lifaaq dheeraad ah. Dokumeentiyo tartan qandaraas kasta ee uu markii hore Guddiga Wax-soo-iibsiga ansixiyo, waxay sidoo kale u bixinayaan ansixinta ugu dambeysa ee dhammaan jawaabaha, wax-ka-beddelista, iyo lifaaqa ka hor inta Dowlad-goboleedka aysan u dirin tartamayaasha la filayo ama la-taliyeyaasha.

**4.10 Jaangooyooyinka iyo Tilmaamaha Gaarka ah ee Farsamo**

4.10.1 Jaangooyooyinka iyo tilmaamaha gaarka ah ee farsamo ee lagu soo xigtay qoraalka dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in ay horumariyaan tartanka suurtagalka ah ee ugu ballaaran, iyada oo la xaqiijinayo waxqabadka muhiimka ah ama shuruudaha kale ee loogu baahan yahay alaabada, shaqooyinka ama adeegyada aan la-talinta ahayn ee waafaqsan wax-soo-iibsiga. Ilaa iyo inta suurtagalka ah, Dowlad-goboleedka waa in ay tilmaanto jaangooyooyinka caalamku aqbali karo sida kuwa uu soosaaray Ururka Jaangooyooyinka Caalamiga ah (ISO) oo ay tahay qalabka ama agabka ama heerka xirfadda in ay u hoggaansamaan. Halka jaangooyooyinkaas caalamiga ah aan laga heli karin ama aysan ku habboonayn, jaangooyooyinka qaranka ayaa la tilmaami karaa. Dhammaan xaaladaha, dokumeentiyada tartanka waa in ay xusaan in qalabka, agabka, ama heerka xirfadda ee ka soo baxaya jaangooyooyinka mihnadda, ee ballanqaadaya ugu yaraan wax-u-dhigma oo la taaban karo, ayaa sidoo kale la aqbali doonaa.

4.10.2 **Isticmaalid La'aanta Magacyo ay Sharikad Gooni-u-leedahay**: Tilmaamaha gaarka ah waa in lagu saleeyo sifooyinka khuseeya iyo/ama shuruudaha hawl-qabadka. Tixraacyada magacyada ay sharikad ay gooni u leedahay, tirooyinka daliil-hayaha, ama tilmaamaha gaarka ah ee la mid ah waa in laga fogaado. Haddii ay lagama maarmaan noqoto in la soo xigto magac ay sharikad gooni u leedahay ama tirada daliil-hayaha waxsoosaare gaar ah si loo sharxo tilmaan gaar ah oo sida kale aan dhammeystirnayn, ereyada "ama wax-u-dhigma" waa in lagu daro tixraacaasi gadaashiisa. Tilmaanta gaarka ah waa in ay ogolaato aqbalaadda soo-jeedimada alaabo/badeeco leh sifooyin la mid ah oo bixiya wax-qabad ugu yaraan si xoog ah ugu dhigma kuwa la qeexay.

4.10.3 **Tilmaamaha Gaarka ee Xad-dhaafka ah**: Tilmaamaha gaarka ee xad-dhaafka ah waxaa ay dhacaan marka tilmaamaha gaarka ah ay ka bataan jaangooyooyinka ugu hooseeya ee loo baahan yahay si loo dhammeystiro hawsha la rabo waana in laga fogaado.



M. A

4.10.4 **Habraacyada Lagu Xaqiijinayo Tilmaamaha Gaarka ah ee Habboon**: Dowlad-goboleedka waa in ay soo-jeediso tilmaamo gaar ah oo loogu talogalay soo-iibinta alaabo/badeeco ee ka soo baxa shuruudaha ugu hooseeya ee loo baahan yahay si loo dhammeeyo hawsha la rabo. Alaabta/badeecada ka soo baxda jaangooyooyinka ugu hooseeya ma aha in ay noqdaan badeecada tayada suurtagalka ah ee ugu hooseysa leh, balse waa in ay yeelato sifooyinka ugu hooseeya ee muuqaalka/jireed, shaqayn iyo/ama hawlqabad ee loo baahan yahay si loogu dhammeeyo shaqada la rabo hab hufan oo wax-ku-ool ah.

4.10.5 Waaxda Wax-soo-iibsiga ee Dowlad-goboleedka waxay mas'uul ka tahay xaqiijinta tilmaamaha gaarka ah iyo su'aalo wayddiinta xaalado kasta ee lagu tilmaamay tilmaamaha gaarka ee xad-dhaafka ah. Xaaladaha aan caadiga ahayn ee u baahan kara tilaamo gaar ah oo ka sarreeya shuruudaha ugu hooseeya waa in la diiwaangeliyo oo la qoro marka loogu gudbinayo Guddiga Wax-soo-iibsiga in ay ansixiyaan.

4.10.6 Dhammaan xaaladaha ka jira tilmaamaha gaarka ee xad-dhaafka ah, cawaaqibta aasaasiga ah waa xayiraadda tartanka iyo isticmaalka maaliyadaha xad-dhaadka ah oo aan ahayn kuwo hufan oo imaan karta. Tartanka waa uu xaddidan yahay sababta oo ah tilmaamaha gaarka ee xad-dhaafka ah waxay meesha ka saari karaan waxyaabaha kale ee beddelka suurtagalka ah noqon kara ee ka soo-baxaya jaangooyooyinka ugu hooseeya ee isticmaalka la rabo iyaga oo aan xannibin hufnaanta barnaamijka. Tani keliya ma xaddidayso tirada soo-jeedimada tartanada qandaraaska ee la heli karo si loo tixgeliyo, balse waxay u taagan tahay khalkhalgelinta ula-kaca ah iyo khayaanada imaan karta. Waxaa sidoo kale suurtagal ah khasaarinta maaliyado sababta oo ah tilmaamaha gaarka ee xad-dhaafka ah waxaa sidoo kale ka dhalan kara koror ku yimaada qiimaha oo aan loo baahnayn.

### 4.11 Qiimo-goynta

4.11.1 Haddii aan si kale loogu cayimin dokumeentiyada tartanka qandaraaska, tartanada qandaraaska alaabada/badeecada waa in casumaadooda loo fidiyo si ku saleysan (a) CIP[2] loogu talogalay dhammaan alaabada lagu soo sameeyay dibadda, oo ay ka mid yihiin kuwa hore loo soo-dhoofsaday, iyo (b) EXW[3] loogu talogalay alaabada lagu sameeyay ama la isugu xirxiray gudaha Soomaaliya, oo lagu daray kharashka ku baxa gaadiidka dalka gudahiisa ah iyo caymiska

---

[2] U noqo INCOTERMS 2010, oo ay daabaceen International Chamber of Commerce, Cours Albert 1er, 75008 Paris, France, si aad u hesho qeexitaanka CIP.

[3] U noqo INCOTERMS 2010, oo ay daabaceen International Chamber of Commerce, Cours Albert 1er, 75008 Paris, France, si aad u hesho qeexitaanka EXW.



M.A

ilaa meesha ay u socoto. Tartamayaasha waa in loo oggolaado in ay diyaariyaan gaadiidka badda iyo gaadiidka kale iyo caymiska la xiriira ee laga helo meel kasta ee xaq u leh. Halka rakibaadda, hawl u diyaarin, ama adeegyada la mid ah loogu baahan yahay in uu qabto tartamaha/qandaraaslaha, sida xaaladda qandaraasyada "geynta iyo rakibaadda", tartamaha waxaa looga baahan doonaa in uu sheego qiimaha adeegyadan, oo dheeraad ku ah kuwa alaabada.

4.11.2 Tartamayaasha qandaraasyada shaqooyinka waxaa looga baahan doonaa in ay sheegaan qiimaha qayb kasta ama qiimaha halka mar la bixiyo ee loogu talogalay qabashada shaqooyinka. Tartamayaasha waa in loo ogolaado in ay ka helaan dhammaan gashiyada il kasta ee xaq u leh si ay u soo bandhigaan tartankooda qandaraaska ugu fiican ee lagu tartami karo.

**4.12 Isku-hagaajinta Qiimaha**

4.12.1 Dokumeentiyada tartanka qandaraaska waa in ay sheegaan (a) in qiimayaasha tartanka qandaraaska ay noqon doonaan kuwo go'an ama (b) in isku-hagaajinada qiimaha la sameyn doona si ay u muujiyaan isbeddelo kasta (kor ama hoos) ee ku yimaada qaybaha kharashka waaweyn ku baxa ee qandaraaska, sida shaqaalaha, qalabka, agabka, iyo shidaalka. Qodobada isku-hagaajinta qiimaha sida caadig ah looguma baahna qandaraasyada yaryar ee ku lugta leh bixinta alaabo/badeeco iyo dhammeynta shaqooyin sideed iyo toban (18) bilood gudahooda ah, balse waxaa ka mid noqon kara qandaraasyo dhaafsiisan sideed iyo toban (18) bilood.

4.12.2 Qiimayaasha waxaa laga yaabaa in la isku-hagaajiyo iyada oo la isticmaalayo qaaciddada qoran ee u kala qaadaysa qiimaha guud qaybaha ay isku-hagaajiyaan tusiyeyaasha qiimaha ee loo cayimay qayb kasta ama, bedel ahaan, iyadoo ay ku saleysan caddayn dokumeenti ah (oo ay ka mid yihiin qaansheegyada dhabta ah) oo ay bixiso sharikadda wax-iibisa ama qandaraaslaha. Isticmaalka habka qaaciddada ee isku-hagaajinta qiimaha ayaa laga doorbidayaa marka loo eego caddaynta dokumeentiga ah. Habka la adeegsanayo, qaaciddada (haddii la adeegsan karo), iyo taariikhda aasaaska u ah codsiga waa in si cad loogu qeexo dokumeentiyada tartanka qandaraaska. Haddii nooca lacagta ee lacag-bixinta ay ka duwan tahay isha laga helo gashiga iyo tusaalaynta waafaqsan, arrin sixitaan waa in lagu adeegsado qaaciddada, si looga fogaado isku-hagaajin aan sax ahayn/khaldan.

**4.13 Gaadiidka iyo Caymiska**

4.13.1 SBD-yada waa in ay ogolaadaan in sharikadaha wax-iibiya iyo qandaraaslayaasha ay ka diyaarsadaan gaadiid iyo caymis il kasta ee xaq u leh. SBD-yada waa in ay sheegaan noocyada



M.A

iyo shuruudaha caymiska ee uu bixinayo tartamaha. Lacagta loo bixiyo khasaaraha caymiska gaadiidka waa in ay noqoto ugu yaraan boqolkiiba 110 ee qiimaha qandaraaska oo lagu sheegay doolarka Mareykanka ama lacagta degaanka, iyada oo ku xiran nooca lacagta qandaraaska. Qandaraasyada shaqooyinka, foomka siyaasadda "khatarta oo dhan" ee qandaraaslaha sida caadiga ah waa in la cayimo. Mashaariicda waaweyn ee ay dhawr qandaraaslayaal ka shaqaynayaan goobta, qabanqaabada caymiska Mashruuca guud ama "soo-gabagabayn" ayay heli kartaa Dowlad-goboleedka, xaaladaas oo Dowlad-goboleedka ay tahay in ay raadiso tartanka caymiskaas.

**4.14 Noocyada Lacagaha ee Loo Ogol yahay Tartanka Qandaraaska**

4.14.1 SBD-yada waa in ay sheegaan in nooca lacagta tartamayaasha ay tahay in ay ku sheegaan siciradooda/qiimayaashooda Doolarka Maraykanka. Tartamayaasha waa in ay u hoggaansamaan xayiraadaha nooca lacagta ee sida lagu dhigay SBD-yada.

**4.15 Shuruudaha iyo Hababka Lacag-bixinta**

4.15.1 SBD-yada waa in ay cayimaan shuruudaha iyo hababka lacag-bixinta. Shuruudaha lacag-bixinta looma adeegsan karo sida jaangoynta qiimaynta oo ma aha in ay saameeyaan qiimaynta tartanka qandaraaska. Shuruudaha lacag-bixinta waa in ay waafaqaan habdhaqanada ganacsiga caalamiga ah ee lagu dabaqi karo alaabada/badeecada, shaqooyinka, ama adeegyada aan la talinta ahayn ee gaarka ah.

4.15.2 Qandaraasyada alaabta geynta/bixinta waa in ay lacagtooda oo dhan la bixiyo marka la gaarsiiyo oo la baaro alaabada qandaraaska lagu bixiyay marka laga reebo qandaraasyada ku lugta leh rakibaadda, hawl u diyaarinta iyo tijaabinta, xaaladaas oo qayb ka mid ah lacag-bixinta ee la xiriirta rakibaadda ay tahay in la sameeyo marka qandaraaslaha uu dhammeeyo rakibaadda iyo hawl u diyaarinta ka dibna loo hoggaansamo dhammaan waajibaadyda waafaqsan qandaraaska. Haddii ay suurtagal tahay, isticmaalka Waraaqaha Amaahda ayaa la dhiirrigelinayaa si loo hubiyo lacag-bixin dhaqso ah in loo sameeyo sharikada wax-iibisa. Qandaraasyada waaweyn ee loogu talogalay alaabada iyo warshadaha, waa in qabanqaabo la sameeyo oo loogu talogalay lacag-bixino qayb ah/ku-meelgaar ah ee loogu talogalay shaqada la qabtay, qandaraasyada muddada dheerna lacag-bixino ku-meelgaar ah ayaa loo sameynayaa qandaraaslaha inta lagu guda jiro muddada geynta alaabada, rakibaadda, iyo hawl u diyaarinta.

4.15.3 Qandaraasyada shaqooyinka waa in ay bixiyaan lacag-bixinada horusocdka ku meelgaarka ah (sida caadiga ah bishiiba mar) ee loogu talogalay shaqada la qabtay iyada oo la



M.A

horumarinayo hawlqabadka qandaraaska, boqolkiiba waxyar ayaa laga haynayaa/celinayaa ee ah sida lagu cayimay qandaraaska. Lacagta laga celiyo ee sidaa looga hayo waa in la siidaayaa marka lagu guulaysto dhammeystirka qandaraaska iyo marka loo hoggaansamo waajibaadyada qandaraaslaha oo dhan.

4.15.4 Lacag-bixino ku-meelgaar ah kasta ee loogu talogalay shaqada la sameeyay waa in lagu saleeyo qaddarka la qiyaasay ee shaqada ilaa taariikhdaas la dhammeeyay, lacag-bixinadii hore ka yar, iyo habka bixinta caddaynta shaqada la qabtay (sida caadiga ah ay sameeyaan Injineero ama La-taliye madax-bannaan) waa in lagu cayimo qandaraaska. Qaddarada iyo waqtiga loo qabtay lacag-bixinada kale ee la sameyn doono, sida agabka la gaarsiiyay/geeyay goobta ee loogu talogalay in lagu daro shaqooyinka, waa in sidoo kale lagu cayimo qandaraaska.

**4.16 Lacag-bixinada Hormariska ah**

4.16.1 Lacag-bixinada hormariska ah waa horumariska maaliyado la siiyo kuwa iibiya alaabta ama qandaraaslaha bilowga qandaraaska, si loogu caawiyo baahiyadooda qulqulka lacagta kaashka ee loogu talogalay ujeeddada hawl-qabadkooda waafaqsan qandaraaska. Maadaama lacag-bixinada hormariska ah aanan lagu cabbirin hawlqabadka qandaraaska, waxay ka duwan yihiin lacag-bixinada horumarka/horusocodka oo ah kuwo lagu saleeyo hawlqabadka dhabta ah ee hawlaha la sameeyay. Lacag-bixinada hormariska ah waxaa loo adeegsan karaa in lagu bixiyo kharashka abaabulka ee hore ee loogu talogalay qandaraasyada shaqooyinka lacagaha badan ama alaabada lagu sameeyay qof dalabkiisa. Ka hor inta aan la sameyn wax lacag-bixin hormaris ah, qandaraaslaha waa in uu soo-gudbiyo damaannada bankiga oo loogu ansixinayo Dowlad-goboleedka qaddar lacageed oo la mid ah lacag-bixinta hormariska ah, waxaa ay u haysanaysaa Dowlad-goboleedka damaannad ahaan lacala haddii ay dhacdo in kuwa iibiya alaabada ama qandaraaslaha uu ka soo bixi waayo hawsha loo igmaday. Lacag-bixinta hormariska ah waxaa laga qaadayaa qandaraaslaha iyada oo lagu sameynayo lacag ka-reebid habboon qaansheegyada. Lacag-bixinada hormariska ah waa in lagu xaddido ugu badnaan boqolkiiba toban (10) ee qiimaha qandaraaska ee loogu talogalay dhammaan noocyada wax-soo-iibsiga. Bedel ahaan, lacag go'an ayaa lagu cayimi karaa dokumeentiyada tartanka qandaraaska sida lacag-bixinta hormariska ah, xaaladaas oo qaddarka lacagta laga dhigi karo qiyaastii 10% ee miisaaniyadda wax-soo-iibsiga. Qandaraasyada adeegyada aan la-talinta ahayn iyo qandaraasyada adeegyada La-talinta sida caadiga ah ma aha in ay yeeshaan lacag-bixin hormaris ah. Sabab u yeelidda iyo

ansixinta lacag-bixinada hormariska ah waa in lagu daro faylalka wax-soo-iibsiga waana in ay ansixiyaan Guddiga Wax-soo-iibsiga.

**4.17 Lacag-bixinada (Horsocodka) Ku-meel-gaarka ah**

4.17.1 Qandaraasyada muddada gaaban ee saddexda (3) bilood ama ka yar ah lacag-bixin hal mar la bixinayo marka la gaarsiiyo alaabta/la dhammeeyo ayaa ah habka lacag-bixinta la doorbido. Hase-yeeshee, lacag-bixinada ku-meelgaarka ah waa qaabka lacag-bixinta la doorbidayo ee qandaraasyada, haddii loogu talogalay alaabada, shaqooyinka ama adeegyada, halka dhererka muddada qandaraaska uu ka badan yahay saddex (3) bilood. Lacag-bixinada ku-meelgaarka ah waa lacag-bixino dhawr-qaybood ka kooban (sida caadiga ah bil kasta), mid kastana la bixiyo marka hawlqabad qandaraaska oo qayb ahaan la aqbali karo la qabto. Inkasta oo lacag-bixinada ku-meelgaarka ah loo tixgeliyo sida hab lacag-bixin balse aan ahayn habab maaliyad-siin qandaraas, lacag-bixinta hawlqabadka qayb ahaan waxay siinaysaa kuwa iibiya alaabada iyo qandaraaslayaasha qulqulka kaashka shaqeynaya ee loo baahan yahay. Sidaa awgeed lacag-bixinada ku-meelgaarka ah waxay yareyn karaan baahida loo qabo lacag-bixino hormaris ah oo badan.

4.17.2 Mar kasta oo ku habboon, alaabada qandaraaska ee la gaarsiin karo iyo jadwalka lacag-bixinta waa in la qorsheeyo si loo ogolaado aqbalidda iyo lacag-bixinta loogu talogalay qaybaha gaarka ah ee hawlqabadka qandaraaska ee waafaqsan shuruudaha qandaraaska ee la dabaqi karo, si lacag-bixinta loo sameeyo waxyar ka dib dhammeystiridda gaarsiin kasta. Inta lagu guda jiro marxaladaha hore ee fulinta qandaraaska, lacag-bixinada waxaa loo jadwaleyn karaa gaarsiinada hawlahaas ama waxyaabaha kale ee shaqada sida (a) qorshaha shaqo ama warbixinta bilaabashada, (b) gaarista dhacdooyinka qeexan, sida dalabyada la dhigay ama shaqaalaha la abaabulay, (c) dhisidda xafiis, iyo (d) lacagaha hormarin ahaan loo dhigo ee alaabta iyo adeegyada loogu baahan yahay hawlqabadka qandaraaska. Marka qandaraaslaha uu hawlgalo, lacag-bixinada waxay u badan tahay in ay noqdaan kuwo in badan aan soo noqnoqan oo waxyaabaha la gaarsiin karo si loo bilaabo lacag-bixinta waxay ku xirnaanaysaa hawlqabadka ee shaqada qorsheysan, sida boqolkiiba ama marxaladda la dhammeeyay, ka guulgaaridda dhacdooyinka la qeexay ama tallaabooyinka kale ee la qiyaasi karo ee natiijooyinka.

4.17.3 Lacag-bixinada horusocodka ah ee ku saleysan kharashka waxaa ay keliya habboon yihiin xaaladda qandaraasyada nooca kharashka la isku celinayo. Lacag-bixinada horusocodka ah ee ku saleysan dokumeentiga taageeraya kharashka uu ka baxay kuwa iibiya ama



M.A

qandaraaslaha iyada oo ay shaqada qandaraaska ay socoto. Qandaraasyada kharashka la isku celiyo aad ayay u adag tahay in la maamulo. Dhammaan xaaladaha lacag-bixinada horusocodka ku saleysan kharashka lagu adeegsado. Dowlad-goboleedka waa in ay hubiso in dhammaan kharashka hoos yimaada qandaraasyadaas la ogolaan karo oo si habboona loo diiwaangeliyo oo loogu yeelo sabab fiican si waafaqsan Mabaadii'da Kharashka ee khuseeya.

**4.18 Lacag-bixinta Ugu Dambeysa**

4.18.1 Lacag-bixinta ugu dambeysa waxaa keliya la sameeyaa ka dib marka dhammaan hawlqabadka qandaraaska la dhammeeyo oo la aqbalo. Sida caadiga ah, boqolkiiba qadar lacagta qandaraaska ah ayaa laga hayaa muddo waqti ah ka dib dhammeynta muuqata iyo gaarsiinta alaabada ama shaqooyinka. lacago ka haynta sida caadiga ah laguma adeegsado qandaraasyada loogu talogalay adeegyada.

**4.19 Damaannadaha iyo Kafaalooyinka Waxqabadka**

4.19.1 Damaannada Waxqabadka waa in aan lagu adeegsan tartano qandaraas kasta ee Dowlad-goboleedka ama qandaraasyada ku xiga.

**4.20 Tartanka Qandaraas Kale**

4.20.1 SDB-yada waa in ay si cad u tilmaamaan marka tartamayaasha loo ogol yahay in ay soo gudbiyaan tartan qandaraasyo kale, sida tartanada qandaraasyada kale ay tahay in loo soo gudbiyo, sida qiimeyaasha tartanka qandaraaska ay tahay in loo soo bandhigo iyo aasaaska ay tahay in tartanka qandaraasyada kale lagu qiimeeyo.

**4.21 Lacagaha Magdhowga Khasaaraha iyo Qaansheegada Abaal-gudka**

4.21.1 Qabanqaabada lacagaha magdhowga khasaaraha ama qabanqaabada la midka ah ee qaddarka habboon (haddii la adeegsado kuwan sida caadiga ah waxaa loo tilmaamaa sida "0.05% ee qiimaha qandaraaska ee maalin kasta ee ku yimaada dib-u dhac lacagta ugu badan ee ah 5% ee Qiimaha Qandaraaska) waa in lagu daro shuruudaha qandaraaska marka dib-u dhacyo ay ku yimaadaan gaarsiinta alaabada, dhammeynta shaqooyinka ama adeegyada aan la-talinta ahayn si looga soo baxo shuruudaha hawlqabadka waxaa ka dhalanaya kharash dheeraad ah ama khasaaridda dakhli ama khasaaridda faa'iidooyin kale ee soo gaara Dowlad-goboleedka. Iyada oo ay jirto ansaxinta hore ee Dowlad-goboleedka, qabanqaabo ayaa la sameyn karaa si abaal-gud loo siiyo kuwa iibiya alaabada ama qandaraaslayaasha dhammeeya shaqooyinka ama keena alaabada ka hor waqtiyada lagu cayimay qandaraaska marka dhammeyntaas ama geyntaas waqtiga hore ah ay faa'iido ugu jirto Dowlad-goboleedka.



M.A

**4.22 Duruufo Khasab ah/aan laga fursan karin (*Force Majeure*)**

4.22.1 Shuruudaha qandaraaska waa in ay shardi ku xiraan in guuldarada/fashilka ee qaybta dhinacyada ay ku qabanayaan waajibaadyadooda qandaraaska looma tixgelin doono in ay tahay fulin-waa haddii guuldaradaas ay ka dhalato dhacdada duruufo khasab ah sida lagu qeexay shuruudaha qandaraaska.

**4.23 Sharciga Lagu Dabaqi Karo iyo Xallinta Khilaafaadka**

4.23.1 Shuruudaha Qandaraaska waa in ay ka mid noqdaan qabanqaabooyin lagula tacaalayo sharciyada lagu dabaqi karo iyo madasha xallinta khilaafaadka. Xallinta khilaafaadka waa in ay ka dhacaan dalka lagu sheegay Shuruudaha Qandaraaska. Xaaladda qandaraasyada shaqooyinka, qandaraasyada alaab geynta iyo rakibaadda, qabanqaabada xallinta khilaafaadka waxaa sidoo kale ka mid noqon kara hababka sida garsoorayaasha ama guddiyada dib-u-eegista khilaafka, kuwaa oo loo qaabeeyay in ay oggolaadaan xallinta khilaafaadka oo degdeg ah.

**4.24 Furitaanka Tartanka Qandaraaska, Qiimaynta iyo Qandaraas Bixinta**

4.24.1 Waqtiga loogu talogalay Diyaarinta Tartanka Qandaraaska: Waqtiga loo oggol yahay diyaarinta iyo soo-gudbinta tartanka qandaraaska waa in la go'aamiyo iyada oo la tixgelinayo xaaladaha gaarka ah ee hawsha, baaxadda iyo adkaanta qandaraaska, iyo muddada ogeysiiska hormariska ah ee uu bixiyay GPN iyo haddii la dabaqi karo SPN. Halka shaqooyin waaweyn ama qalab qaybo kala duwan ka sameysan ay ku lug leeyihiin, muddada waa in ay dheeraato si ay u awoodaan tartamayaasha la filayo in ay sameeyaan baaritaano ka hor inta aysan soo gudbin dalabkooda tartanka qandaraaska. Xaadahaas, Dowlad-goboleedka waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay isugu yeerto shirarka tartanka qandaraaska hore oo ay qabanqaabisaa booqashooyinka goobta. Tartamayaasha waa in loo ogolaado in ay ku soo gudbiyaan arjigooda tartanka qandaraaska sharikadaha waraaqaha qaada ama in ay gacanta ku keenaan. Dowlad-goboleedka waxaa ay sidoo kale adeegsan kartaa sistem ama nidaam elektaroonig ah oo u ogolaanaya tartamayaasha in ay ku soo gudbiyaan araajiyadooda tartanka qandaraaska siyaabo elektaroonig ah, haddii Dowlad-goboleedka ay ku qanacsan tahay ku filnaanshaha habka, oo ay ka mid yihiin, in sistemka uu ammaan yahay, ilaaliyo sirta iyo asal ahaanta araajida tartanka qandaraaska ee la soo gudbiyay iyo adeegsiga nidaamka saxiixa elektarooniga ah ama wax la mid ah si loo ilaaliyo in tartamayaasha ay ku xiran yihiin araajidooda tartanka qandaraaska iyo waxyaabo kale. Xaaladdan, tartamayaasha waa in ay sii-wataan in ay ikhtiyaarka u leeyihiin in ay soo gudbiyaan araajidooda tartanka qandaraaska oo nuqul adag ah. Taariikhda kama dambeyska iyo goobta lagu

qabtay araajida qandaraaska waa in lagu cayimo dalabka casumaadda ee qandaraaska.

4.24.2 **Habraacyada Furitaanka Tartanka Qandaraaska:** Waqtiga furitaanka tartanka qandaraaska waa in uu la mid noqdaa taariikhda kama dambayska ee loogu talogalay qabashada araajida tartanka qandaraaska ama markaas ka dib, taasi oo loogu talogalay, si loo ogolaado waqti ku filan in la geeyo araajida tartanka qandaraaska goobta loogu dhawaaqay furitaanka tartanka qandaraaska ee dadweynaha waana in loogu dhawaaqo, iyada oo ay la socdaan goobta furitaanka tartanka qandaraaska, dalabka casumaadda. Dowlad-goboleedka waa in ay ka furto dhammaan tartanada qandaraaska goobta iyo waqtiga la sheegay. Araajida tartanka qandaraaska ee la qabto ka dib waqtiga la sheegay waa in aan la tixgelin. Tartamayaasha ama wakiiladooda waa in loo ogolado in ay joogaan (qof ahaan ama online-ahaan, marka tartanka qandaraaska elektarooniga ah la adeegsado) furitaanka tartanka qandaraaska. Dadweynaha guud kama soo qaybgali karaan. Magaca tartamaha iyo tirada guud ee tartan qandaraas kasta iyo tartanka qandaraasyo kasta oo kale haddii la codsaday ama la ogolaaday, waa in kor loo akhriyo (ama lagu baahiyo online-ka marka tartanka qandaraaska elektarooniga ah la isticmaalo) oo la diiwaangeliyo marka la furo. Nuqulka diiwaankan waa in la siiyo tartamayaasha iyada oo la raacayo qodobada ku xusan dokumeentiyada tartanka qandaraaska.

4.24.3 **Caddaymaha ama Beddelaadaha Tartanka Qandaraaska:** Marka laga reebo sida lagu sheegay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga, tartamayaasha waa in aan laga codsan ama loo ogolaan in ay wax ka beddelaan araajidooda tartanka ka dib taariikhda kama dambayska ah ee helitaanka araajida qandaraaska. Dowlad-goboleedka waa in ay wayddiiso tartamayaasha caddaymaha loo baahan yahay si ay u qiimayso araajidooda qandaraaska balse waa in aysan wayddiin ama u oggolaan tartamayaasha in ay wax ka beddelaan nuxurka ama qiimaha araajidooda qandaraaska ka dib furitaanka tartanka qandaraaska. Codsiyada caddaynta iyo jawaabaha tartamayaasha waa in lagu sameeyo qoraal, nuqul adag iyo/ama sistem elektaroonig ah oo ay ku qanacdo Dowlad-goboleedka.

4.24.4 **Ilaalinta Sirta La Xiriirta:** Ka dib marka dadweynaha loo furo tartanka qandaraaska, macluumaadka la xiriira baaritaanka, caddaynta, iyo qiimaynta tartanka qandaraaska iyo talooyinka la xiriira qandaraas-bixinta waa in aan loo sheegin tartamayaasha ama shaqsiyaadka kale ee aan si rasmi ah u khusayn hannaanka ilaa laga baahiyo qandaraas-bixinta.

4.24.5 **Baarista Tartanka Qandaraaska:** Dowlad-goboleedkawaa in ay xaqiijiso haddii tartanada qandaraaska (a) ay ka soo baxeen shuruudaha xaq-u-yeelashada ee lagu cayimay



M.A

Buuggan Habraacyada Qandaraaska, (b) si habboon loo saxiixay, (c) oo ay la socdaan damaannadaha loo baahan yahay ama baaqa loo baahan yahay oo loo saxiixay sida lagu cayimay Buuggan Habraacyada Qandaraaska, (d) waxay sida badanka ah ka jawaabaan SBD, iyo (e) sida kale guud ahaan nidaamsan. Haddii tartan qandaraaska uusan sida badanka ah jawaabin, oo ah, in ay ku jiraan wax jebinaya ama ka gaabinaya shuruudaha, xaaladaha, iyo tilmaamaha gaarka ah ee ku jira dokumeentiyada tartanka qandaraaksa, waa in aan la sii tixgelin. Tartamaha waa in aan loo ogolaan in uu saxo ama uu ka noqdo wax jebinta ama ka gaabinta marka tartanada qandaraaska la furay.

4.24.6 **Qiimaynta iyo Isbarbardhiga Tartanada Qandaraaska**: Ujeeddada qiimaynta tartanka qandaraaska waa in loo go'aamiyo qiimaha Dowlad-goboleedka ee tartan qandaraas kasta ee ah hab oggolaanaysa isbarbardhig ku saleysan qiimahooda ee la qiimeeyay. Iyada oo ku xiran faahfaahinada ku qoran gudaha Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga, tartanka qandaraaska ee leh qiimaha ugu yar ee la qiimeeyay balse daruuri ma aha qiimaha ugu yar ee la soo gudbiyay in loo xusho qandaraas-bixinta.

4.24.7 Qiimaha tartanka qandaraaska ee kor loogu akhriyay furitaanka tartanka qandaraaska waa in la hagaajiyo si loo saxo khaladaad xisaabeed kasta. Sidoo kale, ujeeddo qiimayn darteed, isku-hagaajino waa in loo sameeyo ka noqosho ama weecin kasta ee aan agabka ahayn ee la cabbiri karo ama la qiyaasi karo.

4.24.8 Qiimaynta iyo isbarbardhigidda tartanada qandaraaska waa in ay noqdaan qiimayaasha CIP ee loogu talogalay geynta alaab dibadda laga keeno. Dowlad-goboleedka waxaa ay wayddiin kartaa qiimayaasha oo ku saleysan CIF (iyo tartanada qandaraaska oo la barbardhiga aasaas la mid ah) keliya marka alaabta lagu soo qaado gaadiidka badda oo alaabada aan la soo gelin konteenar. CIF waa in aan loo adeegsan wax kasta oo aan ahayn gaadiidka badda. Xaaladaha alaabta warashadaysan, ma dhici karto in doorashada ama ikhtiyaar CIF uu noqdo mid habboon, sababta oo ah alaabadan sida caadiga ah waa kuwo konteenar ku jira. CIP waxaa loo adeegsan karaa hab gaadiid kasta, oo ay ka mid yihiin badda iyo gaadiidka qaababka badan leh. Qiimayaasha EXW, oo lagu daray kharashka gaadiidka gudaha iyo caymiska ee meesha loo wado, ayaa loo adeegsan karaa alaabada lagu warshadeeyay gudaha Soomaaliya, oo la socda qiimahaasha loogu talogalay rakibaad, tababar, hawl-u-diyaarin kasta, iyo adeegyada kale ee la midka ah. Qiimaynta tartanka qandaraasyada waa in aan lagu tixgelin: (a) canshuurta kastamka iyo canshuuraha kale ee laga qaado alaabada dibadda laga keena ee uu soo xigto CIP (kuwaas oo



M.A

laga reebay canshuuraha kastamka); ama (b) canshuuraha iibka iyo kuwa la mid ah ee laga qaado ee la xiriira iibka iyo gaarsiinta alaabada.

4.24.9 SDB-yada waa in ay sidoo kale cayimaan arrimaha khuseeya marka lagu daro qiimaha lagu tixgelinayo qiimaynta tartanka qandaraaska iyo habka loo adeegsan doono ee loogu talogalay ujeeddada go'aaminta tartanka qandaraaska la qiimeeyay ee ugu yar. Alaabada iyo qalabka, arrimo kale ayaa loo tixgelin karaa oo ay ka mid yihiin, waqtiga gaarsiinta, kharashka hawlgalka, hufnaanta iyo isqaadashada qalabka, helitaanka adeegga iyo qaybaha dayactirka, iyo tababarka la xiriira, ammaanka, iyo faa'iidooyinka deegaanka. Arrimaha ka jawaabidda farsamo ee aan ahayn qiimaha loo adeegsanaya go'aaminta tartanka qandaraaska la qiimeeyay ee ugu yar waa in la siiyo miisaan la hal maala qabanqaabada qiimaynta ee dokumeentiyada tartanka qandaraaska.

4.24.10 Qiimaynta tartanka qandaraaska ee shaqooyinka waa in keliya lagu saleeyo qiimaha tartanka qandaraaska ee u hoggaansama dhammaan tilmaamaha gaarka ah ee farsamo. Araajida tartanka qandaraaska ee farsamo ahaan aan addeecin waa in la diido. Habraac qiimayn kasta ee waafaqsan tartanada qandaraaska ka korreeya ama ka hooseeya qiyaasta qiimaha mashruuc hore loo go'aamiyay ee sida otomaatikada ah loo joojiyo lama aqbalo. Haddii waqtiga uu yahay arrin muhiim ah, qiimaha dhammeynta waqtiga hore ah ee Dowlad-goboleedka ayaa loo tixgelin karaa si waafaqsan habka lagu soo bandhiga dokumeentiyada tartanka qandaraaska, keliya haddii shuruudaha qandaraaska loo bixiyay ciqaabaha isu-dhigma ee loogu talogalay addeecid la'aanta oo Dowlad-goboleedka ay oggolaatay ansixinta hore.

4.24.11 Dowlad-goboleedka waa in ay diyaariso warbixin faahfaahsan oo ku saabsan qiimaynta iyo isbarbardhiga tartanada qandaraaska oo dhigaya sababaha gaarka ah ee lagu saleeyo talada qandaraas-bixinta.

4.24.12 **Doorbididda Sharikadaha Maxaliga ah:** Dowlad-goboleedka waxaa ay ku khasbanaan kartaa in lagu daro SBD ka hor bixinta, in ay ogolaato doorbididda sharikadaha maxaliga ah.

4.24.13 **Kordhinta Muddada Ansaxnimada Tartanada Qandaraaska:** Dowlad-goboleedka waa in dhammeyso qiimaynta tartanada qandaraaska iyo bixinta qandaraaska gudaha muddada ansaxnimada tartanka qandaraaska ee bilowga ah si aan loogu baahan muddo kordhin. Kordhinta muddada ansaxnimada tartanka qandaraaska, haddii loo sababeeyo daruufo aan caadi ahayn, waa in qoraal loogu codsado dhammaan tartamayaasha ka hor taariikhda dhicitaanka muddada.

4.24.14 **Shuruudaha Dambe ee laga rabo Tartamayaasha/Qandaraaslayaasha:** Haddii



M.A

tartamayaasha aysan shuruudaha hore ka soo bixin. Dowlad-goboleedka waa in ay go'aamiso haddii tartamaha arjigiisa tartanka qandaraaska la go'aamiyay in uu soo bandhigayo qiimaha la qiimeeyay ee ugu yar iyo arjiga tartanka qandaraaska ee sida badanka ah jawaaba ee leh kartida iyo khayraadka sida hufan loogu fulin karo qandaraaska ee ah sida lagu soo bandhigay tartanka qandaraaska. Waxyaabaha laga soo baxaya waa in lagu dhigo dokumeentiyada tartanka qandaraaska, iyo haddii tartamaha uusan ka soo bixin, arjiga tartanka qandaraaska waa in la diido. Dhacdada noocaas ah, Dowlad-goboleedka waa in ay gaarto go'aan la mid ah oo sidoo kale ay xaqiijiso xaq-u-yeelashada tartamaha la qiimeeyay ee xiga ee ugu hooseeya. Haddii tartamayaasha aysan hore uga soo-bixin, Dowlad-goboleedka waa in ay codsato wararka ku soo kordha macluumaadka la bixiyay waqtiga shuruudaha hore, waana in ay xaqiijiso haddii tartamaha la qiimeeyay ee ugu hooseeya uu weli ka soo baxayo waxyaabaha ku jira shuruudaha hore.

4.24.15 **Bixinta Qandaraaska:** Dowlad-goboleedka waa in ay bixiso qandaraaska, oo ay siiso muddada ansaxnimada tartanka qandaraaska gudahiisa, tartamaha ka soo baxa jaangooyooyinka habboon ee kartida iyo khayraadka ee arjagiisa tartanka qandaraaska la go'aamiyay (i) in uu sida badanka ah ka jawaabaya dalabka dokumeentiyada tartanka qandaraaska oo (ii) soo bandhigaya qiimaha la qiimeeyay ee ugu hooseeya. Tartamaha waa in aan looga baahan, sida shuruud ku xiran qandaraas bixinta ahaan, in uu qaado mas'uuliyadaha shaqo ee aan lagu sheegin SBD ama haddii kale in uu wax uga beddelo tartanka qandaraaska sidii asal ahaan loogu soo gudbiyay.

4.24.16: **Baahinta Qandaraas Bixinta**: Ka dib marka qandaraaska la bixiyo, Dowlad-goboleedka waa in ay ku baahiso natiijooyinka, iyada oo aqoonsanaysa wax-soo-iibsiga, magaca tartamaha guulaystay iyo qiimaha, muddada, iyo baaxadda qandaraaska oo kooban isla goobta martigelisay GPN iyo SPN. Macluumaad isku mid ah waa in loo diro dhammaan tartamayaasha soo gudbiyay araajida tartanka qandaraaska. Soo-dhejinta mareegtooyinka SPN waa in si bil kasta ah loo sameeyo. Soo-dhejinta waa in ay noqoto qaab shax ama jadwal kooban ah oo ka hadlaya muddadii hore. Dhammaan dhejinadaas waa in ay noqdaan Af Ingiriis iyada oo ay go'aankeedu leedahay Dowlad-goboleedka, ayaa sidoo kale waxay noqon karaan Af Soomaali.

4.24.17 **Diidmada Dhammaan Araajida Tartanada Qandaraasyada:** SDB-yada sida caadiga ah waxaa ay dhigayaan in Dowlad-goboleedka ay diidi karto dhammaan araajida tartanada qandaraaska. Diidmada dhammaan araajida tartanada qandaraaska waxaa loo sababeeyaa marka uusan jirin tartan wax-ku-ool ah, araajida tartanka qandaraaska aysan ahayn kuwo sida badanka



M.A

ah ka jawaabaya ama marka qiimayaasha tartanka qandaraaska aysan macquul ahayn ama sida badanka ah ka badan miisaaniyadda Dowlad-goboleedka ee loogu talogalay mashruuca. Tartan la'aanta waa in aan keliya la go'aamin iyada oo lagu saleynayo tirada tartamayaasha. Xataa marka keliya hal arji tartan qandaraas la soo gudbiyo, hannaanka tartanka qandaraaska waxaa loo tixgelin karaa in uu ansax yahay haddii tartanka qandaraaska si lagu qanco loo xayaysiiyo oo sicirada/qiimayaasha ay yihiin kuwo macquul ah marka loo barbardhigo qiimayaasha suuqa. Dowlad-goboleedka waxaa laga yaabaa, ka dib marka uu ansixiyo Guddiga Wax-soo-iibsiga, in ay diido dhammaan araajida tartanada qandaraaska. Haddii araajida tartanada qandaraaska oo dhan la diido, Dowlad-goboleedka waa in ay dib-u eegto sababaha lagu sababeynayo diidmada waana in ay tixgeliso in ay muraajacayso shuruudaha qandaraaska, naqshadda iyo tilmaamaha gaarka ah, baaxadda qandaraaska, ama isku-jirka kuwaan, ka hor inta aysan casumaad u fidin tartan qandaraas oo cusub. Haddii diidmada dhammaan araajida tartanada qandaraaska ay sabab u yihiin tartan la'aan, xayaysiin ballaaran waa in la tixgeliyo. Haddii diidmada ay sabab u tahay in dhamaan ama badankooda araajida tartanka qandaraaska ay yihiin kuwo aan jawaabayn, araaji tartan qandaraas cusub ayaa casumaad loo fidin karaa oo laga helayo sharikadaha bilowgii ka soo baxay shuruudaha hore, ama iyada oo ansixin laga helayo Dowlad-goboleedka keliya kuwa soo gudbiyay araajida tartanka qandaraaska codsashada koowaad. Dhammaan araajida tartanada qandaraaska waa in aan la diidin waana in araaji cusub casumaad loogu fidiyo isla tartanka qandaraaska iyo dokumeentiyo qandaraas iyada oo ujeeddada keliya ay tahay in la helo qiimayaal hooseeya.

4.24.18 **Xog-waraysi:** SDB-yada waxay cayimi karaan in tartame kasta ee doonaya in uu xaqiijiyo sababaha, arjigiisa aan loo xulan, waxaa uu ka codsan karaa sharaxaad Dowlad-goboleedka. Dowlad-goboleedka waa in ay si dhaqso ah u bixisaa sharaxaadda sababta arjigaas tartanka qandaraaska aan loo xulan, iyada oo ah qoraal iyo/ama kulan xogwaraysi, oo ay ikhtiyaarka ay leedahay Dowlad-goboleedka. Tartamaha codsanaya ayaa bixin doona dhammaan kharashka ku baxaya ka qaybgalka xog-waraysigaas.

### 4.25 Hababka Kale ee Wax-soo-iibsiga

4.25.1 Qayb-hoosaadan waxay sharxaysaa, habka dookha hoos-u-daadegidda, hababka wax-soo-iibsiga ee lagu adeegsan karo halka Qandaraaska Lagu Tartamo uusan noqon habka wax-soo-iibsiga ugu hufan ee dhaqaale ahaan ugu habboon, iyo halka hababka kale loo arko in ay aad ugu habboon yihiin. Qandaraasyada waa in aan loo qaybin qaybo yaryar si looga dhigo kuwo soo-



M.A

jiidasho yar u leh habraacyada Qandaraaska Lagu Tartamo.

4.25.2 **Tartanka Qandaraaska ee Xaddidan:** Tartanka Qandaraaska ee Xaddidan ("LB") asal ahaan waa Qandaraaska Lagu Tartamo ee leh casumaad toos ah oo aan lahayn xayaysiin furan. Waxaa uu noqon karaa habka wax-soo-iibsiga habboon halka (a) ay ka jiraan kaliya tiro xaddidan oo ah sharikadao wax-iibiya, ama (b) sababo kale oo ka duwan ayaa u yeeli kara sabab fiican oo looga tagayo habraacayda Qandaraaska Lagu Tartamo oo dhammeystiran. Gudaha Tartanka Qandaraaska ee Xaddidan ("LB"), Dowlad-goboleedka waa in ay araajida tartanka qandaraaska ka raadisaa liiska qandaraaslayaal iyo sharikado alaab iibiya oo suuroobi kara kuwaaṣ oo ah kuwo ballaaran oo ku filan in la hubiyo qiimayaal lagu tartamo, liiskaas waa in ay ka mid noqdaan dhammaan sharikadaha alaabada iibiya ama qandaraaslayaasha marka ay jiraan keliya tiro xaddidan. Marka laga eego dhan kasta ee aan ka ahayn xayaysiinta, habraacyada Qandaraaska Lagu Tartamo waa in la adeegsado, oo ay ka mid yihiin baahinta qandaraas-bixinta sida lagu sheegay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga.

4.25.3 **Adeegasho:** Adeegashada waa hab wax-soo-iibsi oo ku saleysan isbarbardhiga qiimo sheega laga helay dhawr sharikado oo alaabaha iibiya (xaaladda alaabada) ama laga helay dhawr qandaraaslayaal (xaaladda "shaqooyinka"), oo ah ugu yaraan saddex (3), si loo hubiyo qiimayaal lagu tartamo, waana habka ugu habboon ee soo iibasashada alaabada iska diyaarka ah ama badeecooyinka qiimaha yar ee leh tilmaamaha gaarka ah ee caadiga ah, ama "shaqooyinka sahlan" ee qiimaha yar. Adeegashada waxaa la adeegsan karaa marka qandaraaska uu haysto qiimo la qiyaasay oo ah Toban Kun oo Doolarka Maraykanka ah (US $10,000) ama ka yar. Codsiyada qiimo sheega waa in ay tilmaamaan sharaxaadda iyo tirada alaabada ama tilmaamaha gaarka ah ee shaqooyinka ama adeegyada aan la-talinta ahayn, iyo sidoo kale waqtiga iyo goobta gaarsiinta (ama dhammeynta) la rabo. Qiimo sheegidda waxaa loo soo gudbin karaa waraaq ahaan, habab fakis ama elektaroonig ahaan. Qiimaynta qiimo sheega waa in ay raacaan mabaadii' la mid ah Qandaraaska Lagu Tartamo. Shuruudaha soo-bandhiga la aqbalo dalabka iibka ama qandaraaska kooban.

4.25.4 **Ka Helidda Hal Meel oo Keliya:** Ka-helidda Hal Meel oo Keliya waa qandaraas-bixin aan lahayn tartan waxayna noqon kartaa hab habboon iyada oo la eegayo mid ka mid ah ama in badan oo ah xaaladahan soo socda:

(a) Qandaraaska jira ee alaabada, shaqooyinka ama adeegyada aan la-talinta ahayn, ee loo bixiyay si waafaqsan habraacyo ay aqbali karto Dowlad-goboleedka, waxaana lagu ballaarin



M, A

karaa xaddad macquul ah gudahooda, ee loogu talogalay alaabada, shaqooyinka ama adeegyada aan la talinta ahayn ee dheeraadka ah ee dabciga la midka ah. Dowlad-goboleedka waa in ay ku qanacdo xaaladahaas ee aan laga heli karin wax faa'iido ah tartanka dheeraadka ah iyo in qiimayaasha qandaraaska la fidiyay ay macquul yihiin. Qabanqaabada fidintaas, haddii loo arko in ay hore u dhici karto, waa in lagu daro qandaraaska asalka ah.

(b) Jaangoynta qalabka ama qaybaha-dayactirka, si ay ula jaan-qaadaan qalabka jira, waxay sababeyn karaan iibka dheeraadka ah ee laga helo sharikada asal ahaan iibisa. Iibyadaas si loogu sababeeyo, qalabka asalka ah waa in uu noqdaa mid ku habboon, tirada agabka waa in ay guud ahaan noqdaan kuwo ka yar tirada jirta, qiimaha waa in uu noqdaa mid macquul ah, waana in faa'iidooyinka meel kale oo lagu sameeyo ama laga helo qalabka la tixgeliyay oo lagu diiday sababo ay aqbali karto Dowlad-goboleedka.

(c) Qalabka loo baahan yahay waa in uu noqdaa mid cid gaar ah ay leedahay oo laga heli karo keliya hal meel.

(d) Qandaraaslaha ka mas'uulka ah naqshada hannaanka waxaa uu u baahan yahay in uu ka soo iibiyo agabka muhiimka ah sharikad gaar ah oo iibsiga sida shuruudo damaannad hawlqabad ahaan.

(e) Xaaladaha ka duwan kuwa gaarka ah, sida kuwa looga jawaabayo masiibooyinka dabiiciga ah.

(f) Qiimaha qandaraaska uu yahay kun doolarka Mareykanka ah (US $1,000) ama wax ka yar. **Daruuf kasta oo ay jirto waa in habkan aan loo adeegsan ujeeddo ah in loo qaybiyo shuruudaha wax-soo-iibsiga kuwo badan oo yaryar si ay u dhacaan gudaha heerkan.**

4.25.5 **Habka Wax-soo-iibsiga Hay'adaha Dowladdu ay Fuliyaan/Force Account:** Habka Wax-soo-iibsiga Hay'adaha Dowladdu ay Fuliyaan, waxaa loola jeedaa, wax dhisidda loo adeegsanayo hawlwadeenno u shaqeeya dowladda iyo qalab ay dowladdu leedahay, waxaa uu noqon karaa habka keliya ee loo adeegsan karo in lagu dhiso shaqooyinka qaar. Qayb wax dhisid oo ay dowladdu leedahay oo sharci-ahaan, hawlgal ahaan iyo maaliyad ahaanba aan madax-bannaanayn waa in loo tixgeliyo qaybta habka wax-soo-iibsiga hay'adaha dowladdu ay fuliyaan. "Habka wax-soo-iibsiga hay'adaha dowladdu ay fuliyaan" sida kale waxaa loo yaqaanaa "shaqaale toos ah," "xoogga waaxyada" ama "shaqo toos ah." Isticmaalka Habka Wax-soo-iibsiga Hay'adaha Dowladdu ay Fuliyaan waxaa ay sabab fiican u noqon karaan halka:

(a) cadadka shaqada ku lugta leh aan si hormaris ah loo qeexi karin; shaqooyinka ay yihiin kuwo



M.A

yaryar oo teel-teel ah ama laga qabanayo goobo fog-fog oo sharikadaha wax dhisa ee ka soo baxa shuruudaha aysan suurtagal ahayn in ay ku dalbadaan qiime macquul ah;

(b) shaqada loo baahan yahay in la qabto iyada oo aan la carqaladayn hawlgallo socda;

(c) khataraha carqaladaynta shaqada ee aan laga fursan karin ay si fiican u qaadi karto Dowlad-goboleedka marka loo eego qandaraasle; ama

(d) ay jiraan xaalado degdeg ah oo u baahan feejignaan dhaqso ah.

4.25.6 **Wakiilada Baarista:** Baarista hore ee shixnadda iyo aqoonsashada ee alaabada la soo dhoofsado waa mid ka mid ah badbaadooyinka ay isticmaasho Dowlad-goboleedka. Baarista iyo aqoonsashada sida caadiga ah waxay eegaan tayada, tirada, iyo in qiimaha uu macquul yahay. Alaabada la soo dhoofsado in la soo iibsado iyada oo loo marayo habraacyada Qandaraaska Lagu Tartamo waa in aan lagu xirin xaqiijinta qiimaha, balse keliya xaqiijinta tayada iyo tirada. Hase-yeeshee, alaabada la soo dhoofsado in aan lagu soo iibsan Qandaraaska Lagu Tartamo waxaa si dheeraad ah lagu xiri karaa xaqiijinta qiimaha. Wakiilada baarista caadi ahaan waxaa la siiyaa lacago ujuuro ah oo lagu soo rogo qiimaha alaabada. Kharashka aqoonsashada alaabada la soo dhoofsado waa in aan lagu tixgelin qiimaynta tartanada qandaraaska ee waafaqsan Qandaraaska Lagu Tartamo kharashka aqoonsashada waa in ay si gooni ah u bixiso Dowlad-goboleedka.

4.25.7 **Soo-iibinta Badeecooyinka:** Qiimaha suuqa ee badeecooyinka, sida haruurka, daaqa/cuntada xoolaha, saliidda wax lagu karsado, shidaalka, bacraminta/nafaqada beeraha, iyo biraha, wuu isbedbedalaa iyada oo ku xiran alaabada la keeno iyo baahida loo qabo inta ay le'egtahay waqti kasta oo gaar ah. Kuwo badan waxaa laga soo xigtaa suuqyada badeecada ee dhisan. Wax-soo-iibsiga inta badan waxaa uu ku lug leeyahay qandaraas bixin badan ee loogu talogalay tirooyin qayb ahaan ah si loo hubiyo damaannada alaabada la keeno iyo iibka badan ee muddo waqti ah si looga faa'iidaysto xaaladaha suuqa ee taageera iyo si looga dhigo alaabta taal kuwo tiradoodu ay hooseyso. Liiska tartamayaasha ka soo baxay shuruudaha hore ayaa la diyaarin karaa kuwaas oo casumaad xilli-xilli u dhacda la siiyo. Tartamayaasha waxaa lagu casuumi karaa in ay sheegaan qiimaha lala xiriirinayo qiimaha suuqa waqtiga ama ka hor inta shixnada alaabta aan la soo rarin. Ansaxnimada tartanka qandaraaska waa in uu noqdaa mid gaaban oo macquul ah. SBD-yada waxay ogolaan karaan soo-gudbinta habab elektaroonig ah. Xaaladaha noocas ah damaannad tartan qandaraas ama muddada damaanadaha tartanka qandaraaska ay jirsadaan midkoodna looma baahna waxaana soo gudbinaya tartamayaasha shuruudaha hore ka soo baxay ee ansaxa ah muddo waqto cayiman. Shuruudaha qandaraaska



M.A

caadiga ah iyo foomamka waafaqsan habdhaqanada suuqa waa in la adeegsado.

**4.26 Qiimaynta Tartanka Qandaraaska**

4.26.1 **Magacaabista Guddiga Qiimaynta Tartanka Qandaraaska.** Qiimaynta tartanka qandaraaska ee loogu talogalay wax-soo-iibsiga waa in ay sameeyaan Guddiga Qiimaynta Tartanka Qandaraaska (BEP) ee sida gaarka ah loogu magacaabay wax-soo-iibsi gaar ah kasta. BEP waa in uu yeesho ugu yaraan 3 xubnood balse waa in uusan ka badan 5 xubnood. BEP waxaa uu yeelan karaa xubno laga soo xushay Waaxda Wax-soo-iibsiga, waaxda Adeegsadaha Ugu Dambeeya iyo xubin madax-bannaan oo ka baxsan. Xulista xubanaha BEP waxay bilaabanaysaa waqti si fiican uga horreeya taariikhda xiritaanka Tartanka Qandaraaska waxaana sameynaya Agaasimaha Wax-soo-iibsiga iyada oo uu la tashanayo Xoghayaha Joogtada ah, Agaasimaha Wax-soo-iibsiga waxaa uu u soojeedin doonaa xulista xubnaha BEP Guddiga Wax-soo-iibsiga si ay u ogolaadaan. Marka la ogolaado Agaasimaha Wax-soo-iibsiga waxaa uu ka dib magacaabayaa xubnaha BEP. Shaqaalaha rayidka ah ee Dowlad-goboleedka lama siinayo wax lacago dheeraad ah oo ka badan mushahaarkooda caadiga ah. La-taliyayaal Dibadda ka socda. haddii la adeegsado waxaa loo kiraysanayaa oo lacagahooda loo siinayaa si waafaqsan habraaca wax-soo-iibsiga La-taliyaha Kaliga ah.

4.26.2 **Habraacyada Guddiga Qiimaynta Tartanka Qandaraaska.** Xubnaha BEP iyo qof kasta oo kale ee ku lug leh qiimaynta, sida Agaasimaha Wax-soo-iibsiga, waa in ay dhammaan saxiixaan Heshiiska Sirta ah ka hor inta aan la bilaabin shaqada qiimaynta - eeg Lifaaqa 2aad. Dokumeentiyada tartanka qandaraaska iyo shaqada guddiga BEP waa in ay dhammaan ka dhacaan qol sugan oo ammaan ah kaas oo la xiro saacadaha shaqada ka dib. Qiimaynta Tartanada Qandaraaska waa in uu si madax-bannaan ugu sameeyo xubin kasta ee ka tirsan guddiga BEP qolka ammaanka ah, ka dibna waxay ka doodayaan natiijooyinkooda si ay u gaaraan heshiis guud. Keliya qiimaynta iyo aasaaska Shuruudda ee lagu sheegay Dokumeentiga Tartanka Qandaraaska waa in la adeegsado si loo sameeyo qiimaynta. Marka la dhammeeyo BEP waxaa uu qorayaa Warbixinta Qiimaynta Tartanka Qandaraaska taas oo faahfaahin doonta tallaabo kasta ee qiimaynta, iyo sababaha loogu talogalay dhammaan go'aanka iyo talada bixinta qandaraaska ee tartamaha guulaystay ee noqonaya arjiga tartanka qandaraaska la qiimeeyay ee ugu kharashka yar (oo ah arjiga tartanka qandaraaska kharashka ugu yar ee ku jira araajida tartanada qandaraaska ee qanciyay dhammaan shuruudaha Dokumeentiyada Tartanka



M.A

Qandaraaska).

5. QABASHADA IYO MAAMULIDDA IIBSIGA TALIYEYAASHA IYO ADEEGYADA LA-TALINTA – HALKA AY KA DUWAN YIHIIN QAYBTA 4AAD

**5.1 Hordhac**

5.1.1 Qaybta 5aad ee Buuggan Siyaasadda Wax-soo-iibsiga waxay dhigaysaa mabaadii'da, sharciyada, iyo habraacyada ee guud ahaan lagu dabaqi karo soo-iibsiga adeegyada la-talinta iyo adeegyada aan la-talinta ahayn ee ay bixiso iyo/ama ay maalgeliso Dowlad-goboleedka oo ay ka mid yihiin maaliyadaha ay bixiyaan Deeq-bixiyaal caalami ah kasta ee laga baraandego iyada oo loo marayo Xisaabta Midaysan ee Khasnadda Dowlad-goboleedka. **Ogsoonow in haddii si gaar ah loogu faahfaahiyo Qaybta 5aad mooyaane, dhammaan habraacyada wax-soo-iibsiga waa sida ku xusan Qaybta 4aad.**

5.1.2 Ujeeddada Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga awgeed, erayga *la-taliyeyaal* waxaa ka mid ah kayaano kala duwan oo ballaaran, oo ay ka mid yihiin sharikadaha la-talinta, maareyaasha dhismaha, maareyaasha mashruuc iyo barnaamij, sharikadaha maamulka iyo maareynta, wakiillada baarista, hantidhawrayaal, bankiyada maalgelinta iyo kuwa ganacsiga, jaamacado, macaahida cilmi-baarista, hay'adaha aan dowliga ahayn, iyo shaqsiyaad. La-taliyeyaasha waxay caawimo ka gaystaan hawlo kala duwan oo ballaaran sida talo siyaasadeed, dib-u habaynta hay'adeed, maamulka iyo maareynta, adeegyada injineernimo, kormeeridda dhismaha, adeegyo maaliyadeed, adeegyo wax-soo-iibsi, iyo barashada aqoonta arrimaha bulshada iyo deegaanka.

**5.2 Tixgelinta Guud**

5.2.1 Sida ku xusan Qaybta 4.2 oo ay k u jiraan (a) ilaa (e). Feejignaan gaar ah ayaa loo muujinayaa Mabaadii'da Hagaysa ee Dowlad-goboleedka ee ah in **"La qabto dhammaan hawlaha iyada oo la adeegsanayo heerarka ugu sarreeya ee daacadnimo, hab hufnaan iyo cadaalad leh oo aan lahayn wax habdhaqano musuqmaasuq ah oo muuqda."**

5.2.2 Dowlad-goboleedka waxay tixgelinaysaa, xaaladaha badankooda, in tixgelinadan sida ugu fiican wax looga qaban karo iyada oo loo marayo tartan u dhaxeeya shirkadaha shuruudaha buuxiya iyada oo xulashada lagu saleynayo tayada soo-jeedinta iyo qiimaha adeegyada la bixiyay. Farqadaha 5.14-5.17 ee Buugga Habraacyada Wax-soo-iibsiga waxay sharxaan hababka kala duwan ee xulashada la-taliyeyaal iyo duruufaha ay ku habboon yihiin. Maadaama Xulashada Tayada iyo Kharashka ku saleysan (QCBS) uu yahay habka ugu badan ee lagu



M.A

taliyay. Farqadaha 5.14–5.16 ee Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga waxaa uu si faahfaahsan u sharxayaa habraacyada loogu talogalay QCBS. Hase-yeeshee, QCBS ma aha habka ugu habboon ee xulashada xaaladaha oo dhan; sidaa darteed, Farqadda 5.18 waxay sharxaysaa hababka kale ee xulashada iyo xaaladaha ay aadka ugu habboon yihiin.

**5.3 Ku Habboonaanta**

5.3.1 Adeegyada la-talinta ee Qaybta 5aad ee Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga lagu dabaqayo waa kuwa leh dabci la-talin iyo mid caqliyeed. Qaybtan Buugga Habraacyada Wax-soo-iibsiga looma adeegsado noocyada kale ee adeegyada ee arrimaha muuqda ee hawsha ku badan yihiin (tusaale, hawlgelinta iyo tayactirka xarumaha ama warshadaha, sahanada, qodista la xiriirta sahanka iyo baarista, sawirka laga qaado hawada/circa, sawirka dayax-gacmeedka, iyo adeegyada qandaraaskooda la galay iyada oo lagu saleynayo hawlqabadka leh maxsuulka muuqda ee la cabbiri karo).

**5.4 Iska-horimaadka Danaha**

5.4.1 Iska-horimaadka Danaha ee la midka ah kuwa Qaybta 4aad ayaa lagu dabaqi karaa, oo dheeri ku ah kuwa hoos ku xusan. La-taliyeyaasha waa in ay bixiyaan talo xifadeed, ujeeddo leh, oo dhexdhexaad ah waana in waqti kasta ay ilaaliyaan danaha Dowlad-goboleedka ee ka muhiimsan wax kasta oo kale, iyada oo aan wax tixgelin ah loo muujinayn shaqo mustaqbalka ah, iyo marka ay bixinayaan talo la-taliyeyaasha waa in ay ka fogaadaan ka horimaanshaha shaqooyinka kale iyo danaha gaarka ah ee sharikadooda. La-taliyeyaasha waa in aan loo kiraysan hawl kasta ee ka horimaanaysa waajibaadyadooda hadda ama hore ee macaamiishooda kale, ama dhigi karta maqaam aysan ku awoodin in ay u qabtaan hawsha si ku jirta danaha ugu fiican ee Dowlad-goboleedka. Iyada oo aan la xaddidayn inta badan ee wax hore loo sheegay, la-taliyeyaasha waa in aan la kiraysan iyada oo la waafaqayo xaaladaha hoos lagu dhigay:

(a) **Iska-horimaadka u dhaxeeya shaqooyinka la-taliyaha**: La-taliyeyaasha (oo ay ka mid yihiin hawlwadeenadooda iyo la-taliyeyaal hoosaadka) ama kuwo kasta ee xiriirka la leh waa in aan loo kiraysan shaqo kasta ee, dabiici ahaan, laga yaabo in uu iska-horimaad ka dhaxeeyo shaqada kale ee la-taliyeyaasha. Tusaale ahaan, la-taliyeyaasha ay soo kiraysatay Dowlad-goboleedka ama uu soo kiraystay deeq-bixiye kale si ay u diyaariyaan naqshad injineernimo ee loogu talogalay Mashruuc dhismo guud ahaan waa in aysan ka qaybgalin in ay diyaariyaan qiimeyn deegaanka ee madax-bannaan ee loogu talogalay isla Mashruuca. Si la mid ah, la-taliyeyaasha loo kiraystay in ay diyaariyaan Shuruudaha Tixraaca (TOR) ee loogu talogalay



M.A

shaqo waa in aan loo kiraysan shaqadaas.

(b) La-taliyaha waa in uusan qaadan wax gunno ah oo la xiriira shaqada marka laga reebo sida lagu sheegay qandaraaska. La-taliyaha iyo kuwa xiriirka la leh waa in aysan isku hawlin la-talin ama hawlo kale oo ka horimaanaya danaha Dowlad-goboleedka ee waafaqsan qandaraaska. Qandaraaska waa in ay ka mid noqdaan qoddobo xaddidaya ka-qaybgalka mustaqbalka ee la-talinta ama adeegyada kale ee ka dhalanaya ama si toos ah ula xiriira adeegyada la-talinta sharikada iyada oo la raacayo shuruudaha Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga.

**5.5 Ka-faa'iidaysiga Tartanka Aan Cadaaladda ahayn**

5.5.1 . La-taliyeyaasha (iyo la-taliyeyaal-hoosaadka) ama kuwa la xiriira ee u tartamaya shaqo gaar ah waa in aysan ka helin wax faa'iido ah ka-faa'iidaysiga tartan ee cadaalad darada ah bixinta ay bixiyeen adeegyo la-talin oo la xiriira shaqada su'aasha ku jirta. Si taas loo gaaro, Dowlad-goboleedka waa in ay suurtageliso in ay helaan la-taliyeyaasha, oo la socda Codsiga Soo-jeedinta (RFP), dhammaan macluumaadka siinaya la-taliye ka-faa'iidaysi tartan cadaalad daro ah. Haddii Dowlad-goboleedka, ay go'aamiso in aysan habboonayn ama waaqici ahayn in la siidaayo macluumaad lagu xallinayo ka-faa'iidaysiga cadaalada darada ah ee imaan kara, la-taliyaha haysta ka-faa'iidaysiga cadaalad darada ah ee dhici kara ayaa laga reebi karaa ee loogu talogalay ujeeddooyin wax-soo-iibsi gaar ah.

**5.6 Xaq-u-yeelashada**

5.6.1 Iyada oo la raacayo Qaybta 4aad ee leh ku daridda iyo ka-reebanaanta soo socota:

(a) Si ka-reebban ahaan jaamacadaha ay dowladdu leedahay ama xarumaha cilmi-baarista ayaa ka qaybgali kara.

(b) Saraakiisha dowladda iyo shaqaalaha rayidka ah waxaa kaliya loo kiraysan karaa qandaraasyo la-talin, shaqsi ahaan ama sida xubno ka tirsan koox sharikad la-talin, haddii (i) ay ku maqan yihiin fasax aysan lacag ku qaadan; (ii) aysan shaqaalaysiin wakaaladda ay u shaqaynayeen waxyar ka hor inta aysan fasax galin; oo (iii) shaqaalayntooda aysan abuurayn iska-horimaadka dano.

**5.7 Xiriiro wadashaqayn oo u dhaxeeya La-Taliyeyaasha**

5.7.1 La-taliyeyaasha waxay xiriir wadashaqayn u yeelan karaan qaab maalgelin wadajireed ama heshiis la-talin hoosaad ah si mid kasta uu kor ugu qaado aqoontiisa xirfadeed, u xoojiyo ka jawaabidda farsamo ee soo-jeedimadooda iyo si uu u sameeyo koox khubaro ah oo weyn oo la heli karo marka loo baahdo, si ay u bixiyaan habab iyo qaabab wanaagsan, iyo, xaaladaha qaar, u bixiyaan qiimayaal hooseeya. Xiriirka wadashaqaynta noocaas ah waxaa uu noqon karaa mid



M.A

loogu talogalay mustaqbalka fog (oo ka madax-bannaan shaqo gaar ah kasta) ama shaqo gaar ah. Haddii Dowlad-goboleedka ay u shaqaalaysiiso urur qaab maalgelin wadajireed ah, ururka waa in uu u magacaabo mid ka mid ah sharikadaha in ay matasho ururka; waana in dhammaan xubnaha maalgelinta wadajireed ay saxiixaan qandaraaska waana in si wadajir ah mas'uul uga ahaadaan shaqada oo dhan. Sharikadaha soo gala liiska kala-shaandheynta/kala-saaridda waxaa ay sameyn karaan maalgelin wadajireed ama la-talin-hoosaad.

**5.8 Dib-u-eegista, Caawimaadda iyo Korjoogtaynta**

5.8.1 Dowlad-goboleedka waxay mas'uul ka tahay kormeerka hawlqabadka la-taliyeyaasha iyo hubinta in ay u qabtaan shaqooyinka si waafaqsan qandaraaska. Dowlad-goboleedka waa in ay u korjoogtayso shaqada sida loogu baahdo si ay ugu qanacdo in la qabtay iyada oo la eegayo jaangooyooyinka habboon iyo in ay ku saleysan tahay xogta la aqbali karo. Haddii qayb weyn ee ah shaqada diyaarinta Mashruuca lagu qabto xafiisyada la-taliyeyaasha, shaqaalaha Dowlad-goboleedka waxaa laga yaabaa, iyaga oo haysta ogolaansho hore, in ay booqdaan xafiisyadan si ay dib-u eegis ugu sameeyaan shaqada la-taliyeyaasha.

**5.9 Tababarka ama Gudbinta Aqoonta**

5.9.1 Haddii shaqada ay ka mid tahay qayb muhiim ah oo loogu talogalay in la tababaro oo aqoon loo gudbiyo shaqaalaha Dowlad-goboleedka ama la-taliyeyaal qaran, Shuruudaha Tixraaca waa in ay sheegaan ujeeddooyinka, dabciga, baaxadda, iyo yoolalka barnaamijka tababarka, oo ay ka mid yihiin faahfaahinada ku saabsan tababarayaasha iyo kuwa la tababarayo, xirfadaha ay tahay in la gudbiyo, qaab-dhismeedka waqti, iyo qabanqaabada qiimaynta iyo korjoogtaynta. Kharashka ku baxaya barnaamijka tababarka waa in lagu daro qandaraaska la-taliyaha iyo miisaaniyadda loogu talogalay shaqada/hawsha.

**5.10 Shuruudaha Tixraaca**

5.10.1 Dowlad-goboleedka waa in ay mas'uul ka noqoto Shuruudaha Tixraaca (TOR) ee loogu talogalay shaqada. TOR waa in uu diyaariyo shaqsiga hirgelinaya, ama sharikad takhasus u leh qaybta shaqada/hawsha. Baaxadda adeegyada lagu sharxay TOR waa in ay isqaadan karaan miisaaniyadda la heli karo ee uu ku ansixiyay Guddiga Wax-soo-iibsiga Qorshaha Wax-soo-iibsiga. TOR waa in ay si cad u qeexaan ujeeddooyinka, yoolalka, iyo baaxadda shaqada waana in ay bixiyaan macluumaadka raadraaca (oo ay ka mid yihiin liiska daraasadaha jira ee khuseeya iyo xogta aasaasiga ah) si loo fududeeyo diyaarinta ay la-taliyeyaasha diyaarinayaan soo-jeedimadooda. Haddii gudbinta aqoonta ama tababarka ay tahay ujeeddo, waa in si gaar ah loola

muujiyo faahfaahinada tirada shaqaalaha la tababarayo, iyo wax la mid ah, si la-talieyaasha ay u awoodaan in ay qiyaasaan khayraadka loo baahan yahay. TOR waa in uu qoro liiska adeegyada iyo sahayda loo baahan yahay si loo qabto shaqada iyo natiijada/maxsuulka loo baahan yahay (tusaale ahaan, warbixinno, xog, khariidado, sahano). Hase yeeshee, TOR waa in uusan noqon mid aad u faahfaahsan ama aan la baddeli karin, si looga hortago la-taliyeyaasha tartamaya in ay soo-gudbiyaan habkooda iyo shaqaalayntooda. Sharikadaha waa in lagu dhiirrigeliyo in ay uga faalloodaan TOR soojeedimadooda. Mas'uuliyadaha gaarka ah ee Dowlad-goboleedka iyo la-taliyaha waa in si cad loogu qeexo TOR. Eeg Lifaaqa 4aad, Habraac ku saabsan Qorista iyo Dib-u-eegista Shuruudaha Tixraaca, ee loogu talogalay habraaca dheeraadka ah ee ku saabsan diyaarinta TOR.

**5.11 Miisaaniyad**

5.11.1 Diyaarinta qiyaas miisaaniyad dhammeystiran oo macquul ah waa aasaasi haddii maalgelinta Dowlad-goboleedka ay tahay in loo maareeyo si habboon. Miisaaniyaddan waa in si taxadar leh loo tixgeliyo xilliga diyaarinta Qorshaha Wax-soo-iibsiga ee u dhaxeeya Agaasimaha Wax-soo-iibsiga ee Dowlad-goboleedka, Agaasimaha Khasnadda iyo Sarkaalka Dowladda ee ku habboon ee matalaya Waaxda ka faa'iidi doonta adeegyada; waana in ay u dhiganto maaliyadaha loo heli karo Waaxdaas iyo hawsha. Iyada oo lagu saleynayo miisaaniyaddan, Agaasimaha Wax-soo-iibsiga Dowlad-goboleedka ayaa go'aamin doona habka wax-soo-iibsiga ee la adeegsan doono, kaas oo ka dib uu ansixinayo Guddiga Wax-soo-iibsiga xilliga ansixinta Qorshaha Wax-soo-iibsiga. Wax-ka-beddelid kasta ee miisaaniyadda ama habka wax-soo-iibsiga ka dib ansixinta Qoshaha Wax-soo-iibsiga, waa in uu ansixiyo Guddiga Wax-soo-iibsiga (eeg Qaybta 2aad ee Habraacyada loogu talogalay saameynta Qorshaha Wax-soo-iibsiga). Qiyaasta miisaaniyadda waa in lagu saleeyo qiimaynta Dowlad-goboleedka ee khayraadka loo baahan yahay si loo qabto shaqada, oo uu ka mid yahay waqtiga shaqaalaha, taageero loojiistik, iyo gashiyada muuqda (tusaale, gawaari iyo qalab).

**5.12 Kala-saarista La-Taliyeyaasha**

5.12.1 Dowlad-goboleedka waxay ku bilaabi kartaa wax-soo-iibsiga codsi furan oo loogu talogalay soo-jeedimada ama shuruudaha la-talinta ama, haddii lagu bixiyay Qorshaha Wax-soo-iibsiga, Dowlad-goboleedka waxay xayaysiin kartaa Codsiga Qoraal Tilmaamaya Danayn (REOI). Haddii Dowlad-goboleedka ay xayaysiiso REOI, oo ku saleysan dib-u eegista soo-gudbinada, waxaa ay diyaarin kartaa liis kala-saaris waxaa ayna casumaad u fidin kartaa keliya



M. A

sharikadaha ama shaqsiyaadka soo galey kala-saaridda si ay ugu soo gudbiyaan soo-jeedimada ama shuruudaha sida habboon ee loogu talogalay habraaca xulashada loo xushay wax-soo-iibsiga gaarka ah. Marka Dowlad-goboleedka ay xulato in ay bilowday wax-soo-iibsi iyada oo adeegsanaysa habraaca liiska kala-saaridda. Dowlad-goboleedka waxay mas'uul ka tahay diyaarinta liiska kala-saaridda. Ma jiro xad ugu badan ee lagu xiro tirada sharikadaha laga yaabo in la kala-saaro waana in daryeel la muujiyo si aan looga saarin ka-qaybgalayaasha shuruudaha ka soo baxay in ay u tartamaan qandaraaska la-talinta. Tixgelin waa in la siiyo dhammaan sharikadaha ama ururada – qaranka iyo kuwa caalamiga ah– ee danaynaya kuwaas oo haysta shuruudaha khuseeya. Habka sameynata liiska kala-saaridda waa in uu noqdaa mid cadaalad ah oo ujeeddo leh iyada oo la eegayo shuruudaha hore loogu sheegay REOI.

**5.13 Diyaarinta iyo Bixinta Codsiyada Soo-jeedinada**

5.13 Codsiga Soo-jeedinta (RFP) waa in ay ka md noqdaan (a) Waraaq Casumaad (LOI): (b) Amarro ku socda La-taliyeyaasha (ITC) oo la socda xaashida xogta soo-jeedinta: (c) sharaxaadda aasaaska qiimaynta iyo shuruudaha ee la adeegsanayo marka la tixgelinayo soo-jeedimada la helay; (d) foomamka loo adeegsanayo in lagu diyaariyo soo-jeedimada farsamo iyo kuwa maaliyadeed; (e) foomamka qandaraaska; iyo (f) Shuruudaha Tixraaca. Dowlad-goboleedka waa in ay u adeegsato SBD-yada Adeegyo La-talin sida laga yaabo in wax looga beddelo si ay uga hadlaan xaaladaha gaarka ku ah Mashruuca, oo ku xiran ansixinta Guddiga Wax-soo-iibsiga marka beddelka uu yahay mid maadi ah. Dowlad-goboleedka waxay adeegsan kartaa sistem elektaroonig ah si ay u qaybiso codsiga RFP, haddii Dowlad-goboleedka ay ku qanacdo ku filnaanta sistemkaas. Haddii RFP elektaroonig ahaan loo qaybiyay, sistemka elektarooniga ah waa in uu noqdaa mid ammaan ah si looga fogaado in wax-ka-beddelid loogu sameeyo RFP waana in uusan si cadaalad daro ah u xaddidin gaaritaanka la-taliyeyaasha RFP. Marka SBD-yada aysan habboonayn (tusaale ahaan, loogu talogalay adeegyada baarista shixnadda ee hore iyo wax-soo-iibsiga), Dowlad-goboleedka waa in ay adeegsato foomamka qandaraaska la aqbali karo ee kale.

**5.14 Xulashada Ku Saleysan Kharashka iyo Tayada**

5.14.1 Habka xulista ugu muhiimsan oo ay tahay in Dowlad-goboleedka ay u adeegsato sharikadaha La-talinta waa in uu noqdo Xulashada Ku Saleysan Kharashka iyo Tayada (QCBS) ee adeegsanaya hannaan lagu tartamo oo ku tixgelinaya tayada soo-jeedinta iyo kharashka



M.A

adeegyada xulashada sharikada guulaysata. Kharashka sida arrin ka mid ah xulashada waa in loo adeegsado si go'aan-gaar fiican leh. Miisaanka la xiriira ee la siinayo tayada iyo kharashka waa in loo go'aamiyo xaalad kasta iyada oo ku xiran dabciga shaqada.

**5.15 Qiimaynta Soo-jeedimada: Tixgelinta Tayada Farsamo iyo Kharashka**

5.15.1 Qiimaynta soo-jeedimada waa in lagu sameeyo laba (2) marxaladood: (1) tayo farsamo iyo (2) kharash. Dowlad-goboleedka waa in ay adeegsato Guddiga Qiimaynta Farsamo (TEP) si ay u qiimayso soo-jeedin farsamo kasta. Habraaca ku saabsan TEP waxaa lagu bixiyaa Lifaaqa 8aad. Dowlad-goboleedka waxay ku dhiirrigelinaysaa in aqoon xifadeed dibadda looga helo wax-soo-iibsiyada waaweyn. Qiimayaasha soojeedimada farsamo waa in aysan gaarin soo-jeedimada maaliyadeed ilaa qiimaynta farsamo , oo ay ka mid yiniin dib-u eegisyo iyo ansixino kasta ee Guddiga Wax-soo-iibsiga ee loo baahan yahay, in la soo gabagabeeyo. Qiimaynta waa in la sameeyo iyada oo si buuxda loo raacayo qoddobada RFP.

5.15.2 **Qiimaynta Soo-jeedinta Maaliyadeed:** Ka dib marka la dhammeeyo qiimaynta tayo ee farsamo oo dib-u-eegyada iyo ansixinada loo baahan yahay la bixiyo, Dowlad-goboleedka waa in ay ku wargeliso la-taliyeyaasha soo gudbiyay soojeedimada qoddobada farsamo ee loo xilsaaray la-taliye kasta waana in ay ku wargeliso la-taliyeyaasha soo-jeedimadooda aan ka soo bixin heerka u-qalmitaanka ugu hooseeya ama loo tixgeliyay kuwa aan ka jawaabayn RFP iyo TOR in soojeedimadooda maaliyadeed la soo celin doona iyada oo aan la furin ka dagaal marka qandaraaska uu saxiixo la-taliyaha ku guulaystay. Dowlad-goboleedkawaa in ay si isku mar ah ugu wargeliso la-taliyeyaasha xaqiijiyay ugu yaraan heerka u-qalmitaanka ee ugu hooseeya taariikhda, waqtiga, iyo goobta loo diyaariyay furitaanka soojeedimada laamiyadeed iyo in ay ku wargeliso in ka-qaybgalkooda furitaanka soojeedimada maaliyadeed in la ogol yahay balse aysan khasab ahayn. Iyada oo lagu saleynayo taariikhda furitaanka soojeedinta maaliyadeed, caqabado aan laga fursan karin ayaa ogolaan kara ogeysiis in la siiyo la-taliyeyaasha si loo sameeyo qabanqaabada looga qaybgalayo furitaanka soojeedimada maaliyadeed. Soojeedimada maaliyadeed waa in loo furo si la wada arko iyada oo ay joogaan wakiillada la-taliyeyaasha ee doortay in ay ka soo qaybgalaan (qof ahaan ama online-ka). Magaca la-taliyaha, qoddobada farsamo, iyo qiimayaasha la soojeediyay waa in kor loo aqriyo oo la diiwaangeliyo. Nuqulka diiwaanka ayaa la siinayaa dhammaan la-taliyeyaasha soo-jeedimadooda la furay.

5.15.2.1 Dowlad-goboleedka waa in ka dib dib-u-eegto soojeedimada maaliyadeed. Haddii ay jiran wax khaladaad xisaabeed ah, waa in la saxo. Ujeeddada isbarbardhigidda soojeedimada,



M.A

RFP waa in ay u baahato in dhammaan soojeedimada lagu sheego Doolarka Maraykanka. Soojeedin kasta ee ka weecata/jebisa shuruudaha nooca lacagta sida lagu xusay RFP waxaa loo diidi karaa sida in aysan ka soo jawaabin.

5.15.2.2 Ujeeddo qiimayn darteed, soojeedimada maaliyadeed waa in ay ka mid noqdaan ama laga reebo canshuuraha dadban ama kuwa tooska ah ee degaanka lagu aqoonsan karo sida lagu tilmaamay RFP. Soo-jeedinta maaliyadeed waa in ay ka mid noqdaan dhammaan gunnada la-taliyeyaasha iyo kharashka kale sida kharashka socdaalka, turjumaada, warbixin daabacaad, ama kharashka xoghaye. Habka qiimaynta ee la adeegsanayo waa in lagu sharxo RFP.

5.15.3 **Qiimaynta Qiimaha iyo Tayada Farsamo ee Isku-jira:** Dhibcaha guud waa in la helo iyada oo la miisaamayo dhibcaha qiimaha iyo tayada farsamo iyada oo loo adeegsanayo habka sida lagu sharxay RFP. Sharikada helaysa dhibcaha guud ee ugu badan ayaa loogu yeerayaa wada-xaajood.

5.15.4 Marka wax-soo-iibsiga uu ku xiran yahay ansixinta Guddiga Wax-soo-iibsiga ka hor inta aan dib-u-eegis lagu sameyn qandaraas bixinta la soo-jeediyay (Eeg Lifaaqa 1aad), Dowlad-goboleedka waa in ay siiso warbixinta qiimaynta oo isku-jir ah Guddiga Wax-soo-iibsiga si uu dib-u-eegis ugu sameeyo oo u ansixiyo ka hor inta Dowlad-goboleedka aysan la bilaabin wada-xaajood tartamaha la xushay. Warbixinta qiimaynta ee isku-jirka ah waa in ay ku jirto taariikh dhammeystiran oo ah hannaanka wax-soo-iibsiga oo ku dhamaanaya la-talin loogu talogalay qandaraas-bixin.

5.15.5 **Wada-xaajoodka iyo Bixinta Qandaraaska:** Wada-xaajoodka waa in ay ka mid noqdaan munaaqashado looga hadlayo TOR, habka la adeegsanayo, shaqaalaynta, gashiyada Dowlad-goboleedka iyo shuruudaha gaarka ah ee qandaraaska. Munaaqashadahaan waa in aysan si weyn wax uga beddelin TOR asalka ah ama shuruudaha qandaraaska, si hannaanka wax-soo-iibsiga uusan u noqon mid baadil ah. TOR-ka ugu dambeeya iyo habka lagu heshiiyay waa in lagu daro "Sharaxaadda Adeegyada," kaas oo saameynaya qayb ka mid ah qandaraaska.

5.15.6 Sharikada la xushay waa in aan loo ogolaan in ay bedesho shaqaalaha muhiimka ah, haddii dhinacyada ay ogolaadaan in dib-u dhaca aadka ah ee ku yimaada hannaanka xulashada uu ka dhigo isbeddelkaas mid aan laga fursan karin ama in isbeddeladaas ay muhiin yihiin si looga soo baxo ujeeddooyinka shaqada. Haddii tani aysan xaaladda ahayn iyo haddii la aqbalo in shaqaalaha muhiimka ah lagu daray soo-jeedinta iyada oo aan la xaqiijin helitaankooda, sharikada waxaa laga yaaba in laga reebo iyo in hannaanka ay sii-wado sharikada kaalinta xigta



M. A

gashey. Shaqaalaha muhiimka ah ee la soo-jeediyay in ay noqdaan kuwa beddelaya waa in ay haystaan shahaadooyin aqooneed oo la mid ah ama ka wanaagsan kuwa shaqaalaha muhiimka ah ee markii hore la soo-jeediyay.

5.15.7 Wada-xaajoodka maaliyadeed waa in uu ka mid noqdaa sharaxaadda mas'uuliyadda canshuurta la-taliyaha. Sida lacag-bixinada waafaqsan Qandaraasyada Qiimaha Go'an leh waxay ku saleysan yihiin shaqada la qabtay iyo gaarsiinta natiijada/maxsuulka (ama badeecooyinka), qiimaha la soo bandhigay waa in uu ka mid noqdaa dhammaan kharashaadka (waqtiga shaqaalaha, kharashka guud, socdaalka, hoteelka, iwm.). Sidaas awgeed, haddii habka xulashada ee Qandaraaska Qiimaha Go'an loogu daro qiimaha sida qayb ka mid ah, qiimahan waa in aan laga wada-xaajoon. Xaaladda Qandaraasyada Waqtiga Ku Sleysan, lacag-bixinta waxay ku saleysan tahay gashiyada (waqtiga shaqaalaha iyo lacagaha dib la isugu celin karo) iyo qiimaha la soo bandhigay waa in ay ka mid noqdaan qiimaha shaqaalaha iyo qiyaasta qaddarka lacagaha la isku-celin karo. Marka habka xulashada uu qiimaha/sicirka qayb ahaan ugu mid yahay, wada-xaajoodka qiimaha shaqaalaha waa in uusan dhicin, marka laga reebo duruufo gaar ah, sida marka qiimaha shaqaalaha la soo bandhigay ay aad uga badan yihiin qiimaha caadi ahaan ay qaadaan la-taliyeyaasha xaaladaha la mid ah ee loogu talogalay qandaraasyada la mida ah. Lacagaha la isku celin karo waa in lagu bixiyo kharashaadka dhabta ah ee baxay iyada oo ku xiran xaddidaadda lagu dhigay Mabaadii'da Kharashka Dowlad-goboleedka ee lagu dabaqi karo, marka la soo bandhigo rasiidyada, sidaa awgeedna kuma xirna wada-xaajood. Hase-yeeshee, haddii Dowlad-goboleedka ay doonayso in ay qeexdo xadka ugu sarreeya ee gooyo sicirada qayb kasta ee lacagaha (sida sicirada socdaalka iyo hoteelka) waa in ay ku sheegto heerarka ugu sarreeya ee siciradaas RFP-ka ama ay ku qeexdo gunnada maalin kasta RFP-ga. Haddii qandaraaska uu ogol yahay dib-u celinta kharash kasta, heerarka lacag-celinta waa in ay xaddidaan Mabaadii'da Kharashka Dowlad-goboleedka ee la adeegsan karo.

5.15.8 Haddii wada-xaajoodka uu ku guuldaraysto in uu ka dhasho qandaraas la aqbali karo muddo macquul ah gudaheeda, Dowlad-goboleedka waa in ay joojiso wada-xaajoodka oo ay ugu yeerto sharikada kaalinta ku xigta wada-xaajood. Haddii aysan jirin sharikad ku jirta kaalinta xigta ee wax-soo-iibsiga, wax-soo-iibsiga waxaa laga yaabaa in la baajiyo ama dib loogu tartamo. Dowlad-goboleedka waa in ay la tashato Guddiga Wax-soo-iibsiga ka hor inta aysan qaadin tallaabadan. La-taliyaha waa in lagu wargeliyo sababaha joojinta wada-xaajoodka. Marka wada-xaajoodka lala bilaabo sharikada kaalinta xigta ku jirta, Dowlad-goboleedka waa in aysan



M. A

dib-u furin wada-xaajoodka hore. Ka dib marka wada-xaajoodka si guul leh lagu dhammeeyo oo dhammaan dib-u-eegista iyo ansixinada loo baahan yahay la bixiyo, Dowlad-goboleedka waa in ay si dhaqso ah ugu wargeliso sharikadaha kale in ay yihiin kuwo guul daraystay.

**5.16 Diidmada Dhammaan Soo-jeedimada iyo Dib-u-casuumidda**

5.16.1 Dowlad-goboleedka waxaa ay xaq u yeelan doonaa in ay diido dhammaan soo-jeedimada keliya haddii dhammaan soo-jeedimada aysan ahayn kuwo aan ka jawaabin iyada oo sabab u ah in ay soo-bandhigaan dhimanaansho weyn oo ah xagga u hoggaansamidda TOR, haddii ay ku lug leeyihiin qiimayaal si aad ah ugu badan qiyaasta asalka ah, ama haddii qandaraas ku bixinta adeegga uusan ku jirin danaha ugu wanaagsan ee Dowlad-goboleedka. Xaaladda qiimaha sarreeya, suurtagalnimada kordhinta miisaaniyadda, ama hoos u dhigidda baaxadda adeegyada ee sharikada waa in la baaro iyada oo lala tashanayo Guddiga Wax-soo-iibsiga. Ka hor inta dhammaan soo-jeedimada aan la diidin oo soo-jeedimo cusub aan casumaad loogu yeerin, Dowlad-goboleedka waa in ay ku wargeliso Guddiga Wax-soo-iibsiga, iyada oo tilmaamaysa sababaha diidmada ee dhammaan soo-jedimada, iyo haddii loo baahan yahay, waa in ay hesho ogolaanshaha Guddiga Wax-soo-iibsiga ka hor inta aan la sii-wadin diidmada iyo hannaanka cusub. Hannaanka cusub waxaa ka mid noqon kara dib-ugu noqoshada RFP (oo uu ka mid yahay liiska kala-saaridda) iyo miisaaniyadda. Dib-ugu noqoshadaan waa in lagala heshiiyo Guddiga Wax-soo-iibsiga. Laba toddobaad gudahooda ee diidmada dhammaan soo-jeedimada, Dowlad-goboleedka waa in ay ku soo dhejiso isla goobta martigelisay ogeysiiska SPN baajinta wax-soo-iibsiga. Ogeysiiska waa in uu muujiyo wax-soo-iibsiga oo uu u sheego si kooban sababaha baajinta. Macluumaad la mid ah waa in loo diro dhammaan kuwa soo gudbiyay soo-jeedimada. Dhammaan soo dhejinadaas waa in ay noqdaan Af-Ingiriis iyo iyada oo ku xiran go'aanka Dowlad-goboleedka waxaa ay sidoo kale noqon karaan Af-Soomaali.

**5.17 Ilaalinta Sirta La Xiriirta**

5.17.1 Macluumaadka la xiriira qiimaynta soo-jeedimada iyo talooyinka khuseeya qandaraas bixinta waa in aan loo sheegin la-taliyayaasha soo-gudbiyay soo-jeedimada, ama shaqsiyaadka kale ee rasmi ahaan u khuseyn hannaanka, marka laga reebo sida lagu sheegay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga.

**5.18 Hababka Kale ee Xulashada**

5.18.1 **Guud:** Farqadaan waxay sharxaysaa hababka xulashada kale oo aan ahayn QCBS, iyo



M.A

daruufaha lagu aqbali karo. Dhammaan qoddobada khuseeya[4] ee Qaybtan 5aad waa in la adeegsado markasta oo tartan la qabto.

5.18.2 **Xulashada Tayada Ku Saleysan:** Habka Xulashada Tayada Ku Saleysan (QBS) ayaa ku habboonaan kara shaqooyinka noocyadan ah ee soo socda:

(a) shaqooyinka aadka takhasuska u ah ama qaybaha badan ka kooban ee ay adag tahay in si sax ah loo qeexo TOR-yada iyo gashiga loo baahan yahay ee laga helo la-taliyeyaasha. ee Dowlad-goboleedka ay filayso la-taliyeyaasha in ay ku muujiyaan hal-abuurnimo soo-jeedimadooda;

(b) shaqooyinka leh saamaynta hoos-u-socod sarreeya oo ujeeddadu ay tahay in la helo kubarada ugu wanaagsan; iyo

(c) shaqooyinka loo sameyn karo siyaabo aad u kala duwan, oo soo-jeedimada aan la isku barbardhigi karin.

5.18.3 QBS. RFP waxaa uu codsan karaa soo-gudbinta soo-jeedin farsamo keliya (soo-jeedin maaliyadeed la'aan), ama codsan karaa soo-gubinta soo-jeedimada maaliyadeed iyo kuwa farsamo isla hal waqti. balse ku kala jira baqshado kala duwan (nidaam laba (2) baqshadood ah). Wax-soo-iibsiga waa in la xayaysiiyo iyada oo la raacayo shuruudaha lagu dhigay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga waxaana laga yaabaa. iyada oo ay go'aankeedu leedahay Dowlad-goboleedka, in uu ka hordhaco habraac liis kala-saarid. RFP waxaa uu bixin karaa midkood. balse ma aha labadood, Miisaaniyadda qiimaha la qiyaasay ama heerka dadaalka la qiyaasay ee shaqaalaha muhiimka ah.

5.18.4 Haddii soo-jeedimo farsamo keliya la casuumo. ka dib marka la qiimeeyo soo-jeedimada farsamo iyada oo la adeegsanayo hab isku mid ah sida QCBS. Dowlad-goboleedka waa in ay wayddiiso la-taliyaha haysta soo-jeedinta farsamo ee kaalinta ugu sarreysa ku jira in uu soo gudbiyo soo-jeedin maaliyadeed oo faahfaahsan. Dowlad-goboleedka iyo la-taliyaha ka dib waa in ay ka wada-xaajoodaan soo-jeedinta maaliyadeed iyo qandaraaska. Dhammaan arrimaha kale ee hannaanka xulista waa in ay la mid noqdaan kuwa QCBS. oo ay ka mid tahay baahinta qandaraas bixinta sida lagu sharxay Habraacyada. Haddii la-taliyeyaasha laga codsaday in ay bixiyaan soo-jeedimada maaliyadeed marka hore iyada oo ay la socdaan soo-jeedimada farsamo. dhawris iyo difaac waa in la sameeyo sida QCBS si loo hubiyo in, ka dib marka wada-xaajoodka

[4] Dhammaan qoddobada Qaybta 5aad. waa in lagu dabaqo wax-ka-beddelidda iyo cadaadiska loogu baahan yahay habka xulashada la-taliyeyaasha lagu adeegsado xaaladda gaarka ah Xayaysiin looma baahna marka xulashada halka meel laga helo la isticmaalo



M.A

si guul ku jirta loo soo gabagabeeyo, soo-jeedinta maaliyadeed ee keliya sharikada la xushay in la furo iyo in inta kale la celiyo iyaga oo aan la furin.

5.18.5 **Xulashada waafaqsan Miisaaniyadda Go'an: Habka Xulashada waafaqsan Miisaaniyadda Go'an** (FBS) waxaa uu habboon yahay marka shaqada si sax ah loo qeexi karo. RFP waa in uu sheego miisaaniyadda la heli karo waana in uu ka codsado la-taliyeyaasha si ay ku bixiyaan soo-jeedimadooda farsamo iyo kuwa maaliyadeed ee ugu fiican, ee dhaca gudaha miisaaniyadda, oo ku jira baqshado gooni ah. TOR waa in gaar ahaan si fiican loo diyaariyo si loo hubiyo in miisaaniyadda ay ku filan tahay in la-taliyeyaasha ay ku qabtaan hawlaha la filayo.

5.18.6 **Xulashada Qiimaha Ugu Yar:** Habka Xulashada Qiimaha Ugu Yar (LCS) waxaa uu ku habboon yahay xulashada la-taliyeyaal loogu talogalay shaqooyin dabci ahaan caadi ah ama joogto ah (hantidhawrka, naqshadaynta injineernimo ee shaqooyinka aan adkayn, iwm.) halkaas oo habdhaqan iyo jaangooyooyin si fiican loo aasaasay ay ka jiraan. Habkan waa in aan loo adeegsan in uu noqdo beddelka QCBS waana in keliya loo adeegsado xaaladaha qaar ee wax-soo-iibsiga ee dabci ahaan farsamo joogto ah ama aad caadi u ah halka qaybta garashada iyo aqoonta ay ka tahay waxyar. Habkaan gudahiisa, darajada u-qalmitaanka "ugu yar" ee loogu talogalay "tayada" ee ah 70 dhibcood ama ka badan ayaa la aqoonsanayaa. Soo-jeedimada, oo lagu soo-gudbinayo laba (2) baqshadood, ayaa la codsanayaa. Wax-soo-iibsiga waa in la xayaysiiyo iyada oo la raacayo shuruudaha lagu dhigay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga waxaana laga yaabaa, iyada oo ay go'aankeedu leedahay Dowlad-goboleedka, in uu ka hordhaco habraac liis kala-saarid. Soo-jeedimada farsamo ayaa marka hore la furayaa ka dibna la qiimaynayaa. Kuwa helaya wax ka yar darajada u-qalmitaanka ugu yar waa la diidayaa. Waxaana soo-jeedinada maaliyadeed ee inta kale lagu furayaa meel la wada arko. Sharikada leh qiimaha ugu yar waa in ka dib la xusho ka dibna waa in la baahiyo qandaraas bixinta. Habkaan gudahiisa, darajada u-qalmitaanka ugu yar waa in la aqoonsado, iyada oo la fahmayo in dhammaan soo-jeedimada ka sarreeya inta ugu yar ay keliya ku tartamaan "qiimaha". Darajada u-qalmitaanka ugu yar waa in lagu sheego RFP.

5.18.7 **La-Taliyeyaal Gaar ah:** La-taliyeyaasha gaarka ah ee qandaraasyadooda yeelan doona qiimo ka badan heerka 1,000 doolar (USD) ayaa loo shaqaalaysiiyaa shaqooyinka (a) kooxaha hawlwadeenka aanan loogu baahnayn, (b) taageero xirfadeed (xafiis guri) dibadda ah oo dheeraad ah aan loogu baahnayn, oo (c) waayo-aragnimada iyo aqoonta xirfadeed ee shaqsiga ay tahay shuruudaha ka muhiimsan wax kasta oo kale. Marka isuduwidda, maamulka, ama



M.A

mas'uuliyadda wadareed laga yaabo in ay adkaato iyada oo sabab u ah tirada shaqsiyaadka, waxaa lagu talinayaa in la shaqaalaysiiyo sharikad. La-taliyeyaasha gaarka ah waxaa lagu xushaa arrimo ku saleysan u-qalmitaankooda iyo aqoonta ay u leeyihiin shaqada. Wax-soo-iibsiga waa in la xayaysiiyo iyada oo la raacayo shuruudaha lagu dhigay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga waxaana laga yaabaa, iyada oo ay go'aankeedu leedahay Dowlad-goboleedka, in uu ka hordhaco habraac liis kala-saarid. La-taliyeyaasha waa in ay soo-gudbiyaan soo-jeedimo waxaana la xushaa iyada oo loo marayo qiimayn loogu talogalay habboonaanta ka hor inta Soo-jeedinta Maaliyadeed aan la tixgelin waana in uu noqdaa midka ugu wanaagsan ee ka soo baxay shuruudaha sida buuxda awoodda ugu leh qabashada hawsha. Awoodda iyo kartida waxaa lagu go'aamiyaa iyada oo lagu salaynayo caddaynta aqoonta iyo waayo-aragnimo hore ee la xiriirta adeegyada la bixinayo iyo hawlqabad hore oo ku salaysan tixraacyo iyo talooyin.

5.18.7.1 La-taliyeyaasha gaarka ah waxaa loo xulan karaa si ku saleysan in laga helo hal meel oo keliya iyada oo loo yeelayo sabab xaaladaha ka duwan kuwa kale sida kuwa loogu talogalay: (a) hawlaha sii-wadiida shaqo hore uu la-taliyaha u sameeyay oo la-taliyahana lagu soo doortay tartan; (b) shaqooyinka qaar ee leh muddo guud oo la filayo oo ka yar lix (6) bilood; (c) xaaladaha degdega ah ee ka dhalanaya masiibooyinka dabiiciga ah; iyo (d) marka shaqsiga uu yahay la-taliyaha keliya ee ka soo bixi kara shaqada.

5.18.8 **Xulashada Halka Meel Laga Helo:** La-taliyeyaasha Xulashada Halka Meel Laga Helo (SSS) ma bixiyaan faa'iidooyinka tartanka ee ku saabsan tayada iyo kharashaadka, hufnaan la'aan ka jirta xulashada, waxaa ayna dhiirrigelin karaan habdhaqano aan la aqbali karin. Sidaa darteed, xulashada halka meel laga helo waa in lagu adeegsado keliya xaaladaha ka duwan kuwa kale. Xulashada halka meel laga helo waxaa ay habboon tahay keliya haddii ay soo bandhigayso in ay si cad ugu faa'iido badan tahay tartanka: (a) xaaladaha degdega ah, sida kuwa looga jawaabayo masiibooyinka iyo adeegyada la-talinta ee loo baahan yahay inta lagu guda jiro muddada waqtiga ee isla-markiiba ku xiga xaaladda degdega ah, (c) shaqooyinka leh qiimaha yar ama muddada gaaban, ama (d) marka keliya hal (1) sharikad ay ka soo bixi karto ama ay waayo-aragnimo gaar ah oo qiimo leh u leedahay shaqada.

**5.19 Taxnaansho/sii-socosho**

5.19.1 Marka taxnaanshaha ama sii-socoshada loogu talogalay shaqada dhinac u socota ay daruuri tahay, RFP bilowga ah waa in uu muujiyo aragtidan, iyo haddii ay ku habboon yihiin, arrimaha loo adeegsado xulashada la-taliyaha waa in ay tixgeliyaan suurtagalnimada sii-



M. A

socoshada. Taxnaanshaha ee habka farsamo, khibradda la helo, iyo mas'uuliyadda xirfadeed ee sii-socota ee isla la-taliyaha waxay ka dhigi karta sii-wadidda la-taliyaha hore in la doorbido marka loo eego tartanka cusub, oo ku xiran hawlqabad lagu qanco oo ka jira shaqada bilowga/hore. Shaqooyinkaas dhinac u socda, Dowlad-goboleedka waa in ay wayddiiso la-taliyaha bilowga hore la xushay in uu diyaariyo soo-jeedimo farsamo iyo kuwo maaliyadeed oo ku saleysan TOR ay siiso Dowlad-goboleedka, kuwaas oo ka dib laga wada-xaajoonayo.

5.19.2 Haddii shaqadii bilowga aan lagu bixin siyaabo lagu tartamo ama haddii shaqada dhinac u socota ay si aad ah qiimo ahaan u weyn tahay, hannaan lagu tartamo oo ay aqbali karto Dowlad-goboleedka waa in sida caadiga ah la raaco oo aan laga reebin in loo tixgeliyo la-taliyaha hore u qabanayay shaqada haddii uu muujiyo in uu danaynayo. Dowlad-goboleedka waxay u tixgelin doontaa waxyaabaha gaarka ku ah xeerkan keliya daruufaha gaarka ah iyo keliya marka hannaan lagu tartamo oo cusub aan la sameyn karin.

## 6. NOOCYADA QANDARAASKA IYO QODOBADA MUHIIMKA AH

### 6.1 Qandaraaska Qiimaha Go'an

6.1.1 Qandaraasyada Qiimaha Go'an leh ("Qandaraaska Qiimaha Go'an") waxaa uu noqon karaa qaabab kala duwan sida mid lacagtiisu halmar la bixinayo, qiimaha qayb kasta iyo ujuurooyin boqolley ah. Qandaraasyada boqolleyda waxay si toos ah ula xiriiriyaan ujuurooyinka la siiyo la-taliyaha kharashka dhismaha mashruuca ee dhabta ah ama midka la qiyaasay, kharashaadka alaabada la soo-iibiyay ama la baaray ama cabbirka kale ee adeegga sida qaddarka maaliyadaha ee la bixiyay. Qandaraasyada qiimaha go'an waa ay fududdahay in la maamulo marka loo eego Qandaraasyada Waqtiga Ku Saleysan sababta oo ah lacag-bixinada waxaa lagu bixinayaa waxsoosaar/maxsuul si cad loo qeexay.

### 6.2 Qandaraas Waqti Ku Saleysan

6.2.1 Qandaraaska Waqtiga Ku Saleysan ("Qandaraas Waqti Ku Saleysan") waxaa uu habboon yahay marka ay adag tahay in la qeexo baaxadda iyo dhererka adeegyada, midkood iyada oo sabab u ah in adeegyada ay la xiriiraan hawlo oo ay qabtaan kuwo kale oo muddada in lagu dhammeeyo laga yaabo in ay kala duwan yihiin, ama iyada oo sabab u ah in gashiga la-taliyeyaasha ee loo baahan yahay si loo gaaro ujeeddooyinka shaqada ay adag tahay in la qiimeeyo. Lacag-bixinada lagu heshiiyay waxaa ay ku saleysan yihiin siciro saacadle, maalinle, toddobaadle, ama bil kasta ah oo loogu talogalay shaqaalaha (kuwaas oo sida caadiga ah lagu sheego qandaraaska) iyo agabka lacagahooda la isku celin karo iyada oo la adeegsanayo



M.A

kharashka dhabta ah iyo/ama qiimaha qayb ee lagu heshiiyay.

**6.3 Qandaraaska Kharashka Dib-loo-bixin Karo**

6.31 Qandaraasyada kharashka dib-loo-bixin karo waxaa ay aqbali kartaa Dowlad-goboleedka keliya marka ay jiraan xaalado gaar ah oo duwan sida xaaladaha ay khatartoodu sarreeyso ama halka kharashka aanan waqti hore la go'aamin karin iyada oo ay jirto saxnaan ku filan.

**6.4 Qandaraaska Boqolleyda ah**

6.4.1 Qandaraasyada Boqolleyda ah ("Qandaraaska Boqolleyda) waxaa caadi ahaan loo isticmaalaa adeegyada qaabaynta naqshadaha dhismeyaasha. Qandaraasyada Boqolleyda waxaa ay si toos ah ula xiriiraan ujuurooyinka la bixiyo ee la siiyo la-taliyaha ee ah kharashka Mashruuca dhismaha ee dhabta ah ama la qiyaasay. Qandaraasyada waxaa laga wada-xaajoodaa iyada oo lagu saleynayo caadooyinka suuqa ee adeegyada iyo/ama kharashka la qiyaasey ee ku baxa bishii shaqaalaha qabta adeegyada, ama waxaa loo qabanayaa tartan qandaraas. Waa in la xasuusnaado xaaladda adeegyada qaabaynta naqshada dhismaha ama injineernimo, in Qandaraasyada Boqolleyda ay si dadban u la'yihiin dhiirrigelinta naqshadayn dhaqaale oo sidaa daraadeed ayaa la isaga dhaafaa. Sidaas darteed, isticmaalka qandaraaska loogu talogalay adeegyada qaabaynta naqshada ayaa lagu talinayaa keliya waa haddii ay ku saleysan yihiin kharash leh bartilmaameed go'an oo ku baxaya adeegyo si sax ah loo qeexay.

**6.5 Gaarsiinta Aan Xadka Go'an Lahayn iyo Qandaraaska Tirada Aan Xadka Go'an Lahayn**

6.5.1 Qandaraasyada Gaarsiinta Aan Xadka Go'an Lahayn iyo Tirada Aan Xadka Go'an Lahayn (IDIQ) waxaa la isticmaalaa marka Dowlad-goboleedka ay u baahan tahay alaabo, shaqooyin fudud, iyo/ama adeegyo gaarsiintoodu iyo tiradoodu aan hore loo qeexi karin. Qandaraaska IDIQ caadi ahaan waxaa loogu talogalay muddo sanad ah ama ka badan.

**6.6 Shuruudaha iyo Qandaraasyada Heshiiska Iibka ee Aan Xaddinayn Leh**

6.6.1 Dowlad-goboleedka waxay u isticmaali kartaa noocyadan qandaraaska baahiyada soo noqnoqda.

## 7. QANDARAAS- HOOSAAD KU BIXIN

7.1.1 Haddii/marka qandaraas-hoosaad lagu bixiyo alaabada, shaqooyinka, adeegyada aan la-talinta ahayn iyo kuwa la-talinta ah qandaraaslaha koowaad, sharikada wax-iibisa ama la-taliyaha waa in ay u raacaan mabaadii'da wax-soo-iibsiga ee aasaasiga ah sida ku cad faahfaahinta Qaybta 4aad ee xagga sare ee buuggan ku xusan.

7.1.2 Sidaa darteed qandaraas ama qandaraas-hoosaad kasta ee loogu talo galay alaabo, shaqooyin, la-talin, ama adeegyada aan la-talinta ahayn waa in uu uga baahdo dhinacyada qandaraaska lala galayo in ay raacaan mabaadii'da wax-soo-iibsiga aasaasiga ah ee kor-u-qaadaya daahfurnaanta, furfurnaanta, tartanka iyo cadaaladda ilaa iyo inta ugu badan ee suurtagalka ah, iyo waafaqsanaanta ujeeddooyinka iyo shuruudaha qandaraaska.

7.1.3 Qandaraasle ama qandaraas-hoosaadle kasta ee qorshaynaya in uu qandaraas-hoosaad ku bixiyo shay weyn ama qayb (ka badan 20%) ka mid ah alaabada, shaqooyinka, la-talin, ama adeegyada aan la-talinta ahayn waa in uu wayddiistaa ogolaansha hore oo qoraal ah Dowlad-goboleedka ka hor inta uusan magacaabin cidda uu qandaraas-hoosaadka la galayo.

## 8. HABRAACYADA XAQIIJINTA XAQ-U-YEELASHADA

### 8.1 Hordhac

8.1.1 Qaybtan waxay ku qoran habraacyada loogu talogalay sameynta habraacyada xaqiijinta xaq-u-yeelashada inta lagu guda jiro qiimaynta araajida tartanka qandaraaska iyo soo-jeedimada ee barnaamijka wax-soo-iibsiga ee Dowlad-goboleedka.

### 8.2 Liiska Sharikadaha uu Ka-mamnuucay/Ka-reebay Bankiga Adduunka

8.2.1 Sharikada uu shaaca-ka-qaado in aysan xaq-u-lahayn Bankiga Adduunka sabab kastaba ha noqotee, oo ay ka mid tahay iyada oo la raacayo siyaasadaha la-dagaalanka musuqmaasuqa ee Kooxda Bankiga Adduunka, waa in aysan xaq u yeelan in la siiyo qandaraaska Dowlad-goboleedka inta lagu guda jiro muddada waqtiga uu sharikada cunaqabateeyay Bankiga Adduunka. Waxaa intaa dheer, qof kasta ee uu liiska madow ku daray Bankiga Adduunka waa in uu sidoo kale xaq u yeelan in la siiyo qandaraaska ay maalgeliso Dowlad-goboleedka.

8.2.2 Dowlad-goboleedka waa in ay u aqoonsato in aysan xaq u lahayn sharikad kasta ee lagu qoray liiska mid kasta ee ka mid ah kuwan soo socda:

Liiska uu Ka-mamnuucay/Ka-reebay Bankiga Adduunka:

*http://web.worldbank.org/external/default/main?contentMDK=64069844&menuPK=116730&pagePK=64148989&piPK=64148984&querycontentMDK=64069700&theSitePK=84266*



M.A

**Lifaaqa 1aad. Shuruudaha Ansixinta**

| Alaabada, Shaqooyinka, La-talinta iyo Adeegyada Aan La-talinta Ahayn | | | |
|---|---|---|---|
| | | **Heerka haddii ay tahay Ansixin / Heer USD** | |
| **Habka/Habraaca/Hawsha Wax-soo-iibsiga** | **Go'aanka** | **Agaasimaha Dowlad-goboleedka ee Wax-soo-iibsiga** | **Guddiga Wax-soo-iibsiga** |
| Qorshayaasha Wax-soo-iibsiga | Abuur/Wax-ka-beddel | Dhammaan | Dhammaan |
| Shuruudaha-hore | Dokumeentiyada shuruudaha-hore iyo habraacyada xayaysiinta | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |
| | Warbixin wadata liiska la soo-jeediyay ee ka soo baxay shuruudaha | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |
| Qandaraas Lagu Tartamo | Bixinta Dokumeentiyada | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |
| | Warbixin wadata liiska la soo-jeediyay ee ka soo baxay shuruudaha | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |
| Tartanka Qandaraaska ee Xaddidan | Bixinta Dokumeentiyada | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |
| | Warbixin wadata liiska la soo-jeediyay ee ka soo baxay shuruudaha | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |
| Adeegasho | Bixinta Dokumeentiyada | Dhammaan | Aan ku habboonayn |



M.A

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Warbixin wadata liiska la soo-jeediyay ee ka soo baxay shuruudaha | Dhammaan | Aan ku habboonayn |
| Ka Helidda Hal Meel oo Keliya | Bixinta Dokumeentiyada | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |
| | Warbixin wadata liiska la soo-jeediyay ee ka soo baxay shuruudaha | Dhammaan | Ka badan 10,000 USD |



M.A

**Lifaaqa 2aad. Tusaalaha Heshiiska Ilaalinta Sirta ee Guddiga Qiimaynta Farsamo**

FIIRO GAAR AH: Macluumaadka sirta ah waa in aan shaaca looga qaadin xubin kasta oo ka tirsan guddiga qiimaynta ama qof kasta ee arkaya ama dib-u eegaya warbixintada laga helay guddiga ilaa ay ka oggolaadaan in ay fuliyaan oo ay ku xirnaadaan shuruudaha Heshiiska Ilaalinta Sirta.

HESHIISKA ILAALINTA SIRTA EE
GUDDIGA QIIMAYNTA

Dowlad-goboleedka: ____________________

MAGACA MASHRUUCA: ____________________

LR. WAX-SOO-IIBSIGA ____________________

Waxaan halkaan ku xaqiijinayaa, sida waafaqsan sharciga ciqaabta in aan u-hoggaansami doono kuwaan soo socda:

Waxaan ogolahay in aan ka qaybgalo qiimaynta wax-soo-iibsiga kor lagu xusay. Waxaan xaqiijinayaa in aan qaaday tallaabooyin habboon si aan isu fahamsiiyo macluumaadka ilaa hadda la heli karo ee khuseeya wax-soo-iibsigan. Waa in aan u fuliyo si daacad ah oo cadaalad ku dheehan mas'uuliyadaheyga ku saabsan qiimayntan. Lama lihi wax xiriir ah dhinacyada soo-gudbinaya soo-jeedin loogu talogalay wax-soo-iibsigan. Ilaa inta aan ogsoonahay ama aamiinsanahay, midkoodna aniga ama xaaskeyga, ilmaha aniga igu tiirsan, lammaanaheyga guud, ama urur kasta ee aan ugu adeegayo sarkaal, agaasime, amaano-haye, shariig guud, ama shaqaale ahaan, ama qof kasta ama urur kasta ee aan wada-xaajoog la leeyahay ama naga dhaxeeyo qabanqaabo khuseysa shaqo la filayo, ee leh dano maaliyadeed ama dano dibadda oo saameyn ku yeelan kara go'aan kasta ee aan gaaro oo ku saabsan wax-soo-iibsiga.

Ilaa inta aan ogsoonahay, xaaskeyga, ilmaha aniga igu tiirsan, lammaanaheyga guud, ama urur kasta ee aan ugu adeegayo (ama aan u adeegay laba-iyo-toban bilood laga soo bilaabo taariikhda caddayntan) sida sarkaal, agaasime, amaano-haye, shariig guud, ama shaqaale ahaan, ama qof



M.A

kasta ama urur kasta ee aan wada-xaajoog la leeyahay ama naga dhaxeeyo qabanqaabo khuseysa shaqo la filayo ma aha dhinacyada ama ma matalayo dhinac dano ku leh arrinta.

Waxaan sidoo kale ogolahay mas'uuliyadeyda ah in aan shaaca-ka-qaado/sheego helitaanka wax dano maaliyadeed ama dano dibadda ah kale sida lagu sheegay xagga sare ee saameyn kara tallaabo kasta ee aan ka qaadi karo wax-soo-iibsigan iyo in aan sheego dano maaliyadeed ama dano dibadda ah kale ee kasta ee aniga, ama qof kasta ee kor lagu xusay, uu ku leeyahay urur u tartamaya bixinta qandaraaska wax-soo-iibsigaan.

Waxaan ogolahay in aan u hayo si aaminaad iyo kalsooni ay ku dheehan tahay macluumaad ama dokumeentiyo kasta ("macluumaad sir ah") ee shaaca la iiga qaaday ama aan aniga helay ama aan diyaariyay inta lagu guda jiro muddada ama sabab u ah qiimaynta wax-soo-iibsiga waxaana ogolahay in loo adeegsan doono keliya ujeeddooyinka qiimaynta wax-soo-iibsigan waana in aan shaaca looga qaadin dhinac saddexaad kasta. Waxaan sidoo kale ogolahay in aan haynin nuqullada macluumaad qoran kasta ama farsamada ama soosaarka koowaad ee aniga la ii keenay ama ee aan aniga abuuray.

| | |
|---|---|
| MAGAC | |
| LA SAXIIXAY | |
| TAARIIKH | |



M A

**Lifaaqa 3aad. Tusaalaha Foomka Wax-ka-beddelista iyo Qorshaha Wax-soo-iibsiga**

TUSAALE KELIYA

QORSHAHA WAX-SOO-IIBSIGA EE LOOGU TALOGALAY MUDDADA 1[DA] LUULYO 2016 ILAA 31[KA] DISEEMBAR 2016

| ID | Sharaxaad | Lacagta Miisaaniyadda La Dejiyay (oo ah USD) | Habraaca Wax-soo-iibsiga | Taariikhaha La Qorsheeyay | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | Bixinta Dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska | Xiritaanka Tartanka Qandaraaska | Qandaraas Bixinta | Dhammeynta Qandaraaska |
| | | | | | | | |
| | WADARTA GUUD | WADARTA GUUD | | | | | |
| | | | | | | | |
| 1 | Soo-iibinta Alaabo | WADARTA DABAQAD | | | | | |
| | | | | | | | |
| 1.2 | QALABKA TEKNOOLAJIYADA MACLUUMAADKA (IT) | Wadar-hoosaad | | | | | |

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | **Mashruuc A** | | | | | | |
| | Kombiyuutaro Waaweyn, Laabtoobyo, Barnaamij (Software), iyo Qalabka Kale (Peripherals) | Miisaaniyad | CB | | | | |
| | | | | | | | |
| 1.3 | **QALAB XAFIISEED, SAADKA IYO ALAABTA XAFIISEEDKA** | **Wadar-hoosaad** | | | | | |
| | | | | | | | |
| | **Maamulka Barnaamijka** | | | | | | |
| | Alaab Xafiiseed | Miisaaniyad | S | | | | |
| | | | | | | | |
| 2 | **Wax-soo-iibsiga Hawlaha Gudaha, Naqshadaha, Daraasadaha Xaaladaha Dhici Kara iyo Deegaanka, iyo La-taliyeyaal** | **WADARTA DABAQAD** | | | | | |
| 2.1 | **SHARIKADO** | **Wadar-hoosaad** | | | | | |
| | **Mashruuc A** | | | | | | |
| | Kormeerka Sahanka Soohdimaha Soonayaasha Miyiga iyo Magaalada | Miisaaniyad | QCBS | | | | |
| | Ololaha Raadiyaha iyo Telefishanka ee Istiraatiijiyadda Wargaarsiinta | Miisaaniyad | CQS | | | | |
| | | | | | | | |

M.A

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 2.2 | **SHAQSIYAAD** | **Wadar-hoosaad** | | | | | |
| | **Mashruuc A** | | | | | | |
| | **Awood Dhisid** | | | | | | |
| | Naqshadda TOR ee "Dhisidda dhisme xafiisyo badan leh" | Miisaaniyad | CQS | | | | |
| | | | | | | | |
| 3 | **Soo-iibsiga shaqooyin/dhisme** | **WADARTA DABAQAD** | | | | | |
| | | | | | | | |
| | **Mashruuc B** | **Wadar-hoosaad** | | | | | |
| | Kaabayaal loogu talogalay Beero Tijaabo Lagu Soo Bandhigo | Miisaaniyad | CB | | | | |
| | | | | | | | |
| | **Maamulka Barnaamijka** | **Wadar-hoosaad** | | | | | |
| | Dhisme Xafiis, Qaboojinta/Dib-u-qurxinta | Miisaaniyad | S | | | | |
| | | | | | | | |
| 4 | **Adeegyada Aan La-Talinta Ahayn** | **WADARTA DABAQAD** | | | | | |
| | | | | | | | |
| | **Mashruuc A** | **Wadar-hoosaad** | | | | | |
| | Xadaynta iyo Rakibaadda Astaanta Meelaha La Ilaaliyo | Miisaaniyad | S | | | | |



M.A

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | **Mashruuc B** | **Wadar-hoosaad** | | | | | |
| | Adeegyada Aan La-Talinta Ahayn ee Beeritaanka Dhul-beereed Kayn Run ah | Miisaaniyad | CB | | | | |
| CB = Qandaraas lagu tartamo; CQS = Xulashada ku saleysan aqoonta la-taliyaha; QCBS = Xulashada Tayada & Kharashka Ku Saleysan; S=Adeegasho; SSS= Ka Helidda Hal Meel oo Keliya | | | | | | | |

## TUSAALAHA FOOMKA WAX-KA-BEDELKA

| Wax-ka-beddelka Foomka Codsiga Qorshaha Wax-soo-iibsiga * | | |
|---|---|---|
| **Sharaxaadda iyo Lr. Wax-soo-iibsiga** | **Codsiga Wax-ka-beddelka** | **Isbeddelka Guud ee La Qiyaasay (USD)** |
| *Lambarka aqoonsiga wax-soo-iibsiga (haddii loo baahan yahay) iyo sharaxaad* | *Sharaxaadda waxa la codsaday marka loo eego isbeddelka lagu sameynayo Qorshaha Wax-soo-iibsiga (oo ah, wax-soo-iibsiga dheeraadka ah, beddelka habka wax-soo-iibsiga, beddelka qaddarka miisaaniyadda, beddelka taariikhaha la qorsheeyay iwm.).* | *Qiimaha, oo USD ah, ee beddelka wax-soo-iibsiga ee la codsaday. Loo adeegsado in lagu go'aamiyo guud ahaan, saameynta uu ku yeelanayo kharashka la qiyaasay ee wax-ka-beddelka la codsaday* |
| **Cududaar/Sabab Wanaagsan** | | |
| *1) Cududaarka koowaad ee wax-ka-beddelidda Qorshaha Wax-soo-iibsiga* | | |
| | | |
| *2) Cududaarka labaad ee wax-ka-beddelidda Qorshaha Wax-soo-iibsiga (haddii la adeegsan karo)* | | |

*Foomkan waa in loo soo gudbiyo sida lifaaqa Qorshaha Wax-soo-iibsiga ee wax laga beddelay ahaan.



M.A

**Lifaaqa 4aad. Habraac ku saabsan Qorista iyo Dib-u-eegista Shuruudaha Tixraaca**

Lifaaqan waxaa uu siinayaa habraac/hagid Dowlad-goboleedka oo ku saabsan sameynta/horumarinta Shuruudaha Tixraaca (TOR) iyada oo la raacayo Qaybta 5aad ee Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga.

**Ujeeddada iyo Shaqada Shuruudaha Tixraaca**

TOR gudahiisa, Dowlad-goboleedka waxay ku sharxaysaa adeegyada la-talinta ee ay doonayso in ay soo iibsato oo faahfaahsan. TOR waa dokumeentiga bixinaya nuxurka Codsiga Soo-jeedimada (RFP). Qodobadaan soo socda waa in la tixgeliyo marka la sameynayo TOR:

**Sheeg ujeeddada ama hadafka wax-soo-iibsiga:**

- Si sharaxaad aad waadax u ah uga bixiso adeegyada Dowlad-goboleedka ay doonayso in ay soo-iibsato iyo ujeeddada ay u soo iibsanayso.
- Bixi macluumaadka badan oo suurtagalka ah si aad u sharaxdo aragtida Dowlad-goboleedka ee shaqada/hawsha.
- Tixgeli in TOR ay akhrin doonaan dad dibadda ka ah oo aan wax aqoon ah u lahayn ama aqoon yar u leh Mashruuca balse la filayo in ay soo-jeediyaan habka la raacayo iyo qiimaha ay ku qabanayaan shaqada/hawsha oo ku saleysan macluumaadka lagu bixiyay TOR-ka.
- Haku noqon mid aad "u raaca ama u dhaqangeliya xeerka" TOR-ka (oo ay ka mid tahay in aad ku isticmaasho xakamayn marka la qeexayo shuruudaha shaqaalaynta) si loogu oggolaado



M A

oo loogu dhiirrigeliyo la-taliyeyaasha in ay soo-jeediyaaan habab iyaga u gaar ah ee loogu talogalay qabashada adeegyada iyo bixinta waxyaabaha la gaarsiin karo ama la geyn karo.

**Bixi sharaxaadda waadaxa ah ee raad-raaca iyo xaaladda:**

- Hubso in macnaha guud ee TOR la sharxo si la-taliyaha ay ugu fududaato fahamka. Xooga saar sida qandaraaskan uu ugu habboon yahay barnaamijka guud; sababta shaqada la soo-jeediyay ay muhiim ugu tahay Mashruuca.
- Sharaxaad ka bixi taariikhda Mashruuca iyo hawlaha hore loo dhammeeyay, haddii la adeegsan karo.
- Sharaxaad ka bixi sida shaqada loo qabtey si waafaqsan qandaraaskaan loola xiriirinayo oo loogu xijinayo shaqada ay qabteen la-taliyeyaal kale. Noqo mid si cad u sharxa isuduwidda loo baahan yahay in lala yeesho la-taliyeyaasha kale, qandaraaslayaasha ama hay'adaha dowladda.
- Aqoonso deeqbixiyeyaasha kale ee ku lugta leh Mashruuca ama saameyn ku yeelan kara shaqada.
- Ku dar, marka ay habboon tahay, liiska hay'adaha oo raacsan qoraal yar oo la-taliyaha uu taageeri doono ama isku imaanayaan, sidaa awgeed la-taliyaha waxaa uu si cad u fahmayaa isdhexgalka iyo Mashruuca oo dhan. Sharax xiriirada ka dhex jira iyo kuwa hay'adahan u dhaxeeya ee loogu talogalay ujeeddooyinka bixinta adeegyada la taageeray. Ha u qaadan in la-taliyaha uu si fudud u garanayo ama u fahmayo tani.
- Ku dar daraasado ama tixraacyo u furan bulshada (waraaqaha hagidda/habraaca Dowlad-goboleedka, dokumeentiyo dibadda lagu soo diyaariyay, iwm.) ee khuseeya shaqada la qaban doono. Bixi liiska daraasado iyo dokumeentiyo gaar ah ee ay heli karaan ama u furan la-taliyaha la xushay.
- Haddii wax-soo-iibsiga ay ka mid yihiin alaabo xiriir ka dhaxeeya, ku dar sharaxaadda alaabada iyo jaalgooyooyinka hawlqabadka ama shaqooyinka ee lagu gaarayo soo iibsashada alaabada. Hubso in tilmaamaha gaarka ah ee farsamo ay si sax ah ugu turjumayaan shuruudaha ugu yar iyo in aysan u eexan magac sharikad gaar ah ay leedahay ama si cadaalad-daro ah u takooro magacyo sharikado gaar ah ay leeyihiin.

**Si cad u qeex waxyaabaha la gaarsiin karo ama la geyn karo iyo khayraadka loo baahan yahay:**

- Hubso in hawlaha si cad loo tilmaamay oo tiro la siiyay, iyo in waxyaabaha la gaarsiin karo ama la geyn karo si cad loo sheego. Hubso in waxyaabaha la gaarsiin karo ama la geyn karo ee la soo-jeediyay in ay dhacaan gudaha qorshaha shaqada iyo baaxadda ee hawlaha.
- Ku dar muddo waqti ah ee loogu talogalay hawlqabadka adeegga iyo jadwalka waqtiga la filayo ee loogu talogalay soo-gudbinta waxyaabaha la gaarsiin karo ama la geyn karo ee la-taliyaha. Halka faallooyin ku saabsan waxyaabaha la gaarsiin karo ee ku meelgaar ah ay tahay in ay bixiso Dowlad-goboleedka ama go'aano ay tahay in ay qaadato Dowlad-goboleedka oo saameynaya shaqada dheeraadka ah ee la-taliyaha, tilmaan shuruudahaas iyo xilliga cayiman ee loogu talogalay gashiyada Dowlad-goboleedka.
- Noqo mid si sax ah u qeexaya waxyaabaha la gaarsiin karo ee loogu baahan yahay xaddidaad sax ah (tus. sahano gaar ah, khariidaynta).
- Ku dar, haddii ay habboon tahay, qiyaas cad oo ah qaddarta waqtiga shaqaalaha, oo lagu sheego maalmaha shaqada ama bilaha shaqada, ee loo baahan yahay si loo qabto adeegyada loo baahan yahay.
- Ku dar, marka ay habboon tahay, shaqaalaha loo baahan yahay iyo jagooyinka hawlwadeennada muhiimka ah.
- Ku dar, marka ay habboon tahay, shuruudaha shaqaalaha ee loo baahan yahay, gaar ahaan loogu talogalay hawlwadeennada muhiimka ah.
- Sharaxaad ka bixi shuruudaha luuqadeed ee inta lagu jiro hawlqabadka qanadaraaska sida baahiyada luuqadeed ee shaqaalaha deegaanka shaqada, bixinta soo-bandhigyada afka lagu soo bandhigo, iyo gaarsiinta warbixinnada ku-meelgaarka ah iyo kuwa kama-dambeyska ah.
- Sharaxaad ka bixi noocyada iyo tirada warbixinnada ee la saasoorayo, qaababka gaarka ah, iyo shuruudaha barnaamij (software) (tus. barnaamijka Excel spreadsheets, AutoCAD drawings).
- Qeex waxa Dowlad-goboleedka ay bixin doonto si ay u taageerto shaqada, tusaale ahaan, nuqullada waraaqaha rasmiga ah, meel xafiis ay ka dhigtaan, telefoon, Internet, iyo daabacaad.

**Habraac gaar ah oo loogu talogalay soo-iibsiga adeegyada Korjoogtaynta iyo Qiimaynta:**

- Waxaad si cad u aqoonsataa shuruudo xog ururin kasta: xogta loo baahan yahay; sida joogtada ah ee ay tahay in loo ururiyo; halbeegyada iyo qeexitaanada ay tahay in loo adeegsado tilmaame/ishaare ahaan; iyo talaabooyinka ama hababka ay tahay in la isticmaalo si loo ilaaliyo tayada xogta.



M.A

- Sharax qaabka ka-warbixinta (sida nooc fayl elektaroonig ah, barnaamij (software) la adeegsan doono, nuqul adag oo waraaq ah, iwm.) sidaa awgeed kuwa ku lugta leh korjoogtaynta iyo qiimaynta waxay isku-dari karaan warbixinta iyo xogta laga soo ururiyay hirgaliyeyaasha.
- Sharaxaad ka bixi, halka ay ku habboon tahay, saameynta habka qiimaynta ay tahay in la adeegsado iyo diyaafadino kasta ee loo baahan doono si loo qabto qiimaynta saameynta, si kala-qaybqaybinta adeeg bixinta loo soo bandhigo ama qaadashada ka-faa'iidaystayaasha.

**Tifaftirid:**

- Eeg hikaadda oo akhri si aad uga eegto khaladaad.
- Marka loo baahdo, hubi turjumaadda dokumeentiyada loo turjumayo Af-ingiriis ama Af-Soomaali.



M.A

## Lifaaqa 5a. Tusaalaha Ogeysiiska Wax-soo-iibsiga Guud

### TUSAALAHA OGEYSIISKA WAX-SOO-IIBSIGA GUUD (GPN)

Dowlad-goboleedka ayaa doonaysa in ay u adeegsato maaliyadaha miisaaniyadda lacag-bixinada loogu talogalay Qandaraasyada Alaabada, Shaqooyinka iyo Adeegyada.

Barnaamijka wax-soo-iibsiga ee lixda bilood ee xigta waxaa ka mid noqon doona kuwan soo socda:

| **Wax-soo-iibsiga ee [Qeex] Kala-bar [Sanad]**<br>Qiimaha La-Qiyaasay – [Lacag Doolar] |
|---|
| |
| **Soo-iibsiga Alaabo** ] waa in ay ka mid noqdaan: |
| * Qalabka IT-ga, sistem-yada gudbinta xogta iyo barnaamij (software) |
| * Sawirka/muuqaalaynta khariidadaynta lahaanshaha dhuleed |
| * Alaab Xafiiseed iyo saadka guud ee xafiiska |
| * Mootooyin |
| * Gawaarida kale ee kala-soocan |
| * Qalabaynta xafiisyada amaahda, hay'adaha falanqaynta halista iyo qiimaynta |
| |
| **Soo-iibsiga Shaqooyinka** waa in ay ka mid noqdaan: |
| * Dayactirka dhismo xafiiseedka jira |
| * Naqshada goobta iyo dhisidda dhismeyaal maamul oo cusub kuwaas oo leh cabbiraad kala duwan |
| * Nidaam arkiifyo |
| * Rakibaadda nidaamka xog gudinta ee dayax-gacmeedka ku xiran. |
| |
| **Soo-iibsiga Adeegyada (oo ay ka mid yihin Adeegyada La-Talinta)** waa in ay ka mid noqdaan: |



M.A

| |
|---|
| * Adeegyada lagu casriyaynayo ee loogu wareejinayo maamulka dhulka laamaha hoose, oo ay ka mid tahay abuurista nidaam macluumaad iyo barnaamij (software) khuseeya. |
| * Barnaamijka tababarka beeraha ee ku saabsan dhaqashada iyo suurtagelinta xoolaha caanaha laga helo. |
| * Gargaarka farsamo ee abaabulidda wargaarsiinta istiraatiijiga ah iyo ololaha macluumaadka ee loogu talogalay kor-u-qaadista ujeeddooyinka qaybaha oo dhan. |
| * La-talin sharci ee muddo gaaban iyo muddo dheerba ah. |
| * Daraasada xaaladda dhici karta ee muddada gaaban ee Maaliyadaha Haysashada Dhulka Qaranka,. |
| * Daraasadaha farsamo ee ku saabsan hawlgallada maamulka dhulka iyo xarumaha. |
| * Gargaarka farsamo ee hay'adaha maaliyadeed ee [Dalka]. |
| * La-taliyeyaasha loogu talogalay awood dhisidda qaybta maaliyadda guud. |
| * Qaabaynta naqshadaha, naqshadda goobta iyo shaqada qiimaynta deegaanka. |
| * Gargaarka farsamo ee horumarinta qorshaha ganacsi ee beeraha. |
| * Daraasadaha suuqa beeraha, maagelinta iyo silsilada qimaha. |
| * Awood dhisidda diyaargarowga loogu talogalay, iyo gargaarka farsamo ee hirgalinta, Korjoogtaynta iyo Qiimaynta xog ururinta iyo shaqada sahanka. |
| * Tababarka ku saabsan buugga habraacyada Korjoogtaynta iyo Qiimaynta. |
| * Naqshadaynta iyo hirgelinta barnaamija (software) kaydka xogta ee Korjoogtaynta iyo Qiimaynta iyo MIS. |
| * Abaabulka carwo-bandhigeedyada beeraha iyo bandhigyada ganacsiga. |
| * Gargaarka farsamo ee waxsoosaarka [dalagga maxalliga ah] . |

Qandaraasyada loogu talogalay Alaabada, Shaqooyinka iyo Adeegyada ee la maalgeliyay iyada oo la raacayo barnaamijka waxaa loo hirgelinayaa si waafaqsan mabaadii'da, sharciyada iyo habraacyada lagu dhigay Buugga Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dowladda ee Dowlad-goboleedka ee laga heli karo mareegtada Dowlad-goboleedka.

Wax-soo-iibsiga waxaa uu u furan yahay dhammaan tartamayaasha ka socda dalalka laga helo ee xaqa u leh sida lagu qeexay Buugga Habraacyada Wax-soo-iibsiga Barnaamijka Dowlad-goboleedka.



M.A

Xeer-nidaamiyaha #8: Xeer-nidaamiyaha Dejinta *Buugga Siyaasadaha iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dowladda*

Qandaraaslayaasha iyo La-taliyeyaasha xaqa u leh ee danaynaya ee doonayo in lagu daro liiska boostada (mailing list) si ay u helaan nuqulka xayaysiinada, ama kuwa u baahan macluumaad dheerad ah waa in ay la xiriiraan: ..................



M.A

**Lifaaqa 5b. Tusaalaha Ogeysiiska Wax-soo-iibsiga gaarka ah**

**OGEYSIISKA WAX-SOO-IIBSIGA GAARKA AH (SPN)**

**JAAN-GOOYADA 1aad (La-Taliyayaal)**

**Magaca Wax-soo-iibsiga:** ______________________________

**Magaca Mashruuca (haddii uu ku habboon yahay):** ______________________________

**Nooca Wax-soo-iibsiga**: Codsiga Soo-jeedimada (RFP)

**Lr. Tixraaca RFP**: ______

**Macluumaad Guud**

Dalka Magaalada/Degaanka:

Lambarka Qandaraaska/Ogaysiiska: Taariikhda Baahinta:

Taariikhda Kama-dambayska:

Dowlad-goboleedka waxaa ay heshay Deeq-bixiye [tirtir ereyada "heshay Deeq-bixiye" haddii maalgelinta oo dhan ay ka imaanayso ilo Dowlad-goboleedka ah deeq maaliyadeed oo gaaraysa [geli Lacagta oo Doolar ah] waxaa ayna doonaysaa in ay u adeegsato qayb deeqda maaliyadeed ah lacag-bixinada loogu talogalay Qandaraasyada Adeegyada La-talinta.

**Qoraalka Muhiimka ah:**

[Qoraal kooban oo ah heshiiska maaligelinta Deeq-bixiyaha, haddii uu jiro]

[3-6 baaragaraaf oo ah sharaxaadda wax-soo-iibsiga gaarka ah]

Fadlan ka eeg mareegtooyinka soo socda Codsiga Soo-jeedimada La-talinta (RFP) oo dhammeystiran oo ay ka mid tahay Waraaqda Casumaadda (LOI) iyo Shuruudaha Tixraaca (TOR):



M. A

Beddel ahaan, fadlan la xiriir: __[geli] _______ si aad u hesho nuqulka RFP oo dhammeystiran oo ay ka mid tahay LOI iyo TOR.

Soo-jeedimada la-talinta waa in ay tixraacaan Lr. Tixraaca RFP iyo Magaca Wax-soo-iibsiga waana in la helo kama dambeys [geli] ________ marka ay tahay [waqti] _____ee waqtiga degaanka cinwaankan soo socda:

**Cinwaanka Soo-gudbinta:**

Cinwaanka: Magaalada:

Dalka: Telefoon:

Iimayl:



M.A

## OGEYSIISKA WAX-SOO-IIBSIGA GAARKA AH (SPN)

## JAAN-GOOYADA 2AAD (Badeeco, Shaqooyin iyo Adeegyo)

**Magaca Wax-soo-iibsiga:** ______________________________________________

**Magaca Mashruuca (haddii uu ku habboon yahay):** ___________________________

**Nooca Wax-soo-iibsiga**: (Alaabo/Shaqooyin/Adeegyo – u tirtir sida habboon)

**Lr. Tixraaca Casumaadda Tartanka Qandaraaska:** ____

Dowlad-goboleedka waxaa ay ka heshay Deeq-bixiye [tirtir ereyada "heshay Deeq-bixiye" haddii maalgelinta oo dhan ay ka imaanayso ilo Dowlad-goboleedka ah]deeq maaliyadeed oo gaaraysa [geli Lacagta oo Doolar ah] waxaa ayna doonaysaa in ay u adeegsato qayb deeqda maaliyadeed ah lacag-bixinada loogu talogalay Alaabada, Shaqooyinka iyo Adeegyada.

**Qoraalka Muhiimka ah:**

[Qoraal kooban oo ah heshiiska maaligelinta Deeq-bixiyaha, haddii uu jiro]

[3-6 baaragaraaf oo ah sharaxaadda wax-soo-iibsiga gaarka ah]

Fadlan ka eeg mareegtooyinkaan soo socda dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska oo dhammeystiran.

Beddel ahaan, fadlan la xiriir: __[geli] _______ si aad u hesho nuqulka dokumeentiyada Tartanka Qandaraaska oo dhammeystiran.

Soo-jeedimada tartamaha waa in ay tixraacaan Lr. Tixraaca IFB iyo Magaca Wax-soo-iibsiga waana in la helo kama-dambays [geli] ________ marka ay tahay [waqti] _____ee waqtiga degaanka cinwaankan soo socda:

**Cinwaanka Soo-gudbinta:**



M.A

Xeer-nidaamiyaha #8: Xeer-nidaamiyaha Dejinta *Buugga Siyaasadaha iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dowladda*

Cinwaanka: Magaalada:

Dalka: Telefoon:

Iimayl:



M.A

## Lifaaqa 6aad. Habraac ku saabsan Falanqaynta Qiimaha Macquulka ah

Lifaaqan waxaa uu siinayaa habraac Dowlad-goboleedka oo ku saabsan qabashada falanqaynta qiimo macquulka ah.

**Mas'uuliyadda iyo Diiwaangelinta**

Dowlad-goboleedka, waxay mas'uul ka tahay qabashada falanqaynta. Falanqaynta waa in loo qabto guulaystaha dhici kara ee qandaraaska inta lagu guda jiro qiimaynta maaliyadeed ee tartanka qandaraaska/soo-jeedimada. Falanqaynta qiimaha ee macquulka waa in lagu diiwaangeliyo diiwaanka wax-soo-iibsiga.

**Qeexitaan iyo Ujeeddo**

Falanqaynta qiimaha macquulka ah waa dib-u eegidda qiimayaasha ay soo-jeediyeen qandaraasle, sharikad wax-iibisi ama la-taliye si loo hubiyo in qiimayaasha lagu soo-bandhigay tartanka qandaraaska ama soo-jeedimada ay yihiin kuwo cadaalad u ah labada dhinac iyada oo la tixgelinayo dadaalka loo baahan yahay si loo dhammeystiro hawsha, tayada tartanka qandaraaska ama soojeedinta, iyo isbarbardhigidda qiimayaasha ee ku saabsan mashaariicda la midka ah ee suuqyada maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah. Qiimayaasha dib-u-eegis ayaa lagu sameynayaa si loo hubiyo in qiimayaasha ay soo sheegeen qandaraaslaha, sharikada wax-iibisa ama la-taliyaha la xushay aysan ahayn midkood mid qaali ah oo aan macquul ahayn (taas oo dhici karta, tusaale ahaan, marka ay jirto in jawaab liidata laga soo bixiyo Casumaadda Tartanka Qandaraaska ama Codsiga Soo-jeedimada, ama heshiis qarsoodi ah) ama uu u jaban yahay si aan macquul ahayn (ee dhici kara, tusaale, marka uu jiro tartan qiimo aad ah/daran, ama sharaxaad si liidata loo fahmay ee ah ujeeddada wax-soo-iibsiga). Falanqayntaan waxay bixinaysaa eegid labaad ee ay sameyso Dowlad-goboleedka ee ah in Maaliyadaha Dowlad-goboleedka looga faa'iidaysanayo hab qiimo wax-ku-ool ah leh, iyo in qandaraaslaha, sharikada wax-iibisa ama la-taliyaha ay awoodi doonaan in ay ka soo baxaan shuruudaha sida lagu dhigay dokumeentiyada wax-soo-iibsiga.

Falanqaynta qiimaha macquulka ah waxaa ay ka duwan tahay falanqaynta kharashka. Farqiga ugu weyn waa in falanqaynta qiimaha macquulka ah ay eegto qiimaha guud halka falanqaynta kharashka ay baarto canaasirta kharashka gaarka ah ee qiimahan guud. Iyada oo ku xuran Mashruuca, canaasirta kharashaadka way kala duwanaan karaan balse guud ahaan waxaa ka mid



M.A

ah qiimaha shaqaalaha, kharashka ku baxa agabka, kharashka guud ama qiimaha dadban, kharashka ka dhasha lacagta, kharashaadka guud iyo kuwa maamulka, iyo faa'iidada ama lacagaha ujuurada ah. Falanqaynta qiimaha macquulka ah sida caadiga ah waxaa loo sameeyaa qandaraasyada qiimaha go'an leh. Falanqaynta kharashaadka sida caadiga ah waxaa loo sameeyaa qandaraasyada kharashaadkooda la isku celiyo.

**Hababka loogu talo galay Sameynta Falanqaynta Qiimaha Macquulka ah**

Waxaa jira dhawr siyaabood oo falanqaynta qiimaha macquulka ah lagu sameyn karo iyada oo aan la eegin qaybaha gaarka ah ee uu ka kooban yahay qiimaha guud.

(a) **Qiimayaasha Lagu Tartamo**: Hannaanka tartanka qandaraaska ee furan halkaas oo qiimaha uu yahay arrin lagu qiimeeyo iyada oo dhawr tartano qandaraas ama soo-jeedimo la aqbali karo oo xaq u leh la helay, waxaa si ammaan ah loo qaadan karaa in qiimayaasha ay yihiin kuwo macquul ah sida ay go'amiyaan xaaladaha suuqa, balse keliya haddii ay jiraan ikhtilaaf yar oo u dhaxeeya qiimayaasha la soo bandhigay. Haddii uu jiro ikhtilaaf weyn oo u dhaxeeya laba tartan qandaraas ama soo-jeedimo kasta, Dowlad-goboleedka waa in ay xaqiijiso in sharaxaadda wax-soo-iibsiga ay tahay mid si cad ugu filan in aan si khalad ah loo fahmin, iyo in aysan jirin khaladaad xisaabeed.

(b) **Qiimayaasha Taariikheed**: Haddii qiimayaasha la soo bandhigay ay yihiin kuwo la barbardhigi karo qiimayaasha hore ay u soo bandhigeen qandaraasyo la mid ah midkood isla qandaraaslayaasha ama qandaraaslayaal kale, sharikado wax-iibiya ama la-taliyeyaal Dowlad-goboleedka, iibsadayaasha kale ee waaweyn ee dowladda, ama hay'ad deeq-bixiye ee ku sugan dalka Mashruuca, ka dib qiimayaasha waxaa loo qaadan karaa in ay yihiin kuwo macquul ah. Marka la barbardhigayo qiimayaasha hadda qiimayaasha taariikheed, sicir-bararka iyo farqiga macquulka ah ee faa'iidooyinka kororay waa in la tixgeliyo.

(c) **Qiimayaasha Daliil-hayaha**: Habkaan waxaa uu habboon yahay marka la iibsanayo alaab ganacsi oo suuqa laga helo, halka sharikada iibisa ay dhici karto in ay leedahay daliil-haye, oo sharikadda iibisa ay doonayso in ay bixiso bog daliil-haya ah oo taariikhda hadda ku qoran oo qora liiska shayga la iibsanayo iyo qiimo-dhimis kasta ee ay heli karaan iibsadayaasha waaweyn. Xaaladdan, sharikada iibisa waxaa laga codsan karaa in ay bixiso tixraaca iibsada kale oo weyn, halkaas oo gudaha dalka ee Mashruuca ama dibadda, ee xaqiijin kara qiimayaasha iibsadaah uu siiyay sharikaddan wax-iibisa.



M.A

**(d) Qiimayaasha La Baahiyay**: Badeecooyinka qaar ee laga ganacsado sida haruurka, shidaalka, ama maarta waxaa ay leeyihiin qiimayaal caalami ah ama qaran ee lagu baahiyo wargeysyo caan ah. Haddii qiimayaasha la soo bandhigo ay la mid yihiin ama ka yar yihiin qiimayaashaan la daabacay, markaas waxaa loo qaadan karaa in qiimayaasha ay macquul yihiin.

**(e) Qiyaas Madax-bannaan ama Miisaaniyad Qorsheysan:** Haddii qiyaasta madax-bannaan ama miisaaniyadda qorsheysan ay diyaarisay Dowlad-goboleedka, qiyaastan madax-bannaan ama miisaaniyadda qorsheysan waxaa loo adeegsan karaa sida waxa go'aamiya qiimaha macquulka ah haddii loo tixgeliyo in uu yahay mid ansax ah oo habboon waqtiga bixinta.

**(f) Barbardhigidda Qiimayaasha Shay La Mid Ah**: Soo-iibsiga alaabo, haddii sharikad wax-iibisa ay muujin karto qiimayaasha shay la mid ah, oo ayna sabab fiican u bixin kara kala duwanaanshaha qiimaha ee ku saleysan astaamo ka duwan ama dheeraad ah, Dowlad-goboleedka waxay ogolaan kartaa qiimayaasha la soo-jeediyay oo ku saleysan labadan (2) arrimood. Kala-duwanaanshaha u dhaxeeya qiimaha sharikada iibisa iyo qiimaha sharikada la tartanta waa in la faahfaahiyo oo sabab fiican loo yeelo, qiimayaasha la tixraacay waa in laga heli karo ilo madax-bannaan oo la xaqiijin karo (ma aha keliya sharikada iibisa laf-ahaanteeda).



M.A

## Lifaaqa 7aad. Tusaalaha Habdhaqanka Caalamiga ah ee Tusmaynta Faylka Qandaraaska ee Ugu Wanaagsan

**(ma aha dhammaan kuwo khusayn doono Dowlad-goboleedka)**

| **Tusmada Faylka Qandaraaska** | Lr. Qandaraaska | Lr. Wax-ka-Bedelidda | Sharaxaadda Tallaabada: |
|---|---|---|---|

Fadlan geli dokumeentiga fayl, iyaga oo ku kala-soocan tuuqsiyaha/tabs. Haddii dokumeenti loo baahan yahay, geli "X" gudaha jog-u-taxa "IN FILE", ama adeegso aqoonsadaha galka haddii uu jiro in ka badan hal gal.

| # | DOKUMEENTI | IN FILE | # | DOKUMEENTI | IN FILE |
|---|---|---|---|---|---|
| | **DOKUMEENTIYADA BIXINTA** | | | **DOKUMEENTIYADA QIIMAYNTA** | |
| | Qandaraaska & Waraaqaha Bixinta | | | Qorshaha Xulashada Isha | |
| | Wax-ka-bedelidda iyo Diiwaanka Wax-ka-beddelidda | | | Ogeysiiska Soo-bandhigayaasha Ugu Dambeeya | |
| | Dokumeentiyada Tartan Qandaraas La'aan | | | Qiimaynta Soo-jeedinta: Tik/PP/Qiimaha | |
| | Qaybinta Qandaraas-bixinta | | | Go'aaminta Kala-duwanaanta Lagu Tartamo | |
| | | | | Ogeysiiska Reebnaanta ee Kala-duwanaanta Lagu Tartamo | |
| # | **DOKUMEENTIYADA DALABKA** | | | Munaaqasho/Sharaxaad | |
| | Dokumeentiga Dalabka | | | Codsiga loogu talogalay Soo-jeedinada Ugu Dambeeya ee dib loogu noqday | |



M.A

| | | |
|---|---|---|
| | DokumeentiyoTaageero & Wax-ka-bedelid | |
| | Dib-u-eegista Dalabka Tusaalaynta ah | |
| | Gelinta SharePoint | |
| | | |
| | **Hawsha & AMARADA WACITAANKA** | |
| | Hawsha/Amarada Wacitaanka iyo Wax-ka-beddelidda La Xiriirta | |
| | | |
| # | **DOKUMEENTIYADA MAAMULKA** | |
| | Guudmaryada Bixinta | |
| | Warbixinada/Qorshaha Gelidda Qandaraas-hoosaad | |
| | Dokumeentiyada Shirkada Bixinta Kadib | |
| | Warbixinnada Qandaraaslaha | |
| | Qaansheegyada iyo Waraaqo Isdhaafsiga La Xiriira | |
| | Waraaqo Isdhaafsiga Maamulka La Xiriira | |
| | | |
| | | |
| | **DOKUMEENTIYADA BIXINTA KA HOR** | |
| | Dhacdooyinka Muhiimka ah | |

| | | |
|---|---|---|
| | Isafgaradka Wada-xaajoodka Kadib | |
| | Go'aanka Xulashada Isha | |
| | Warbixinada Xogwareysiga ah | |
| | Dokumeentiga Dib-u-eegista Qandaraaska | |
| | | |
| | **DOKUMEENTIGA BIXINTA-KADIB** | |
| | Soojeedinada Aan Lagu Guulaysan – Fayl gooni ah | |
| | Lr. Fayl gaar ah: | |
| | Ogeysiiska Bixinta Ka dib ee Soo-bandhigayaasha Aan Guulaysan | |
| | Soo-jeedinta(nada) Guulaystay | |
| | Soo-afjaridda Qandaraaska | |
| | | |
| | **DOKUMEENTIYADA WAX-KA-BEDELIDDA EE DIYAARSAN** | |
| | Tallaabada Fariinta Qoran & IGCE | |
| | Bayaanka Shaqada ee Dib Loo Saxay | |
| | Dalab | |
| | Go'aaminta Ikhtiyaarka Adeegsiga | |
| | Is-afgaradka Wada-xaajood Ka | |

Xeer-nidaamiyaha #8: Xeer-nidaamiyaha Dejinta *Buugga Siyaasadaha iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dowladda*

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | | Dib | |
| | Tallaabada Fariinta Qoran | | | Waraaqo Isdhaafsiga Wax-ka-bedelidda | |
| | Dalab | | | Xaashida Dib-u-eegista | |
| | SOW | | | Soo-afjaridda Wax-ka-bedelidda: | |
| | IGCE | | | Bayaanka Dhammeystiridda Qandaraaska | |
| | Shuruudaha Qiimaynta | | | Liis-hubineedka Soo-afjaridda Qandaraaska | |
| | Ilaha Lagu Taliyay | | | Is-afgaradka Soo-afjaridda ee COTR | |
| | Magacaabista COTR | | | Waraaq Soo-afjarid k u socota Qandaraasle | |
| | Magacaabidda Xubinka TEP | | | | |
| | Cilmi-baarista Suuqa | | | | |
| | Qorshaha Adv Proc | | | | |
| | Go'aaminta & Natiijooyinka: Ikhtiyaarada & T&M | | | | |
| | | | | | |
| | Xaq-u-yeelashada EPLS | | | | |
| | Go'aaminta Heerka Sicirka Mushaarka ee DOL | | | | |
| | Guudmaryada Bixinta Ka Hor | | | | |
| | Waraaqo Isdhaafsiga Bixinta Ka Hor | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |

## Lifaaqa 8aad. Guddiyada Qiimaynta Farsamo iyo Dib-u-eegista Tartanka Qandaraaska

**Guddiyada Qiimaynta Farsamo iyo Dib-u-eegista Tartanka Qandaraaska**

Dowlad-goboleedka waa in ay u isticmaasho guddiyo farsamo ahaan u-qalma in ay qiimaayaan tartan qandaraas kasta ama soo-jeedinta farsamo. Dowlad-goboleedka waxay dhiirrigelinaysaa khibrada khubaro dibadeed ee ku saabsan wax-soo-iibsiyada waaweyn.

**Xubno Farsamo**

Dhammaan xubnaha ka tirsan guddiga waa in ay farsamo ahaan u-qalmaan in ay dib-u-eegaan oo ay qiimeeyaan nuxurka soo-jeedinada. Waa muhiim in la hubiyo in dhammaan xubnaha ka tirsan guddiga ay dhab ahaan leeyihiin xirfadaha kala duwan ee lagu qiimeynayo dhammaan arrimaha soo-jeedinta (tus. arrimaha deegaanka, bulshada iyo korjoogtaynta iyo qiimaynta), iyo in aan keliya loo adeegayn sida wakiil hay'adeed ama wanaaga xilka ay hayaan. Hase-yeeshee, xubnaha guddiga lama filayo in ay noqdaan khubaro wax-soo-iibsi mana gaari doonaan go'aamada ku saabsan hannaanka wax-soo-iibsiga. Dhammaan xubnaha guddiga waa in ay noqdaan xubno codaynaya. Guddiyada guud ahaan waxay ka kooban yihiin 3 ilaa 5 xubnood oo kuwa farsamada ah, balse tiradooda way kala duwanaan kartaa iyada oo ku xiran noocyada khibradda loogu baahan yahay wax-soo-iibsiga gaarka ah. xaalad kasta, hase-yeeshee, tirada xubnaha farsamo waa in ay si suurtagal ah ula xiriiraan hawsha la hayo. Iyada oo la eegayo danaha sii-socoshada, isla guddiga waa in lagu adeegsado hannaanka xulashada oo dhan.

**Ilaalinta Sirta La Xiriirta**

Magacyada xubnaha guddiga waa in ay noqdaan kuwo sir ah si loo yareeyo suurtagalnimada saameynta aadka ah ee kayaanada tartamaya. Dhammaan macluumaadka soo-jeedinta waa in ay noqotaa mid sir ah waxaana laga yaabaa in aan lala wadaagin qof aan saxiixin Baaqa Sirnimada iyo Dhexdhexaadnimada.

**Iska-horimaadka Danaha Xubnaha Guddiga**

Hannaanka magacaabidda ee guddiga waa in uu hubiyo sidoo kale in xubnaha guddiga aysan hadda, ama hal sano ee la soo dhaafay ka qaybgalin, shaqada kayaanada ku tartamaya. Waxaa siidheer, in xubinka guddiga uusan lahayn dano maaliyadeed ee saameyn kara ka-qaybgalkooda guddiga. Qof kasta ee loo qoray sida hawlwadeen (hawlwadeenka muhiimka ah ama hawlwadeen si gaar ah loogu magacaabay) soo-jeedinta, ama tixgelinaya shaqo suurtagal ah ee ka helo la-taliye tartamaya, xaq uma laha in uu xubin ka noqdo guddiga ee wax-soo-iibsiga la



M.A

xiriira. Xubin kasta ee ka tirsan guddiga, oo ay ka mid yihiin xubno dheeraad ah kasta, Wakiilka Wax-soo-iibsiga, agaasimaha wax-soo-iibsiga iyo korjooge kasta ama qof kasta ee bixinaya macluumaad wax-soo-iibsi oo xasaasi ah waa in uu saxiixo Baaqa Sirnimada iyo Dhexdhexaadnimada iyo in tani lagu diiwaangeliyo warbixinta qiimaynta. (ka eeg tasaale Lifaaqa 2aad ee Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga). Tusaalahan wax ayaa laga beddeli karaa si uu ugu habboonaado macnaha guud ee gaarka ah ee wax-soo-iibsiga, balse waa in uu ilaaliyo canaasiirta muhiimka ah ee baaqa. Waxaa muhiimad sare leh in xubnaha guddiga aysan wax dano maaliyadeed ah aysan ku lahayn natiijada wax-soo-iibsiga, waana mas'uuliyadda Wakiilka Wax-soo-iibsiga si loo hubiyo in dhammaan xubnaha ay fahmaan shuruudan.

**Lacag-bixinada La Siiyo Xubnaha Guddiga**

Shaqaalaha Dowladda guud haan, Dowlad-goboleedka waa in aysan siinin lacag hawlqabad ahaan shaqaalaheeda ama shaqaalaha hay'adaha dowladda. Shaqaalaha dowladda waxaa la siin karaa kharashka ku baxa socdaalka iyo gunnada maalin kasta ee sida tooska ah ula xiriira ka-qaybgalka sida xubin ka tirsan guddiga ahaan, oo ku xiran xaddidaadaha ku qoran Mabaadii'da Kharashka Dowlad-goboleedka ee la adeegsan karo.

Xubnaha Qaybta/Sharikadaha Gaarka Loo Leeyahay. Dowlad-goboleedka waxay siin kartaa ujuuro macquul ah xubnaha qaybta/sharikadaha gaarka loo leeyahay adeegyadooda sida xubin ka tirsan guddiga ahaan, oo ku xiran xaddidaadaha ku qoran Mabaadii'da Kharashka Dowlad-goboleedka ee la adeegsan karo. Xubnaha qaybta/sharikadaha gaarka loo leeyahay waxaa loo soo kiraystaa la-taliyeyaal ahaan iyada oo la raacayo Qaybta 5aad.

**Dib-u-eegista Tartanka Qandaraaska ama Qiimaynta Farsamo**

Marka la qabanayo dib-u-eegista tartanka qandaraaska ama qiimaynta xubnaha guddiga waxay u qabanayaan qiimaynta si waafaqsan shuruudaha qiimaynta ee ku qoran dokumeentiyada tartanka qandaraaska, waxayna bixin doonaan darajooyinka tiro ahaanta ah ee shuruud kasta iyo shuruud hoosaada. Tusaale ahaan: Heer-sare 100 - 92; fiican 91 - 85; lagu qanci karo 84 - iwm.

Heshiis guud ayaa loo adeegsan doonaa in lagu gaaro darajada/guusha ugu dambeysa. Ku saabsan gaaridda heshiiska guud ee gudaha guddiga, guddiga waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay u kulmaan sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka ah ka dib marka la dhammeeyo qiimaynta bilowga ah. Xubnaha guddiga waxaa lagu dhiirrigeliyay in ay ka doodaan macquul ahaanta



M.A

qiimayaashooda iyo fahan kasta oo gaar ah ee soo-jeedimada iyo/ama Shuruudaha Tixraaca (TOR) ee ku darayo aqoonta mid kasta iyo/ama fahanka dadaalka. Waa la ogol yahay in xubnaha guddiga ay bedelaan qiimahooda haddii, iyada oo loo marayo hannaankan soosaaridda, ay aaminaan in ay ku waayeen macluumaad muhiim ah qiimaynta soo-jeedinta.

Doodahan waa madal furan ee u ogolaanaysa xubin kasta ee ka tirsan guddiga in uu xooga saaro sida xubnaha kale ee guddiga ee la mid ah ay u gaaraan go'aanka qiimaynta. Arrimahaan waxay caawimo ka geysanayaan oo ay taageerayaan (iyada oo loo marayo hab sheeko) fikrad la isku raaco oo khusaysa mudnaanta farsamo, awoodaha, iyo itaaldarrada/daciifnimada soo-jeedin kasta oo ku saleysan arrimaha qiimaynta ee ku qoran dokumeentiyada tartanka qandaraaska. Iyada oo sabab u ah doodahan waa in xubin ka tirsan guddigan aan lagu cadaadinin in uu beddelo qiimayn ama faallo, balse sidoo kale in uu garto in xubin guddi kasta uu xor u yahay in uu beddelo qiimayn ama faallo hore kasta ee isaga ama iyada ay qoondeeyeen oo ku saleysan doodan/munaaqashadan. Qiimaynta guddiga ee ugu dambaysa waxaa laga yaabaa in aysan had iyo jeer ka turjumin qiimaynta "dhexdhexaad", balse waa in ay ka turjumaan qiimayn lagu heshiiyay iyada oo loo marayo munaaqashadaan la isku raacay.

**Warbixinta Dib-u-eegista Tartanka Qandaraaska ama Qiimaynta Farsamo**

Marka uu dhammaado hannaanka qiimaynta, Dowlad-goboleedka waa in ay diyaariso warbixin diiwaangelinaysa natiijooyinka hannaanka qiimaynta iyo, haddii loogu baahan yahay shuruudaha ansixinta (Lifaaqa 1aad) u soo gudbi warbixinta Dowlad-goboleedka si ay dib-u-eegis ugu sameyso oo ay u ansixiso. Warbixinta waa in ay keento xaqiiqda qiimaynta waana in ay sharaxdo awoodaha yaryar/waaweyn ee la xiriira iyo itaaldarrada yaryar/waaweyn ee soo-jeedimada. Dhammaan diiwaanada la xiriira qiimaynta, sida xaashiyada dhibcaha darajada shaqsi, waa in uu hayo Agaasimaha Wax-soo-iibsiga.

- Tilmaantan waxa ay dhaqangaleysaa taariikhda la soo saarey ee ah 31/03/2018

**Mud. Maxamed Maxamud Cabdulle**
Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Dowlad Goboleedka Soomaaliyeed ee Hirshabeele

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE
XAFIISKA WASIIRKA MAALIYADDA
HIRSHABELLE STATE OF SOMALIA
OFFICE OF MINISTRY OF FINANCE